XISAAB

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 3aad

ISBN 978-99944-2-188-6

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADA WAXBARASHADA

Birr 47.60

XISAAB BUUGGA ARDAYGA Fasalka 3aad

XISAAB

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 3aad

×	1	2	3	4	5	6	7
100				400			
200					1000		
300							2100
400							
500	500						
600						3600	
800		1600					
900			2700				



JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOBIYA
WASAARADA WAXBARASHADA

Buuggan Ilaali oo daryeel



Buuggani waa hantida Dugsigiina

Daryeel si aynan waxyeelo u gaadhin ama u lumen Hoos waxa kuxusan 10 fikradood oo ah talooyin kaa caawinaya sidaad buugga u ilaa linaysid una daryeelaysid.

1. Buugga ku jaldiyee jaldi ku haboon dhawrista sida Balaastiga waraqad adag sida magaasinada la akhristoy.
2. Markasta meeshaad buuga dhigaysaa waa in ay ahaataa meel nadiif ah oo engagan.
3. Buugga marka aad isticmaalaysid waa in ay gacmahaagu nadiif ahaadaan.
4. Waxna ha ku qorin buugga jaldigiisa ama boggaga dhaxdiisa.
5. Isticmaal waraaqad yar ama kaardi yar markaad bog calaamadaysanaysid.
6. Waligaa ha ka jeexin ama haka gooynin sawir ama bog.
7. Boggaga jeexma ku kab. Xabag ama balastar.
8. Buugga markaad dugsiga u qaadanaysid boorsada ama shayga aad ku qaadanaysid qumaati u dhaxdhig si uunan u jacdadin ama u jajabin.
9. Buugga markaad qof kale u dhibaysid si taxadar leh ugu dhiib.
10. Buugga cusub marka ugu horeysa ee aad isticmaalkiisa bilaabaysid dhinicisa ay boggagiisa u dan beeya ay ku yaaliin u jiifi kadibna markiiba dhawr bog fur ama bannee. Marka aad bog rogaysid, Cidhifka uu ka taxan yahay gacanta kale ku yar xaji. sidaasina daryeelka jaldiga buugga ayey u wanaagsan tahay.

XISAAB

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 3^AAD

Qoraha

Daa'ud Aadam Cabdulaahi

Qiimeeyayaal

Axmed Saalax Nuur

Axmed Yuusuf Nuur

Sayid Cismaan Caateeye

Jumhuriyada Dimoqraadiga Fadaraalka Itoobiya

Wasaarada Waxbarashada

Buugga waxa la daabacay 2002 E.C, Dajinta iyo soo saaridda buuggan waxa fuliyay wasaarada waxbarashada ee jumhuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qoodista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jumhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka. No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuritada Dimoqraaidiga Federaalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb galay daabicista iyo soo bixitaanka buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka lookiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo. Adiss Ababa Itoobiya.

Developed and Printed by

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

and

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09.

ISBN 978-99944-2-188- 6

Tusmada buugga

CUTUBKA 1

TIRYOOYINKA IDIL ILAA 10,000 IYO HORSANAANTOODA 1

1.1 Nakhtiinka Tiryooyinka Idil ilaa 1000 1

1.2 Nakhtiinka xisaab Fallada Tirooyink Idil ilaa 100 13

1.3 Dhufsanayaasha 100 iyo 1000 ilaa 10,000 19

1.4 Tirooyinka Idil ilaa 10,000 25

1.5 Isbarbar-dhigidda iyo Horsanaanta Tirooyinka Idil ilaa 10,000 32

CUTUBKA 2

CABBIRAADDA 35

2.1 CABBIRAADA DHERERKA 35

2.2 Cabbiraadda Dareeraha oo lagu Cabbirayo MILLILITIR (ml) iyo Litir (l) 41

2.3 Cabbiraada Culayska oo lagu cabbirayo garaam (g) kiilog-araam (kg) iyo kiintaal 43

CUTUBKA 3

BARASHADA JAJABYADA 46

3.1 Nakhtiinka saddex meloodyada (Saddex qayboodyada saddexdalloolada) 46

3.2 Jajab halleedyada $\frac{1}{2}$ ilaa $\frac{1}{10}$ 47

3.3 Nusaska (nusyada) iyo Rubucyada tirooyinka Idil 49

3.4 Isbarbardhigidda jajabyada fudud 51

CUTUBKA 4

ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000 53

4.1 Isugeynta Tirooyinka Idil Ilaa 10,000 53

4.2 Kalagoynta Tirooyinka Idil Ilaa 10,000 69

4.3 Weedh xisaabeedyada ah isugeynta iyo kalagoynta 76

CUTUBKA 5

ISKUDHUFASHADA IYO ISUQAYBINTA TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000 81

5.1 Iskudufashada Dhufsanayaasha 100 iyo tirooyinka 1-god (hal-astiro) ah 81

5.2 Iskudhufashad dhufsanayaasha 1000 iyo tiro 1-god hal-astiro ah..... 85

5.3 Iskudhufashada Tirooyinka Idil iyo Tiro 1-god ah oo tarantoo-du ka yar tahay 10,000 87

5.4 Isuqaybinta dhufsanayaasha 10 iyo kuwa 100 ee ilaa 10,000 oo loo qaybinayo tiro 1-godan iyo tirada 10 98

5.5 Isuqaybinta tirooyinka idil ilaa 10,000 oo loo qaybinayo tirooyinka min 1 -god ah ee aan hadhaaga lahayn iyo had-haaga lehba 102

CUTUBKA 6

XARRIIQAHA IYO SHAXANNADA KALE EE FUDUD 112

6.1 Xarriiqha isgooya, xarriiqaha barbarrada ah iyo xariiqaba isku qotma 112

6.2 Dhisidda xariiqo barbarro ah xariiqo isgooyayaal ah iyo xari-iqo iskuqotoma 115

6.3 Laydi, labaJibbaarane, barbaroole iyo koor (tiraabi-isam) 124

6.4 Goobo..... 130

CUTUBKA 7

LACAGTA 134

7.1 Isku bedelidda Halbeegyada lacagta (Sarrifaada lacagta) 134

7.2 Weedh-xasaabedyo la xidhiidha lacagteena 138

CUTUBKA 8

WAQTIGA (AMMINTA) 143

8.1 Akhrinta Saacaddaha 140

8.2 Saacad Iyo Daqiiqad 143

8.3 Maalmaha, Todobaadyada Bilaha iyo Sanaddaha 144

8.4 Kalaandarka fudud 145

CUTUBKA 9

URURINTA IYO HABAYNTA XOGAHA 147

9.1 Garaafi-Sawireed Fudud 147

9.2 Sharraxidda (macnaynta ama tarjumida) garaaf-sawireedy-ada fudud 150

Cutubka

1 aad



TIRYOOYINKA IDIL ILAA 10,000 IYO HORSANAANTOODA

1.1 Nakhtiinka Tiryooyinka Idil ilaa 1000

1.1.1 Tirooyinka Idil ee 2-God (laba astiro)ah.

Tobnaad iyo Koowaadka



Hawlgalka 1.1

1 Imisa tobnaad iyo imisa koowaad ayaa hoostan ku xusan? (ku muujisan?)



_____tobnaad _____koowaad

30 + 5 = 35

2 Su'aasha tirada idil ee aad qorteen shaxda qiima-rugeedka tirooyinka ku muujiya.

Godka tobnaadka	Godka koowaadka	
		35
Soddon iyo shan		

Laylis 1

1 Tirooyinka erayada lagu qoray astiro ku qora

b Lix tobano iyo saddex koowaad
t Siddeetan iyo toddoba
j Shan tobano iyo laba koowaad
x Toddoba tobno

2 Tirooyinkan hoos ku qoran erayo ku qora

b 74 **t** 47 **j** 19 **x** 97 **kh** 66

3 Meelaha bannaan buuxiya.

b 48 = _____ Tobnaad iyo _____ koowaad
t 99 = _____ Tobnaad iyo _____ koowaad
j 75 = _____ Tobnaad iyo _____ koowaad

4 Tirooyinkan hoose godka (astiraha) hoosta laga xariiqay qiima-rugeedkiisa sheeg

b 4<u>8</u> **t** <u>7</u>9 **j** <u>6</u>6

5 Tirooyinkan soo socda mid kastaba u qor Isugeyn ka kooban tiro dhufsanaha 10 ah iyo tiro hal god ah.

b 47 **t** 66

Tusaale

24 = 20 + 4

20 waa tiro ah dhufsanaha 10

4 waa tiro hal god ah

b 47 **t** 52 **j** 29 **x** 79

6 Tirooyinka soo socda u bedala tiro idil oo 2-god ah.

b 40 + 9 **t** 60 + 5 **j** 70 + 7

1.1.2 Boqolada, Tobanada iyo Koowaadka





Hawlgalka 1.1

1 Imisa boqolo (boqlaad), tobano iyo koowaadyo ayey sawiradu tilmaamayaan.



_____boqolaa _____tobnaad _____koowaado

300 + 40 + 5 = 345

2 Korka tirada aad ku qorteen ku muujiya shaxda qiima-rugeedka tirooyinka

Godka boqlaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka	
			345
Saddex boqol afartan iyo shan			

Laylis 2

Sawiradu ama erayadu tirada ay u dhigmaan goobaaba.

1



223 323 332

2



241 421 412

3



434 533 353

4



455 445 545

5 Shan boqol afartan iyo laba

524 542 452

6 Lix boqol iyo siddeetau iyo afartan

864 648 684



U fiirsada abaakaska dhinaca bidixda ku yaala.

Abakasku wuxuu tilmaamayaa 2 boqlaad 5 tobnaad 3 koowaad marka si fidsan loo qoro waa 200 + 50 + 3

Hawlgalka 1.2

Abaakasyada dushooda tirooyinka ku xusan gooba tirada u dhiganta.

b



539 359 935

t



841 148 481

j



220 22 202

Laylis 3

b *Abaaskaska dusheeda tirada lagu muujiyey goobaaba (gooba galiya).*

1



365 653 563

2



205 520 502

3



799 997 979

t *tirada saxda ah ee u dhiganta goobaaba.*

1 4 booqlaad 6 tobnaad 7 koowaad

467 764 476

2 3 boqlaad 2 tobnaad 5 koowaad

235 352 325

3 5 boqlaad 4 tobnaad 0 koowaad

540 450 405

4 400 + 70 + 4

447 474 744

5 600 + 50 + 9

659 596 956

6 800 + 4

840 408 804

1.1.3 Qorista tirooyinka idil ilaa 1000

Jigjiga iyo Qabridahar fogaanta u dhexeeya waa afar boqal iyo soddon iyo laba km.

Hawlgalka 1.3

Tirada korka lagu soo sheegay ee fogaanta imisa boqlaad, tobnaad, koowaad ayay ka kooban tahay??

Tiradan ku muuji shaxda qiima-rugeedka ee tirooyinka.




_____Boqlaad _____Tobnaad _____Koowaad

_____ + _____ + _____ = 432

Afar boqol soddon iyo laba.

Laylis 4

Tiro 3 god ah oo u dhiganta tirada sawirada lagu muujiyey qora.

1




Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
_____	_____	_____

= _____.

2




Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
_____	_____	_____

= _____.

3




Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
_____	_____	_____

= _____.

4




Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
_____	_____	_____

= _____.

5



Boqlaad___	Tobnaad_	Koowaad
	____	_____

= _____.

6



Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
_____	_____	_____

= _____.

7



Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
_____	_____	_____

= _____.

8



Boqlaad	Tobnaal	Koowaad
_____	_____	_____

= _____.

Tiro 3-god(saddex-astiroole) ah oo u dhiganta tirada hoos ku tilmaaman qora

9 5 boqolaad 2 tobnaad 4 koowaad

10 9 qobolaad 3 tabnaad 2 koowaad

11 2 boqolaad 8 tobnaad 1 koowaad

12 7 boqolaad 3 tabnaad

13 Saddex boqol toban ayo toddoba

14 siddeed boqol iyo afar

15 400 + 60 + 5

16 900 + 30 + 9

17 Toddoba boqol sodon iyo sided

18 shan boqol iyo afar

19 Afar boqol iyo toddobaatan

20 siddeed boqol lixdaniyo shan

21 Sagaal boqol sagaashan iyo lagaal

22 shan boqol iyo laba iyo lixdan

Tirooyinkan soo socda erayo ku qora.

23	469	**24**	206	**25**	985	**26**	324
27	719	**28**	615	**29**	916	**30**	740

Shaxdan hoos lagu muujiyey eeg oo magaala kasta inta ay Addis Ababa ka fogta-hay qora Idinka oo si fidsan u qoraya

31 Jigjiga 652 = 600 + 50 + 2

32 Matama

33 Maqamle

34 Laangaano

35 Goday

Magaca Magaalada	Fogaansha ha (km) ay Addis Ababa u Jirto
Jigjiga	652
Matama	628
Naqamte	328
Laagaano	212
Goday	954

1.1.4 Kahoreeye iyo ka dambeeye

Tusaale

b sheeg tirada 457 ka horaysa ee hal ka yar.

t sheeg tirada 457 ka dambaysa ee hal ka weyn.

Jawaab

b Tirada 457 ka horaysa ee 1 ka yar waa tirada 456

t Tirada 457 ka dambaysa (ama ku xigta) ee 1 ka weyn waa 458 waayo 458 = 457 + 1

Tira kasta oo idil 'b' oo ka duwan eber b – 1 waa tirada ka horaysa b waxaana la yidhaah ka horeeye. b + 1 waa tirada ka dambaysa b waxaana la yidhaahda ka dambeeye.

Hawlgalka 1.4

Idinka oo adeegsanaya xarrigda, tirada ka jawaaba weydiimahan hoose.



1 Ka horeeyaha 74 waa _____

2 Ka dambeeyaha 74 waa _____

3 Ka horeeyaha 74 ee ah dhufsanaha 10 waa _____

4 Ka danbeeyaha 74 ee ah dhufsanaha 10 waa _____

5 Ka horeeyaha 106 waa _____

6 Ka dambeeyaha 106 waa _____

7 Ka horeeyaha 106 ee ah dhufsanaha 10 waa _____

8 Ka dambeeyaha 106 ee ah dhufsanaha 10 waa _____

Laylis 5

1 *Shaxahan hoose buugtiina ku roga. Ka dibna meelaha bannaan ku buuxiya tirada la idin siiyey ka horeeyaheeda iyo ka dambeeyaheeda*

b		127		t	243
j		569		x	849
kh		347		d	600
r		898		s	999

2 *Shaxahan hoose buugagtiina ku roga. Ka dibna meelaha bannaan ku buuxiya tirada la idin siiyey ka horeeyaheeda ee ah dhufsanaha 10 iyo ka danbeeya-heeda ah dhufsanaha 10.*

b		44		t	125
j		65		x	647
kh		89		d	833

3 *Shaxahan hoose bugaagtiina ku roga. Dabadeedna meelaha banana buuxiya.*

b	701	702		704			
t	468	469					

j			155	156			
x		340	341				
kh	20	30					80
d	750	760					810

4 *Shaxdan hoose inta ad buugagtiina ku rogtiin buuxiya meelaha bannaan*

	Tiro idil	Ka horeeye	Ka dambeeye	Ka horeeyaha ah dhufsanaha 10	Ka dambeeyaha ah dhufsanaha 10
b	342				
t	409				
j	725				
x		612			
kh			248		

1.1.5 Isbarbardhigidda iyo Horsanaanta Tirooyinka Idil ilaa 1000

B Isbarbardhigidda

Tusaale 1

Degmo ku taala Deegaaka Somalida xoolaha ay leeyihiin waxa la ogaaday in 572 ay geel yihiin, 539na ay lo' yihiin. Degmadu xoolaha ay leedahay geela iyo loda midkee badan.

Xoolaha kuwa badan Isbarbardhig ayaan ku heli karnaa 572 iyo 539 marka aan isbarbardhigayno, marka u horaysa waxaan isbarbardhigaynaa boqlaadada. Boqlaadadu haddii ay isle'eg yhiin, haddana waxaan isbarbardhigaynaa tobnaadka. Tobanadu iyaguna haddii ay isle'eg yihiin waxaan isbarbardhigaynaa koowaadka.

Labada tirooyin 572 iyo 539 labaduba waxay leeyihiin 5 boqolaad. Hase yeeshee 572 waxay leedahay 7 tobnaad 539 na waxay leedahay 3 tobnaad.

Sidaas darteed 572 way ka weyn tahay 539. Anaga oo adeegsanayna astirada ismale'egta ('>' '<') waxaan u qori karnaa.

$572 > 539$ ama $539 < 572$

Sidaas awgeed degmadu xoolaha ay leedahay geela ayaa ugu badan

Tusaale 2

Labada tiro ee lagu siiyey dhexdooda gali “>” ama “<”

b 372 _____95 **t** 476 _____471

j 698 _____713

Jawaab

b 95 boqolo malaha

372 waxay leedahay 3 boqlaad

Sidaas darteed 372 way ka weyn tahay 95 sidaasdarteed 372 > 95

t Labada tiro 476 iyo 471 labaduba 4 boqolo ayey leeyihiin.

Taa ka sakaw labaduba waxay leeyhiin 7 tobnaad

476 waxay leedahay 6 koowaad hase yeeshee 471 waxay leedahay 1 koowaad.

Sidaas darteed 476 > 471

j 698 waxay leedahay 6 boqlaad (600)

713 waxay leedahay 7 boqlaad (700)

Maadaama ay 6 boqlaad ka yar tahay 7 boqlaad wax inoo cad in 698 ay ka Yar tahay 713

Sidaas darteed 698 < 713

Laylis 6

Labada Tiro ee la idin siiyey dhexdooda galiya (‘>’ ama ‘<’ ama ‘=’) midda ku haboon

1	600 ◯ 300	**2**	200 ◯ 500	**3**	101 ◯ 105
4	426 ◯ 941	**5**	684 ◯ 674	**6**	554 ◯ 550
7	726 ◯ 789	**8**	674 ◯ 695	**9**	817 ◯ 917
10	403 ◯ 503	**11**	396 ◯ 377	**12**	381 ◯ 391

T Horsanaanta (isku daba tixidda siday u kala waaweyn yihiin ama u kala yar yihiin)

Tusaale 3

Shaxda hoostan lagu qoray waxay tilmaamaysaa magaalooyinku inta kiloomitir ee ay JigJiga u jiraan. Haddaba adiga oo kaga bilaabaya magalada Jigjiga ugu dhaw sida u fogaansha hoodu u kala yar yahay u qor.

Magaca Magaalada	Fogaanshaha (kilometer) ee ay JigJiga u jirto
Dhagaxbuur	213
Goday	512
Qabridahar	315
Shiniile	311

Tirooyinku siday u kala yar yihiin si aan isugu daba taxno waa in aan laba laba inta an u qaadno aan isbarbardhignaa.

213, 512, 315, 311

213 < 311 311 < 315 315 < 512

Dabadeedna weedhahan dheeliga ah ayaan sidan isugu daba taxaynaa

213 < 311 < 315 < 512

Taas oo inoo surtagalinaysa in an tirooyinka horsanaan u qorno (ta yar ilaa ta weyn)

213, 311, 315, 512.

Sidaas darteed iyada oo lagu salaynayo foogaanta (ta yar ilaa ta weyn) ayaa magaalooyinka sidan hoose loo qori karaa.

Dhagaxbuur, shiniile, Qabridahar, Goday.

Laylis 7

1 ***Tirooyinka hoos lagu muujiyey ta ugu yar idinka oo kaga bilaabaya horsonaan u qora.***

b 35, 26, 39, 21

t 258, 250, 227

j 624, 696, 623, 641

x 396, 589, 428, 598

kh 151, 146, 17, 306

2 *Tirooyinkan soo socda ka ugu weyn ka bilaaba oo ilaa ka ugu yar sida ay u kala yar yhiin isugu taxa oo qora.*

b	9, 15, 27, 32	**t**	515, 501, 526, 561
j	547, 66, 395, 709	**x**	103, 109, 105, 112
kh	786, 780, 784, 782		

3 *Xarfuhu tirooyinka idil ee ay u taagan yihiin dhamaantood wada qora.*

b	$484 < a < 491$	**t**	$119 < a < 127$
j	$459 < a < 468$	**x**	$212 < b < 227$
kh	$323 < b < 333$	**d**	$405 < b < 411$

1.2 Nakhtiinkaxisaab Fallada Tirooyinkidil ilaa 100

1.2.1 Isugeynta tirooyinka idil ee 2-God (astiroole) ah

Tusaale 1

Fasalka saddexaad ardayda ku jirta waxay ka kooban yihiin 24 wiil iyo 25 gabdhood. Fasalka ardaydda ku jirtaa dhammaantood waa imisa?

Furfuris

Ardayda fasalka ku Jirta Dhammaantood inta ay yihiin si aan u garano. Waxaan isugaynayna tirada wiilasha iyo tirada gabdhaha.

Marka u horaysa waxaan isugaynayna-koo waadada	Dabdeed waxaan isugaynaynaa tobnaadada
24 + **25** **9** 4 + 5 = 9	**24** + **25** **49** 2 + 2 = 4

Sidaas darteed fasalka ardayda ku Jirtaa waa 49.

24 + 25 = 49 xisaabfalkan isugaynta ah 24 iyo 25 waxa la yidhaahdaa **Biirooyin** 49 na waxa la yidhahdaa **wadar**

Tusaale 2

Isugayn leh tiro qaadasho (haysasho).

Raadi wadarta 48 + 26

Marka u horaysa isugee koowaadka	Ka dib na tobnaadka isugee
1 48 + 26 4 8 + 6 = 14 14 koowaad waa 1 tobnaad iyo 4 koowaad. 4ta intaad qortid 1 ka qaad oo tobnaadka u gee.	1 48 + 26 74 1 + 4 + 2 = 7 1 kii tobnaad ee aad soo qaaday iyo tobnaadada isugee

Laylis 8

Isugee

1 36 +41	2 49 +50	3 56 +18	4 72 +16	5 49 +26
6 78 + 5	7 60 +78	8 34 +36	9 58 +31	10 77 +29

Weedh-xisaabeedyo (Maasalooyin)

11 Fasalka labaad ee dugsiga ardayda ku jirta 42 waa gabdho 45 na waa inamo. Fasalka ardayda ku Jirtaa dhammaantoodu waa imisa?

12 Dugsi barayaasha ka dhiga 28 waa rag 14 na waa dumar. Dugsiga barayaasha ka dhigta dhammaatood waa amisa?

1.2.2 Kalagoynta Tirooyinka idil ee 2 – God ah.

Tusaale:

Fasal tirada ardayda ku jirtaa waxay dhan tahay 58. Fasalka ardayda ku Jirtaa 24 haddii ay inamo yihiin, tirada ardayda gabdhuhu waa imisa?

Furfuris:

Si aan u garano tirada ardayda gabdhaha tirada guud ee ardayda ayaan ka goynayna tirada inamada.

Ugu horaysta kalagoo koowaadada (tirooyinka ku yaala godka koowaadka) 8 – 4 = 4	Kadibna kalagoo tobnaadada (tirooyinka ku yaala godka tobnaadka) 5 – 2 = 3
58 – 24 4	58 – 24 34

Sidaas darteed tirada ardayda gabdhaha ee fasalka ku Jiraa waa 34.

U fiirso

58 – 24 = 34 xisaab falkan ee kalagoynta dhexdeeda 58 waxa la yidhaahadau **laga gooye,** 24 waa **goosane (la gooye),** 34 waa **Faraq.**

Laylis 9 (Su'aalo dheeraad ah)

Ka shaqeeya xisaabfalada soo socda (u fiirsada astooyinka xisaafalada).

1 12 +35	**2** 20 +40	**3** 73 +26	**4** 44 – 22	**5** 85 – 4
6 37 –22	**7** 41 –30	**8** 77 – 65	**9** 40 – 20	**10** 45 –14
11 84 –39	**12** 36 – 16	**13** 55 – 38	**14** 79 – 25	**15** 54 + 55
16 17 – 9	**17** 35 –18	**18** 61 –33	**19** 94 – 25	**20** 63 +36

Idinka oo adeegsanaya shaxdan hoosta dhinaca midig ku taala ka jawaab weydiimaha 21 ilaa 25.

21 Fasalka 3b ardayda ku jirtaa waa imisa?

22 Fasalka 3t ardayda ku Jirtaa waa imisa?

23 Fasalka 3b tirada ardayda wiilashu imisa ayey ka badan tahay tirada ardayda gabdhaha?

Dugsi dhexdiisa tirada ardayda fasalka 3aad

Fasal	3B	3T
Wiilal	32	25
Gabdho	27	30

24 Tirada ardayda gabdaha ee fasalka 3B imise ayey ka yar tahay tirada ardayda gabdha ha ee fasalka 3t?

25 Fasalkee arday badan leh? Faraqu u dhexeeya waa imisa?

Idinka oo tix racaya amarka buuxiya shaxanadan soo socda.

26

15 u gee tirada	
24	
36	
75	
84	

27

47 u gee tirada	
20	
12	
37	
47	

28

49 u gee tirada	
59	
60	
93	
99	

29

58 u gee tirada	
75	
86	
65	
84	

1.2.3 Iskudhufashada Tiro idil oo laba-god ah iyo tiro kaloo idil oo hal-god ah.

Tusalee 1

Hal sano waxay leedahay 12 bilood, 3 sanaddod imisa bilood ayey leeyihiin

$3 \times 12 = \square_{o}$

ugu horaysta 3 waxaan ku dhufanaynaa koowaadyada	Ka dibna 3 waxaan kudhufanaynaa tobnaadka
12 $\times$ **3** **6** $3 \times 2 = 6$	**12** $\times$ **3** **36** $3 \times 1 = 3$

Sidaas darteed $3 \times 12 = 36$

U fiirsada:

xisaabfalka iskudhufashada 3 × 12 = 36 dhexdeeda tirada 36 waxa layidhaa taran 3daa iyo 12 ka waxa la yidhaahdaa isiro (ama badiyayaal).

Tusalee 2

Iskudhufo

3 × 24 = □

1 **24** × **3** **2** 3 × 4 = 12	Marka ugu horaysa waxaan ku bilaabaynaa oo aan 3da ku dhufanaynaa koowaadka. 3 jeer oo min 4 koowaad waa 12. 12 koowaad waa 1 toban iyo 2 koowaad. 2 da inta aan ku qorno godka koowaadka ayaan 1 ka toban qaadaynaa.
1 **24** × **3** **72** 3 × 2 = 6 6 + 1 = 7	Ka dib 3 da waxaan ku dhufanaynaa tobnaadka. 3 jeer oo min 2 tobnaad waa 6 tobnaad. 6 da tobnaad iyo 1 kii tobnaad ee aan soo qaadnay ayaan isugaynaynaa 6 +1 = 7. 7 da waxaan ku qoraynaa godka-tobnaadka.

Tusaale 3

2 **34** × **7** **238**	7 × 4 = 28 28 = 2 tobnaad iyo 8 koowaad sidaas darteed 8da inta aan godka koowaadka ku qorano ayaan 2 da qaadaynaa 7 × 3 = 21 tobnaad. Kadib 21 + 2 = 23.

Laylis 10

Iskudhufda

1 31 × 2	**2** 34 × 3	**3** 40 × 2	**4** 12 × 8	**5** 25 × 3
6 13 × 5	**7** 41 × 5	**8** 43 × 7	**9** 83 × 9	**10** 42 × 6

Ka shaqee weedh xisaabeedyadan soo socda.

11 Cumar maalin kasta wuxuu shaqeeyaa 8 saac Immisa saacadood ayuu 7 maal-mood shaqeyn?

12 Muuse wuxuu iibsaday 4 shaadh. Hal shaadh qiimihiisu waa 28 Birr. Muuse imisa Birr ayuu dhammaan bixiyey.

1.2.4 Isuqaybinta tiro idil oo laba-godle ah iyo tiro kaloo idil oo hal-godle ah

Tusaale 1

Ka shaqee xisaabfalkan isuqaybinta

$54 \div 6 = \square$

Fiiri $6 \times 9 = 54$

Sidaas darteed $54 \div 6 = 9$

Xusuusin

weedha isuqaybinta $54 \div 6 = 9$ dhaxeeda

→ 54 waa laqaybshe

→ 6 waa qaybshe

→ 9 waa qayb

Tusaale 2

ka shaqee $7\overline{)49}^{\,7}$

Fiiri: $7 \times 7 = 49$ sidaas darteed $49 \div 7 = 7$

Laylis 11

Xisaabfalka isuqaybinta ka shaqeeya

1	$21 \div 7$	**2**	$36 \div 4$	**3**	$30 \div 6$	**4**	$12 \div 4$
5	$28 \div 4$	**6**	$40 \div 5$	**7**	$48 \div 8$	**8**	$25 \div 5$
9	$3\overline{)9}$	**10**	$3\overline{)15}$	**11**	$7\overline{)42}$	**12**	$6\overline{)54}$
13	$4\overline{)32}$	**14**	$9\overline{)54}$	**15**	$8\overline{)64}$	**16**	$9\overline{)63}$

Ka shaqee weedh xisaabeedyadan soo socda

17 Awr kasta afar haamood oo caana ah ayaa lagu raari karaa. 36 haamood imisa Awr ayey u baahan tahay?

18 Qof bukaan ah ayuu dhakhtarku u qoray 35 kiniin inuu maalin kasta 5 kiniin qaato. Imisa malmood ayuu bukaanku ku dhammayn kiniinka?

1.3 Dhufsanayaasha 100 iyo 1000 ilaa 10,000

1.3.1 Dhufsanayaasha 100 ilaa 10,000

Tusaale 1

Hal kiintaal oo galley ah culayskeedu waa 100 kg saddex kiintaal oo galley ah culayskoodu waa imisa?

1 kiintaal = 1 boqol oo kg = 1 × 100 kg
=100 kg

2 kiintaal = 2 boqol oo kg = 2 × 100 kg
= 200 kg



3 kiintaal = 3 boqol oo kg = 300 kg

Sidaas darteed 3 kintaal oo galley ah culayskoodu waa 300 kg.

U fiirsada

100 marka lagu dhufto tiro kale oo ka duwan eber '0' tarantu waa tiradii oo xaga hore laga raaciyey laba eber (00)

- 14 boqlaad = 14 × 100 = 1400 [kun iyo afar boqol]
- 30 boqlaad = 30 × 100 = 3000 [saddex kun]

Faahfaahinta kor lagu dhigay waxay inoo cadaynaysaa in tirooyinka.

100, 200, 300, 1400, 3000 … ay yihiin dhufsanayaasha 100.

U fiirsada

Waxayna taasi ka dhigan tahay in Dhufsanayaasha boqol godadkooda koowaadku iyo tobnaadku ay ebro yihiin.

Laylis 12

1 *Astiro ku qora*

b 8 boqlaad

t 10 boqlaad

j 14 boqlaad

x 26 boqlaad

kh 64 boqlaad

d 80 boqlaad

2 *Mid kasta tirada u dhiganta qora*

b 6×100

t 15×100

j 40×100

x 58×100

kh 70×100

d 81×100

3 *Shaxda buugagtiinaxisaabta inta aad ku rogtaan tirooyinka dhufsanayaasha 100 ee ka maqan ku buuxiya.*

100	200	300						900	1000
1100	1200			1500					
	2200								
					3600				
			5400						6000
					6600				
						8700			
		9300							10000

4 *Shaxanada buugagtiina inta aad ku rogtaan boqol boqol idinka oo u tiriinaya meelaha bannaan ku buuxiya dhufsanayaasha boqol.*

b	200	300		500	600	
t	800		1000	1100		
j	4000	4100			4400	

x	9200		9400			
kh		7700		7900		
d	9500					10000

5 ***Meelaha bannaan ku buuxiya tirada la idin siiyey ka horeeyaheeda iyo ka danbeeya heeda oo labaduba ah dhufsanayaasha 100.***

b		244	
j		812	
kh		761	
r		6000	
sh		9900	

t		315	
x		5100	
d		8500	
s		600	

6 ***Dhuftanayasha boqol ee la idin siiyey u qora 100 iyo tiro kale oo la isku dhuftay.***

b 400 = 4 × 100 t 600 j 3200

x 2100 kh 1300 d 3000

7 ***Tirooyinka soo socda mid kastaba inta boqol ay tahay sheeg oo qor.***

b 1300 toban iyo saddex boqol (ama saddex iyo toban boqol).

t 500 j 1900 x 2000

kh 7100 d 6800

8 ***Tirooyinka soo socda erayo ku qora.***

b 1300 hal kun iyo saddex boqol.

t 600 j 1900 x 2200

kh 800 d 5200 r 4200

9 ***Shaxanadan soo socda mid kasta amarkeeda idinka oo raacaya buuxiya.***

b

100 ku dhufo tirada	
8	
7	
11	
24	
67	

t

Raadi oo qor taranta	
20 × 100	
35 × 100	
94 × 100	
70 × 100	
97 × 100	

j

Tirada lagu siiyey Ka horeeyaheeda ah dhufsanaha 100 qor	
300	
600	
1200	
3700	
5000	

x

Ka danbeeyaha tirada ee ah ah dhufsanaha 100 qor	
500	
7200	
8000	
9100	
6900	

10 ***Ka shaqee weedh xisaabyadan soo socda***

b Dad degmo ku nool ayaa ku heshiiyey in ay lacag iska ururiyaan si ay iskaga bixiyaan kharashka la xidhiidha ceel biyo ah qodistiisa. Waxayna ku heshiiyeen in qoys kastaa bixiyo 100 Birr. Degmada tirada qoysaska ku nooli haddii ay tahay 48 dhammaan inta birr ay iska ururiyeeni waa imsa?

t 13 Birr imisa saanti ayey noqon?

1.3.2 Dhufsanayaasha 1,000 ilaa 10,000

Hawlgalka 1.5

Gaadhiga xamuulka (rarka) halkiisa shaag qiimihiisu waa 1000 birr. 4 shaag qiimahoodu waa imisa?





Qiima = 1000 Birr

Qiimaha hal shaag = 1 × 1000 = 1,000

2 shaag qiimahoodu = 2 × 1000 = _____.

3 shaag qiimahoodu = 3 × ____ = _____.

4 shaag qiimahoodu = _ × ____ = _____.

Sidaas darteed qiimaha 4 shaag waa _____ Birr.

U fiirsada

6 kunaad = 6 × 1000 = 6000 (Lix kun)

Waxay taasi inoo cadaynaysaa oo aan ku fahmaynaa in tirooyinka

1,000 , 2,000 , 3,000 , 4,000, 5,000 , 6,000 … ay yihiin dhufsanayaasha 1000

U fiirsada

1000 marka lagu dhufto tiro kale oo ka duwan eber '0' tarantu waa tiradii oo xaga hore laga raaciyay saddex ebero (000)

Laylis 13

B *Astiro ku qora*

1	5 kunaad	**2**	3 kunaad	**3**	8 kunaad
4	2 kunaad	**5**	4 kunaad	**6**	sagaal kun
7	9 × 1000	**8**	3 × 1000	**9**	1 × 1000
10	6 × 1000	**11**	7 × 1000	**12**	10 × 1000

T Shaxdan hoose buugtiina u guuriya. Ka dibna tirooyinka ah dhufsanayaasha 1000 goobaba.

100	200	300	400	500	600	700	800	900
1000	1100	1200	1300	1400	1500	1600	1700	1800
1900	2000	2100	2200	2300	2400	2500	2600	2700
2800	2900	3000	3100	3200	3300	3400	3500	3600
3700	3800	3900	4000	4100	4200	4300	4400	4500
4600	4700	4800	4900	5000	5100	5200	5300	5400
5500	5600	5700	5800	5900	6000	6100	6200	6300
6400	6500	6600	6700	6800	6900	7000	7100	7200
7300	7400	7500	7600	7700	7800	7900	8000	8100
8200	8300	8400	8500	8600	8700	8800	8900	9000
9100	9200	9300	9400	9500	9600	9700	9800	9900

J 1 kun idinka oo ku tirinaya meelaha bannaan ku buuxiya dhufsanayaasha ah 1 kun.

1	1000	2000		4000		6000
2	3000		5000			8000

3		3000			6000	
4				6000		8000
5	2000					7000
6			7000			10000

Su'aalo dheeraad ah

1 *Tirooyinka ah dhufsanayaasha 100 goobaba.*

b	300	410	3006	7200	4000	9205
t	6000	600	774	90	8004	904
j	833	4700	5200	10	899	10000

2 *Tirooyinka ah dhufsanayaasha 1000 goobaba.*

b	200	3000	600	7000	100	5000
t	30	400	760	8000	2200	679
j	7544	6000	4000	2003	9000	1000

3 *Jooniyadii waliba waxay qaadaa 100 kg oo sonkor ah.*



b 5 jooniyadood imisa kg oo sonkor ah ayey qaadayaan?

t 10 jooniyadood imisa kg oo sonkor ah ayey qaadayaan?

j 25 jooniyadood imisa kg oo sonkor ah ayey qaadayaan?

4 b 300 iyo 1000 tirooyinka u dhexeeya ee ah dhufsana yaasha 100 qora.

t 600 iyo 1500 tirooyinka u dhexeeya ee ah dhufsanayaasha 100 qora.

1.4 Tirooyinka Idil ilaa 10,000

1.4.1 Koowaadyada iyo Tobnaadada

Jaartiga tirada ee dhinaca midig ku xusan tirada lagu muujiyey waxay u taagan tahay soddon iyo afar.

Godka tobnaadka	Godka koo waadka
3 tobano	4 koowaadyo

30 + 4 = 34

Tirada 34 marka loo qoro 30 + 4 (wadar ka kooban dhufsanaha 10 iyo tiro 1-god ah) waxaan odhanaynaa waxaa loo qoray habka fidinta.

Hawlgalka 1.6

1 Jaartiga tirada ee dhinaca midigta ku yaala tirada lagu muujiyey waa imisa?

Godka tobnaadka	Godka koowaadka

2 Qoryaha xidhmooyinka iy kuwa aan isku xidhnayn mid ahaan tirada ay matilayaan (utaagan yihiin) waa imisa?



3 Idinka oo laba laba isku kooxaynaya iswarsada oo falanqeeya sida aad tirada 48 ugu muujinaysiin jaartiga tirada dushiisa.

Laylis 14

1 *Jaartiyada tirada tirooyinka lagumujiyay si fidsan u qora islamarkaana astiro ku qora.*

b

Godka tobnaadka	Godka koowaadka

_____ + _____ = _____

t

Godka tob-naadka	Godka koowaadka

_____ + _____ = _____

j

Godka tobnaadka	Godka koowaadka

_____ + _____ = _____

2 *Tirooyinka sida caadiga ah astiro ku qora.*

b 10 + 9 t 30 + 1 j 50 + 4

3 *Tirooyinkan hoose habka fidinta ku qora*

b 63 t 28 j 75

1.4.2 Koowaadka tobnaadka iyo boqlaadka

Jaartiga tirada ee dhinaca midig ku xusan tirada lagu muujiyay waxay u taa gantahay laba boqol siddeetan iyo shan.

Godka boqlaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka
II	IIIIIIII	IIIII

200 + 80 + 5 = 285

Tirada 285 marka loo qoro 200 + 80 + 5 (wadar ka kooban dhufsanaha 100, dhufsanaha 10 iyo tiro 1-god ah) waxa loo yaqaanaa habka fidinta.

Hawlgalka 1.7

Tirada 408 ku muujiya jaartiga tirada dushiisa. Ka dibna si fidsan u qora.

Godka boqolada	Godka tobnaadka	Godka koowaadka

Laylis 15

1 *Jaartiyada tirada tirooyinka lagu muujiyey habka fidinta ku qora isla markaana astiro ku qora.*

b

Godka boqlaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka
III	III	IIIII

_____ + _____ + _____ = _____

t

Godka boqlaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka
IIII		IIIIII

_____ + _____ + _____ = _____

2 *Tirooyinka habka fidinta loo qoray sida caadiga ah astiro ku qora.*

b 700 + 20 + 9 t 600 + 50 + 1 j 300 + 80 + 1

x 800 + 10 + 1 kh 900 + 40 1

3 *Tirooyinkan hoose habka fidinta ku qora*

b 408 t 960 j 743

x 197 kh 525 d 299

1.4.3 Fahamka (garashada) Qiimaha Astirooyinka iyo Qiima-rugeedyada

Tirada 243 shaxda qiima-rugeekda tirooyinka sidan hoos loogu sharxay ayaa loogu muujin karaa.



=

Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
2	4	3

Ufiirsada tirada 243

- *Astirada 2 waxay ku taalaa godka boqlaad. Sidaas darteed qiimaha 2 waa 2 × 100 = 200*
- *Astirada 4 waxay ku taalaa godka tobanada. Sidaas darteed qiimaha 4 waa 4 × 10 = 40.*
- *Astirada 3 waxay ku taalaa godka koowaadka. Sidaas darteed qimaha 3 waa 3 × 1 = 3.*

Laylis 16

1 ***Tirooyinka la idin siiyey shaxda qiima-rugeedka ee tirooyinka ku qora.***

b 312

Godka boqlaad	Godka tobnaal	Godka koowaad

t 458

Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

j 904

Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

x 258

Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

2 ***Astirada midabka cas lagu qoray qiimiheedu waa imisa?***

b	428	**t**	178	**j**	337	**x**	222
kh	635	**d**	283	**r**	309	**s**	444

3 ***Tirooyinka abaakaska lagu muujiyey qora.***

b



t



j



***4** Idinka oo isticmaalaya astirooyinka 1, 3, iyo 8 qora dhammaan tirooyinka 3 - godlaha ah ee laga samayn karo.

***5** Tirooyinka 3-godleyaasha ah midda ugu weyni waa tiradee? Ta ugu yarise waa tee?

1.4.4 Koowaadyada, Tobnaadyada, Booaadyada iyo kunnanaad yada

Buuraha Itoobiya ku yaala waxa ka mid ah, buurta loo yaqaano Jebeltita oo laga helo dhulka buuraleyda ah ee magaalada Diridhaba ku dhaw. Buurtan dhererkeedu waa 3122 mitir.

3122 shaxda qiima-rugeedka tirooyinka iyo jaartiga. tirada sidan hoos ku ttusan ayaa lagu muujin karaa.

	Godka kumanaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
Jaartiga tirada	III	I	II	II
Shaxda qiima-rugeedka tirooyinka	3 kumaad	1 boqlaad	2 tobnaad	2 koowaad

3000 + 100 + 20 + 2 = 3,122

Hawlgalka 1.8

Jaartiyada tirada tirooyinka lagu muujiyey habka fidinta ku qora. Isla markaana astiro ku qora.

1

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
IIII	IIII	III	II

2

Godka Kunaad	Godka boq-laad	Godka tobnaad	Godka koowaad
II	II	IIII	IIIIII

3

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
IIIIII	II		III

4

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
II		III	

5

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
III	IIIIII	IIII	

6

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
I	IIIIIII	IIIIII	IIIIIII

Laylis 17

1 *Tirooyinka la siiyey ku dul qora shaxda qiima-rugeedka tirooyinka.*

b 3,528

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

t 2,894

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

j 3,054

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

x 7,204

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

kh 9,457

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

d 5,266

Godka Kunaad	Godka boqlaad	Godka tobnaad	Godka koowaad

2 *Astirada qalinka cas lagu qoray qiimaheedu waa imisa?*

b 3741 **t** 4567 **j** 8989

x 6321 **kh** 7752 **d** 4024

3 *Tirooyinkan hoose mid waliba imisa kunnaad, boqlaad, tobnaad iyo koowaad ayay leedahay?*

b 5,216 **t** 3,050 **j** 6,088

x 3,294 **kh** 7,009 **d** 4,117

4 *Shaxdan hoos ku muujisan dhammaystira*

Tiro idil	Kunaad	Boqlaad	Tobnaad	Koowaad	Erayo marka lagu qoro
3,894	3	8	9	4	Saddex kun siddeed bogol sagaashan iyo afar.
8,019					
1,257					
7,995					
6,340					
5,219					

Su'aalo Dheeraad ah

1 *Tirada habka fidinta lagu qoray sida caadiga ah astiro ku qora.*

b 2000 + 500 + 20 + 4 **t** 6000 + 300 + 80 + 2

j 1000 + 600 + 40 + 5 **x** 8000 + 400 + 50 + 7

kh 5000 + 700 + 2

2 *Tirooyinkan hoose si fidsan u qora.*

b 6,351 **t** 7,076 **j** 9, 282 **x** 6,282

3 *Tirooyinka astiro ku qora.*

b 3 kumano 2 boqolo 9 tobano 7 halhalo

t lix kun toddoba boqol konton iyo lix

j 2 kumano 4 halhalo

4 *Tirooyinka abaakaska lagu muujiyey astiro ku qora.*

b



t



j



x



5 Abaakaska dhinaca midigta ku xusan haddii ay jiraan kuulo ka dhimman ku sawir kuwa dheeraad ah haddii ay jiraan na calaamada '×' inta aad ku samaysid tiradan hoos ku tusan abaakaska ku muujiya.

5,807



1.5 Isbarbar-dhigidda iyo Horsanaanta Tirooyinka Idil

1.5.1 Isbarbardhigidda

Nin dukaanle ah ayaa bishii Maskaram iibiyey 2,459 buugagta wax lagu qoro. Bishii ku xigtay ee Tiqimtina wuxuu iibiyey 976 buug. Dukaanluhu bishee ayuu buug fara badan iibiyey?

Furfuris:

Si aan u garano bisha uu buugag badan iibiyey labada bilood tirada buugagta uu iibiyey ayaan isbarbardhigaynaa.

Kunnaad	Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
2	4	5	9
	9	7	6

Tirada godadka badan lehi marwalba way ka weyntahay tirada godad yar leh.

Sidaas darteed,

2,459 > 978 ama 978 < 2,459

Sidaas awgeed dukaanluhu bisha Maskaram ayuu iibiyey buug badan.

Marka aan isbarbardhigayno laba tiro oo leh, astiroyaal (godad) ay tiradoodu isle'eg yihiin isbarbardhigidda waxaan kaga bilaabaynaa astiraha (godka) qiima-rugeedkiisu weyn yahay (taas oo ah ka dhinaca). Labada astiro (god) ee ku yaala dhinaca bidixda haddii ay isku mid noqdaan, Waxaan isbarbardhigaynaa. Labada astiro (god) ee ku yaala rugta ku xigta.

Tusaale

b Isbarbardhiga 5,294 iyo 6,245.

Kunnaad	Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
5	2	9	4
6	2	4	5

5 < 6

5 < 6

Sidaas darteed 5,294 < 6,245

t Isbarbardhiga 8,344 iyo 8,319.

Kunaad	Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
8	3	4	4
8	3	1	9

U fiirsada, 8 = 8, sidoo kale 3 = 3

Haseyeeshee 4 > 1.

4 > 1

Sidaas darteed 8,344 > 8,319

j Isbarbardhiga 9,341 iyo 9,346.

Kunaad	Boqlaad	Tobnaad	Koowaad
9	3	4	6
9	3	4	1

Haseyeeshee 1 < 6.

Sidaas darteed 9,341 < 9,346

6 > 1

Laylis 18

Isbarbardhiga idinka oo labada tiro goobada dhexyaala ku buuxinaya calaamadaha '>' ama '<'.

1	1,563 < 2,277	**2**	2,045 ◯ 962	**3**	1,567 ◯ 1,550
4	1,004 ◯ 1,025	**5**	9,524 ◯ 9,530	**6**	7,344 ◯ 7,255
7	3,205 ◯ 2,606	**8**	7,204 ◯ 6,204	**9**	3,591 ◯ 3,599
10	210 ◯ 2,010	**11**	5,011 ◯ 5,110	**12**	3,608 ◯ 3,609

1.5.2 Horsanaanta

Tirooyinka idil si aan iskudaba dhigno (ama isku daba taxno) anaga oo ka bilaabayna tirada yar ilaa ta weyn ama intaan ka bilawno ta weyn ilaa ta yar. Waa in aan laba laba inta an uqaadano an isbarbardhigna.

Tusaala

b Tirada yar ilaa ta weyn siday u kala horeeyaan u qora.

2,543, 1,741, 546, 2,581

t ta weyn inta ad kaga bilowdiin ilaa ta yar qora.

6,544, 341, 7,954, 6,540

Furfuris:

b Marka aan laba laba uqaadano oo aan isbarbar dhigno waxaan helaynaa sidan

$546 < 1{,}741 < 2{,}543 < 2{,}581$

Sidaas darteed marka horsanaan ta yar ilaa ta weyn loo qoro sidan ayay noqon

546, 1,741, 2,543, 2581

t Marka aan laba laba inta aan uqaadano aan isbarbardhigno dabadeed wax-aan helaynaa.

$7{,}954 < 6{,}544 > 6{,}540 > 341$

Sidaas darteed marka horsonaan ta weyn ilaa. ta yar loo qoro waa sidan

7,954, 6,544, 6,540, 341

Laylis 19

Ta yar ilaa ta weyn u qora

1	284, 36, 254, 844	**2**	894, 854, 84, 776, 770
3	644, 294, 576,199, 648, 500	**4**	294,765, 284, 755, 290
5	1,349, 1,905, 2,774, 1,309	**6**	3,544, 2,944, 3,634, 2009

Ta weyn kaga bilaaba oo ilaa ta yar qor.

7	180, 66, 254, 96	**8**	560, 790, 684, 794
9	350, 346, 634, 385, 945	**10**	7,500, 3941, 6,344, 7,854
11	2,009, 2,098, 2,980, 2,089	**12**	6,541, 5,641, 4,651, 6,451, 5,146

Cutubka

2 aad

CABBIRAADDA

2.1 CABBIRAADDA DHERERKA

2.1.1 SENTIMITIR IYO MILLIIMITIR

Sentimitir iyo milliimitir waa halbeegyo lagu cabbiro dhererka.

Sentimitir oo loo soo gaabiyo ‘sm’ iyo milliimitir oo loo soo gaabiyo ‘mm’ waxaa loo adeegsada cabbiraadda dhererada aad u gaa-gaaban ee in hal talaabo ah ka gaaban.



Xariijinta buluuga ee korka lagu sawiray dhererkeedu waa 8 sm.



Musmaarka dhererkiisu waa 25 mm

Xusuuso

1 sentimitir = 10 millimitir

1 sm = 10 mm

Hawlgalka 2.1

1 Idinka oo adeegsanaya mastarad xariijimahan dhererkooda sm ku cabbira.

b. _____

t. _____

j. _____

2 Idinka oo adeegsanaya mastarad xariijimahan dhererkooda mm ku cabbira.

b. _____

t. _____

j. _____

Laylis 1

Idinka oo adeegsanaya mastarad dhererka sawiradan hoos ku muujisan (xusan) sm ku cabira.

1

2

3

4

5

6

Idinka oo adeegsanaya mastarad dhererka sawir kasta mm ku cabira.

7

8

9 

10

11

Meelaha bannaan dhexdooda tirada ku haboon ku buuxiya.

12 2sm = ____ mm

13 10 sm = ____ mm

14 40mm = ____ sm

15 70 mm = ____ sm

Shaqo kooxeed

Idinka oo laba laba (lammaane ama qindi) isu kooxaynaya cabbira dhereradda faraha gacantiina bidix. Ka dibna marka aad diiwaangalisaan isbarbar-dhiga dhererka farihiina.



Far yaro = _____ sm.

Faadumo (far yaro ku xigto) = _____ sm.

Far dhexo = _____ sm

Murddiso = _____ sm.

Suul = _____ sm.

2.1.2 MITIR IYO KIILOMITIR

➲ Mitir oo marka la soo gaabiyo loo qoro ‘m’ iyo kiilomitir oo isna loo soo gaabiyo ‘km’ waa halbeegyo loo adeegsado cabbiridda dhererada aad u dhaadheer.



Mastarad 1 mitir ah

Duubka mitirka

Waxyalaha dhererkoodu dhaadheer yahay waxaa lagu cabbiraa mastarad hal mitir ah ama duubka mitirka.



Dallad 1 mitir ah

Muddo toban daqiiqadood haddii aad lugaysiin fogaansho 1 km noqonaysa ayaad soconaysiin.

Hawlgalka 2.2

Idinka oo laba laba (qindiama lammaane) isu kooxaynaya falanqeeya kadibna sheega halbeegga dhererka mitir ama kiilomitir ee ku haboon cabbiraada waxyaal-ahan hoos ku tilmaaman.

1 dhererka jooqqiina

2 dhererka gacmihiina

3 dhererka ballaca garoonka kubbadda cagta.

4 dhererka jooqqa albaabka fasalkiina

5 fogaanshaha u dhexeeya gurigiina iyo dugsigiina.

6 fogaanshaha u dhexeeya Jigjiga iyo Goday.

7 dhererka Wabiga Shabeele

8 dhererka Awrka.

Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya.

9	1 m = ____ sm	10	3 m = ____ sm	11	1 km = ____ m
12	2 km = ____ m	13	100 sm = ____ m	14	400 sm = ____ m
15	1000 m = ____ km	16	2000 m = ____ km.		

Laylis 2

Walxah hoos ku sawiran dhererka aad u malaynaysiin ama aad ku qiyaasaysiin in uu ku haboon yahay doorta.

1



2



3

b	25 m	b	30 sm	b	4 sm
t	2 m	t	30 m	t	4 m
j	2 km	j	30 km	j	4 km

Sheeg halbeegga sentimitir, mitir ama kiilomitir ee ku haboon cabbiraada dhererka waxyaalahan hoos ku tilmaaman.

4 geedka gobka

5 Dhererka buuggiina

6 Ballaca sabuurada

7 Gaadhi fogaanshaha uu hal saac socon

8 Dhererka gidaarka fasalkiina

9 Fogaanshaha u dhexeeya magaalooyinka Diridhaba iyo Dhagaxbuur.

10 Fogaanshaha la ordo orodka maraatonka

11 Dhererka go'aha aad huwataan

12 Miiska Jooggiisa.

13 Dhererka digaagada.

Meelaha bannaan buuxiya.

14 4 m = ____ sm

15 9 km = ____ m

16 4000 m = ____ km

17 7 m = ____ sm

18 200 sm = ____ m

19 8000 m = ____ km

20 3 km = ____ m

21 600 sm = ____ m

2.1.3 ISUGEYNTA IYO KALA GOYNTA HALBEEGYADA DHERERKA

Cabdi oo nijaar (fuundi) ah ayaa doonay inuu miis sameeyo. Wuxuu diyaarsaday loox dhererkiisu dhan yahay 2m iyo 30 sm. Nijaarku looxa uu Isticmaalay dhererkiisa marka sm lagu sheego waa imisa?

Habka loo xisaabiyo

2 mitir iyo 30 sentimitir = 2 m + 30 sm.

Marka dherer halbeegyo kala gaddisan la isugaynayo ama la kala goynayo waa in halbeegyada la mideeya oo nooc qudhaato loo baddalaa.

Sidaas darteed ugu horaynta marka 2 mitir loo bedelo sm waxay noqon 200 sm.

2 m + 30 sm = 200 sm + 30 sm

= 230 sm

Tusaale

1 4 m + 40 sm = 400 sm + 40 sm
= 440 sm

2 5 m - 50 sm = 500 sm - 50 sm
= 450 sm

Hawlgalka 2.3

1 2 m iyo 60 sm u beddela sm.

2 Wadarta 3 m iyo 50 sm waa imisa?

3 8 m haddii an 90 sm ka goyno imisa ayaa soo hadhi?

4 5 m iyo 35 sm waa imisa sm?

5 Xadhig 1 m ah haddii 30 sm laga gooyo imisa sm ayaa soo hadhi.

Laylis 3

Kuwan soo socda sm u bedela

1 7 m iyo 80 sm

2 4 m iyo 27 sm

3 2 m iyo 68 sm.

4 6 m iyo 35 sm.

Weedh xisaabeeedyo (masalooyin)

1 Turunesh Dibaabaa oo orodada fogaanshaha dhaadheer, caam ku ah ayaa Olombigii Beejing lagu qabtay ku guulaysatay oo kaalinta kowaad ku soo baxday labada orod, orodka 10ka km iyo orodka 5ta km. isla markana waxay heshay laba biladood oo dahab ah. Orodaadu labada orod, guud ahaan imisa km ayey oroday?

2 Baska rakaabka ayaa aroor ka baxay xaruntа basaska si uu u tago magaalo fogaan shaheedu yahay 85 km. ka dib markuu 45 km socday shaag ayaa ka qarxay oo wadada ayuu istaagay. Basku magaalada uu ku socday in uu gaadho imisa km ayaa u hadhay?

3 Shan Jinac oo dhererkoodu isle'eg yahay ayaa saf inta ay isku daba galeen socda (eeg sawirka hoose). Hal Jinac dhererkiisu haddii uu 4 mm yahay. Dhererka Jinacyada dhammaantood waa imisa?

4 Hal buug Jooggiisu waa 3 sm. Haddii 8 buug oo isku mid ah la isdulraseeyo dhammaantood joogoodu waa imisa sm?



2.2 CABBIRAADDA DAREERAHA OO LAGU CABBIRAYO MILLILITIR (ML) IYO LITIR (L)

Millilitir oo loo soo gaabiyo 'ml' iyo Litir oo loo soo gaabiyo 'ℓ' waa halbeegyo loo adeegsado cabbiraada inta dareere ay walaxi qaadhi karto.

Kani waa malqaacad. 5 mililitir (ml) ayuu qaadaa

Mililitir (ml) waxaa loo Isticmaala dareere mugiisu aad u yar yahay
1 litir = 1000 mililitir

kani waa jooga biyaha la darsado 1 litir ayuu qaada.

Litir waxaa la isticmaalaa marka la cabbirayo dareere aad u badan
1 ℓ = 1000 ml

Hawlgalka 2.4

Sheega halbeega litir ama militir ee ku haboon cabbiraada qaadka (mugga) walxahan hoos ku sawiran.

1		2		3	
4		5		6	
7		8		9	

Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya.

10 1 ℓ = _____ m ℓ

11 2 ℓ = _____ m ℓ

12 1000 m ℓ = _____ ℓ

13 4000 ml = _____ ℓ

Laylis 4

Walxahan hoos ku sawiran cabbirka qaadkoodu (muggodu) inta uu yahay halbeega ku haboon ee aad u malaynaysaan ama aad ku qiyaasaysaan doorta.

1

b 100m ℓ

t 100 ℓ

2

b 500 m ℓ

t 500 ℓ

3



b 300m ℓ

t 300 ℓ

4

b 500m ℓ

t 500 ℓ

5

b 300m ℓ

t 300 ℓ

6 

b 80m ℓ

t 80 ℓ

Sheega qiyaasta, mililitir ama litir ee aad u malaynaysaan in uu ku haboon yahay qaadka (ama muqaa) walxahan hoos ku qoran.

7 dheri **8** koob **9** haan

10 Silingo (irbadda dhakhtarka) **11** barkad **12** fandhaal

Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya.

13 2 ℓ = _____ m ℓ **14** 4 ℓ = _____ ml **15** 8 ℓ = _____ m ℓ

16 9 ℓ = _____ m ℓ **17** 3000 m ℓ = _____ ℓ **18** 6000 m ℓ = ℓ

19 5000 m ℓ = _ ℓ **20** 7000 m ℓ = _____ ℓ

2.3 CABBIRAADA CULAYSKA (AMA CUFKA) OO LAGU CABBIRAYO GARAAM (g) KIILOGARAAM (kg) IYO KIINTAAL

Culayska ama cufka waxa lagu cabbiraa garaam, kilogaraam iyo kiintaal.

Garaam iyo killogaraam

➲ Garaam oo loo soo gaabiyo ‘g’ iyo kilogaraam oo isna loo soo gaabiyo ‘kg’ waa halbeegyo lagu cabbiro culayska.

Kani waa biin, culayskiisu waa 1 garaam (g)

Bisadan yar culayskeedu waa 1 kiilogaraam (1 kg)

Garaamka waxa la isticmaala marka la cabbirayo waxayaalaha Culayskoodu fudud yahay

Kilogaraam waxa la isticmaala marka la cabbirayo Waxyaalaha aad u cufan ee aad u culus.

1 kilogaraam = 1000 garaam

1 kg = 1000 g

Kiintaal

Kiintaal waa halbeeg lagu cabbiro culayska.

Kiintaalka waxaa la adeegsada marka la cabbirayo waxyaala aad iyo aad u culus.

1 kiintaal = 100 kg

Hawlgalka 2.5

Sheega halbeega garaam ama kilogaraam ee ku haboon cabbiraada. Waxyalaha hoos ku sawiran.

1		2		3	
4		5		6	

Meelaha bannaan buuxi.

7 1 kg = ____ g

8 3 kg = ____ g

9 2000 g = ____ kg

10 1 kiintaal = ____ kg

11 4 kiintaal = ____ kg

12 100 kg = ____ kiintaal

13 600 kg = ____ kiintaal.

Laylis 5

Sawirada hoos ku xusan culayska ku haboon doorta.

1 

b	12 g
t	12 kg
j	12 kiintaal

2 

b	8 g
t	8 kg
j	8 kiintaal

3 

b	3 g
t	3 kg
j	3 kiintaal

4

b	5 g
t	5 kg
j	5 kiintaal

5 

b	700 g
t	700 kg
j	700 kiintaal

6

b	28 g
t	28 kg
j	28 kiintaal

Sheega halbeega garaam kilogaraam ama kiintaal ee ku haboon cabbiraada culayska waxyaalahan hoos ku qoran

7 qalin qori **8** faras **9** gaadhiga xamuulka

10 miiska aad wax ku dul qoratiin

11 qof beeraley ah galleyda u sannadkii tacbado (u soo go'day)

12 culayska qofka

Meelaha bannaan buuxi.

13 2 kg = ____ g

14 5 kg = ____ g

15 4000 g = ____ kg

16 8000 g = ____ kg

17 3 kiintaal = ____ kg

18 9 kiintaal = ____ kg

19 500 kg = ____ kiintaal.

20 700 kg = ____ kiintal

Cutubka

3aad

BARASHADA JAJABYADA

3.1 NAKHTIINKA SADDEX MELOODYADA (SADDEX DALLOOLLADA)



$\frac{1}{3}$ → Intal la hadheeyay

3 → Shayga (walaxda) idil imisa meelood oo isla e'g ayaa loo qaybiyay?



$\frac{2}{3}$ → Intal la hadheeyay

3 → Shayga (walaxda) idil imisa meelood oo isla e'g ayaa loo qaybiyay?

Hawlgalka 3.1

Walaha hoos ku sawiran qaybahooda la midabeeyey iyo qaybaha aanan la midabaynin astirada jajabka ku qora.

1



2



3



4 

5 

6 

Jajabyada hoos lagu siiyey sawirka qaybtiisa u dhiganta madoobeeya (hadheeya).

7 

$\frac{1}{3}$

8

$\frac{2}{3}$

9 

$\frac{2}{3}$

10

$\frac{1}{3}$

3.2 JAJAB HALLEEDYADA $\frac{1}{2}$ ILAA $\frac{1}{10}$

Fahamka (garashada) Jajabhalleedyada



Ufiirsada sawirkan sawirka 4 meelood (dalool) oo isle'eg ayaa loo kala qayqabiyey. Afarta meelood meel qudhaata ayaa la midabeeyay. [4 ta meelood ee isle'eg 1 (hal) meel]. Taasna marka jajab lagu cadeeyo $\frac{1}{4}$ ayey noqon, waxaana loo akhriyaa. Afar meelood meel (ama afar dalool-hal).

Hawlgalka 3.1

1 Arday ayaa 1 liinmacaan oo uu haystay 3 meelood oo isle'eg inta u qaybiyay ayuu hal dallool (meel) saaxiibkii siiyay. Qaybta u saaxiibkiis siiyay halka liinta idil inta meelood (dalool) ee ay ka tahay barihiina (macalinkiina) u cadeeya.

2 Shaxanka hoostan lagu sameeya waxaa la yidhaa jajab-liidimeedyo. Wuxuu muujinayaa 1 shay idil (1 walax), inta nusyo (nusas), rubucyo, saddex meeloodyo (saddex daloolyo) iyo lix meeloodyo ee uu leeyahay.

1 shay (walax) idil						1 shay (walax) inta nusas rubucyo saddex meelodyo lix-meeloodyo ee uu ku kooban yahay
$\frac{1}{2}$		$\frac{1}{2}$				2 nusyo
$\frac{1}{3}$		$\frac{1}{3}$		$\frac{1}{3}$		3 saddex meeloodyo
$\frac{1}{4}$		$\frac{1}{4}$		$\frac{1}{4}$	$\frac{1}{4}$	4 rubucyo
$\frac{1}{6}$	$\frac{1}{6}$	$\frac{1}{6}$	$\frac{1}{6}$	$\frac{1}{6}$	$\frac{1}{6}$	6 lix meeloodyo oo min (lix meelood-hal ah)

b 1 shay (walax) imisa nusas ayuu ka kooban yahay? (hal shay idil imisa nusyo ayaa ku jirta)

t 1 shay imisa rubucyo ayuu leeyahay? (hal shay idil imisa meelood oo nin rubuc ah ayaa ku jirta)?

j 1 shay imisa lix meeloodyo (lix daloolyo) ayuu leeyahay?

x 1 shay imisa saddex meeloodyo ayuu leeyahay?

Xasuusin: shaxanka sare ku tusan waxa loo yaqaanaa jajab-liidmeed.

Laylis 1

Sawiradan hoose mid kasta qaybta la midabeeyey astirada jajabka tilmaamaya qora.

1



2



3

4



5



Jajabyadan hoose erayo ku qor.

6 $\frac{1}{5}$ **7** $\frac{1}{4}$ **8** $\frac{1}{6}$ **9** $\frac{1}{10}$

Sawirada hoose u fiirso ka dibna mid kasta qaybta la midabeeyey jajabka u dhigma qor.



3.3 NUSASKA (NUSYADA) IYO RUBUCYADA TIROOYINKA IDIL

3.3.1 NUSKA (BADHKA) TIRO IDIL

Hawlgalka 3.2

1 Qor tirooyinka idil ilaa 21 ee ah dhufsaneyaasha 2.

2 b Tirada muuska ee sawirkooda hoos lagu muujiyey waa imisa.

t Muuska 2 nus u kala dhig (2 kooxood oo nus, nus ah u kala kooxee)



j Tirada muuska badhkeedu (nuskeedu) waa imisa?

Ufiirsada: Tirada kasta oo idil oo ah dhufsanaha 2 marka laba meelood oo isle'eg loo qaybiyo, qaybta la heelaa waa tiradaas badhkeed (nuskeed).

Tusaale



6 ÷ 2 = 3

Sidaas darteed 3 waa 6 badhkeed (nuskeed)



16 ÷ 2 = 8

8 waa 16 nuskeed (badhkeed)

3.3.2 RUBUCA TIRO IDIL

Hawlgalka 3.3

Tiri kuusha sawirkeeda hoostan lagu muujiyey.



1 kuusha afar kooxood oo isku tiro ah ka kala dhig dhig.



2 Imisa kuul ayey rubaca tirada kuushu noqon?

Ufiirsada: Tiro kasto idil oo ah dhufsanaha 4 marka loo qaybiyo afar meelood oo isle'eg, qaybtu waa tiradaas rubuceed.

Tusaala



12 ÷ 4 = 3

Sidaas darteed 3 waa 12 rubuceed.

Laylis 2

1 Soo saara tirooyinkan hoose badhkooda (nuskooda).

b 2 **t** 4 **j** 8 **x** 20 **kh** 46 **d** 52

2 Soo saara rubuca tirooyinkan hoose.

b 20 **t** 8 **j** 24 **x** 40

weedha-xisaabeedyo.

3 Toban hal oo nacnaca ayaan haystay. Nacnaca badhkii haddii aan walaalkey siiyo, imisa hal oo nacnaca ayuu walaalkey yeelan?

4 Kolay (sallad) waxa ku jirtay 24 ugaxood (ukumo). Ugaxda rubuceed haddii la gado, imisa ugaxood ayaa soo hadhi?

5 22 badhkeedu waa imisa?

6 100 rubuceedu waa imisa?

3.4 ISBARBARDHIGIDDA JAJABYADA FUDUD

Ufiirsada shaxankan hoos lagu muujiyey oo loo yaqaano jajab-liidmeed.

1 shay oo idil	1 idil (1 walax) waxay ka kooban tahay
$\frac{1}{2}$ $\frac{1}{2}$	2 nusas (nusyo)
$\frac{1}{3}$ $\frac{1}{3}$ $\frac{1}{3}$	3 saddex meeloodyo
$\frac{1}{4}$ $\frac{1}{4}$ $\frac{1}{4}$ $\frac{1}{4}$	4 rubucyo
$\frac{1}{6}$ $\frac{1}{6}$ $\frac{1}{6}$ $\frac{1}{6}$ $\frac{1}{6}$ $\frac{1}{6}$	6 oo min (lix-meelood hal ah)
$\frac{1}{8}$ $\frac{1}{8}$ $\frac{1}{8}$ $\frac{1}{8}$ $\frac{1}{8}$ $\frac{1}{8}$ $\frac{1}{8}$ $\frac{1}{8}$	8 oo min (siddeed meelood-hal ah)

Hawlgalka 3.4

1 Isbarbardig qaybaha (waaxyaha) shaxanka sare ka dibna ka jawaab weydiimahan.

b 1 miyey ka weyn tahay mise wey ka yar tahay $\frac{1}{2}$?

t $\frac{1}{3}$ iyo $\frac{1}{2}$ midkee baa weyn?

j $\frac{1}{4}$ iyo $\frac{1}{3}$ midkee baa weyn?

2 Idinka oo adeegsanya jajab-liidmeedka sare meelaha bannaan ku buuxiya calaamadaha (>, < ama =) midda ku haboon.

b $1 ____ \frac{1}{2}$ **t** $\frac{1}{3} ____ \frac{1}{2}$ **j** $\frac{1}{6} ____ \frac{1}{3}$

x $\frac{1}{4} ____ \frac{1}{6}$ **kh** $\frac{1}{8} ____ \frac{1}{6}$ **d** $\frac{1}{2} ____ \frac{1}{4}$

Tusaale

Adiga oo adeegsanya tirooyinka idil isbarbardhig $\frac{1}{2}$ iyo $\frac{1}{4}$.

Furfuris

Labada jajab siaan isku barbar dhigno waxaan horta soo saaraynaa tiro u qaybsanta 2 iyo 4.

Sidaas darteed waxaan qaadan karnaa tirada 12, oo ah tiro u qaybsanta 2 iyo 4.

12 badhkeedu waa 6.

12 rubuceedu waa 3.

Maadaama ay $6 > 3$ waxa inoo cad in $\frac{1}{2} > \frac{1}{4}$

Laylis 3

Meelaha bannaan calaamadaha > ama < midda ku haboon ku buuxiya.

1 $\frac{1}{4} __ \frac{1}{3}$ **2** $\frac{1}{2} __ \frac{1}{8}$ **3** $\frac{1}{8} __ \frac{1}{6}$ **4** $\frac{1}{10} __ \frac{1}{7}$ **5** $\frac{1}{3} __ \frac{1}{9}$ **6** $\frac{1}{5} __ \frac{1}{4}$

Cutubka

4aad



ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000

4.1 ISUGEYNTA TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000

4.1.1 ISUGEYNTA DHUFSANEYAASHA 100

Dugsi ardayda ku jirta ayaa sannadkii u horeeyey tallaashay 200 oo geed oo tallaal ah, sannadkii labaadna waxay tallaashay 300 oo geed oo tallaal ah. Ardaydu labada sannadood dhammaan geedaha ay tallaaleen waa Imisa?

Hab xisaabinta 200 + 300 = ?

200 + 300 = 2 boqlaad + 3 boqlaad

= 5 boqlaad = **500**

Sidaas darteed, ardaydu labada sanndood waxay tallaaleen 500 oo geed

Xusuuso:

Dhufsanayaasha 100 waa tiro kasta oo laba eber dhinaca midigta ku leh sida 400, 300, 800, 1100, 2000

Ufiirsada:

Tirooyinka 1100 iyo 2000 marka boqol ahaan loo qoro ama loo akhriyo waa sidan 1100 waa toban iyo hal boqlaad ama 11 boqlaaad.

Sidaas darteed,

1100 = 11 boqlaad

sidoo kale 2000 = 20 boqlaad

Tusaale 1

b 3000 + 1000 = 30 boqlaad + 10 boqlaad

= 40 boqlaad

= 4,000

3000
+ **1000**
4000

t 6000 + 200 = 60 boqlaad + 2 boqlaad

= 62 boqlaad

= 6200

6000
+ **200**
6200

Hawlgalka 4.1

B ***Weydiimahan soo socda idinka oo kooxo laba laba (qindi) ah ka wada shaqeeya. Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya.***

1 3000 = _____ boqlaad (boqolaal)

2 1900 = 19 boqlaad

3 3 boqlaad = 300

4 13 boqlaad = 1300

5 900 = _____

6 1400 = ____ boqlaad

7 35 boqlaad = _____

8 4800 = ____ boqlaad

T ***Su'aalahan hoose tiraab ahaan (afka) inta aad ka xisaabisiin (isugugaysiin) sheega jawaabtiina.***

1	100 + 400	**2**	600 + 300	**3**	2000 + 3000
4	4000 + 400	**5**	1200 + 800	**6**	3200 + 400
7	2600 + 400	**8**	1100 + 300		

Laylis 4.1

Isugee

1	400 + 300	**2**	500 + 200	**3**	300 + 400
4	200 + 500	**5**	200 + 200	**6**	700 + 200
7	200 + 700	**8**	6000 + 2000	**9**	8000 + 1500

10 4200 + 4000 **11** $\begin{array}{r} 500 \\ +\ 300 \\ \hline \end{array}$ **12** 300 + 300

13 1100 + 700 **14** $\begin{array}{r} 400 \\ +\ 200 \\ \hline \end{array}$ **15** $\begin{array}{r} 1300 \\ +\ 1600 \\ \hline \end{array}$

16 ***Shaxahan buugagtiina ku guuriya ka dibna buuxiya.***

b	
300 ku biiri	
400	
600	900
1500	
3100	
4200	4500

t	
2000 ku biiri	
400	
2000	
3100	5100
7000	
2700	

j		
a	b	a + b
300	500	
1200	900	
4000	1300	
3500	2500	6000
6000	3300	

Weedh xisaabeedyo (Masalooyin)

17 Digaagad culayskeedu waa 2000 garaam tu labaadna culayskeedu waa 1000 garaam. Labada digaagadood culayskoodu guud ahaan waa imisa garaam?

18 Dibi waxaa lagu iibsaday 5000 oo birr, sidoo kale hal wan waxaa lagu iibsaday qiima 300 oo birr ah. Guud ahaan qiimaha dibiga iyo wanku waa imisa?

4.1.2 ISUGEYNTA LABA TIROOYINKA IDIL OO SADDEX-GODLE (SADDEX-ASTIROOLE) AH

Hawlgal Nakhtiin ah

Isugeeya Idinka oo laba laba (qinidi) u wada shaqaynaya

1 0 + 9 **2** 12 + 0 **3** 0 + 25 **4** 119 + 0

5 $\begin{array}{r} 30 \\ +\ 40 \\ \hline \end{array}$ **6** $\begin{array}{r} 25 \\ +\ 3 \\ \hline \end{array}$ **7** $\begin{array}{r} 32 \\ +18 \\ \hline \end{array}$ **8** $\begin{array}{r} 46 \\ +38 \\ \hline \end{array}$ **9** $\begin{array}{r} 59 \\ +64 \\ \hline \end{array}$

Tusaale 1

Faarax ayaa labadiisa carruur ah u iibiyay dhar qiimhiisu yahay 423 Birr iyo kobo qiimahoodu yahay 142 Birr. Faarax guud ahaan imisa ayuu bixiyeya?

Habka loo xisaabiyo 423 + 142

Talaabada 1	Talaabada 2	Talaabada 3
Marka ugu horraysa koowaadka isugeeya 3 + 2 = 5	Ka dib tobnaadka isu geeya 2 + 4 = 6	Ugu danbaysta boqlaadka isugeeya 4 + 1 = 5
423 + 142 5	423 + 142 65	423 + 142 565

Sidaas darteed faarax guud ahaan wuxuu bixiyey 565 Birr

Tusaale 2

Dugsi ardayda kuu jirtaa 617 waa inamo, 175 na waa gabdho. Dugsiga dhammaan ardayda ku jirtaa waa imisa?

Habka loo xisaabiyo 617 + 175

Talaabo 1	Talaabo 2	Talaabo 3
Marka u horaysa koowaadka isugeeya 7 + 5 = 12, 12 koowaad u fiirso 12 koowaad waa 1 tobnaad iyo 2 koowaad sidaas darteed 2 da intaan qorno ayaan 1 ka tobnaad qaadynaa oo an tobnaadada u geynayna	Ka dib tobnaadka isu geeya oo 1 ka tobnaad ee la soo qaaday ku dara 1 + 1 + 7 = 9	Ugu danbaysta boqlaadka isugeeya 6 + 1 = 7
1 617 + 175 2	1 617 + 175 92	1 617 + 175 792

Sidaas darteed dhammaan ardayda dugsiga ku jirtaa waa 792.

Laylis 2

Isugee

1 300 +142

2 247 +600

3 135 +243

4 215 +762

5 645 +233

6 332 + 36

7 145 + 27

8 810 +175

Soo saar wadarta

9 162 iyo 235

10 647 iyo 122

11 341 iyo 675

12 saddex boqol labaatan iyo afar iyo laba boqol toban iyo shan

13 347 +125

14 139 +254

15 324 +138

16 436 +145

17 Shaxahan hoos ku xusan buugaaga ku guuri, ka dibna tirada ku haboon ku buuxi.

b	
300 u gee	
123	
246	
569	
813	
938	

t	
132 u gee	
123	
431	
259	
648	
590	

j		
a	b	a + b
214	623	
412	328	
835	157	
724	312	
258	451	

Weedh-xisaabeedyo

18 Marka waddada gaadhiga la maro fogaanshaha u dhexeeya magaalada jigjiga iyo Adiis Ababa waa 628 km. Adiis Ababa ilaa magaalada Dese waa 401 km. Fogaanta jigjiga ilaa Dese u dhexeysa waa Imisa?

19 Hal Dhakhtar wuxuu leeyahay 432 sariiro. Dhakhtarka haddii 108 sariirood oo dheeraad ah loo iibiyo dhammaan sariiraha uu dhakhtarku lahaanayaa waa imisa?

4.1.3 ISUGEYNTA TIROOYINKA IDIL EE AFAR GODLE (AFAR-ASTIROOLE) AH

Xarun ka mid ah xarumaha ay Dawlada deegaanka soomaalidu ugu tala gashay xoola dhaqista waxaa lagu hayaa 3524 neef oo geel ah iyo 1368 neef oo lo' ah. Dhammaan xoolaha xarunta lagu hayaa waa imisa?

Habka loo xisaabiyo

3524 + 1368 = ?

Talaabada 1	Talaabada 2	Talaabada 3	Talaabada 4
Marka u horaysa koowaadka isugeeya 4 + 8 = 12 koowaad. 12 koowaad = 1 tobnaad iyo 2 koowaad. 2 da inta aad qortid 1 ka toban qaad (hayso) oo u gee tobnaadada.	Kadib tobnaadada isugee adiga oo isla markaana u gaynaya 1 kii tobnaad ee aad soo qaaday ama aad haysay 2 + 6 + 1 = 9	Ka dibna boqlaadada isugee 5 + 3 = 8	Ugu danbaysta kunnaadada isugee 5 + 3 = 8
1 3524 + 1368 2	1 3524 + 1368 92	1 3524 + 1368 892	1 3524 + 1368 4892

Sidaas darteed dhammaan xoolaha xarunta lagu hayaa waa 4892 neef.

Laylis 3

Isugee

1	3000 +4124	2	6532 +2000	3	3214 +1362	4	6133 +2061
5	6247 +1325	6	2541 +1329	7	7348 +2435		

Raadi wadarta

8 2062 iyo 4125 **9** 5263 iyo 1234 **10** 6675 iyo 1218

11 Olole lagu talagalay ka hortaga cudurka qaaxada ayaa hal sano lagu daaweeyey 4857 qof. Sannadkii ku xigayna waxa la daweeyey 5328 qof. Labada sannadood dhammaan imisa qof ayaa la daweeyey?

4.1.4 ISUGEYNTA TIROOYINKA EE LEH TIRO QAADASHO LA XIDHIIDHA QIIMA-RUGEEDYADA KALA GADISAN (KALA DUWAN)

Tusaale 1

Isugeeya

b $\begin{array}{r} 375 \\ +\ 22 \\ \hline \end{array}$ **t** $\begin{array}{r} 439 \\ +\ 55 \\ \hline \end{array}$

Habka loo xisaabiyo

b $\begin{array}{r} 375 \\ +\ 22 \\ \hline \end{array}$

Talaabada 1	Talaabada 2	Talaabada 3
Marka u horaysa koowaadada isugee 5 + 2 = 7	Ka dib tobnaadada isugee 7 + 2 = 9	Ugu danbaysta 3da boqlaad toos u daji oo qor
375 **+ 22** **7**	**375** **+ 22** **97**	**375** **+ 22** **397**

Sidaas darteed $\begin{array}{r} 375 \\ +\ 22 \\ \hline 397 \end{array}$

t $\begin{array}{r} 439 \\ +\ 56 \\ \hline \end{array}$

Hab xisaabinta

Talaabada 1	Talaabada 2	Talaabada 3
Marka u horaysa koowaadada isugee 9 + 6 = 15. 15 koowaad waa 1 tobnaad iyo 5 koowaad. 5ta inta aad qortid 1 ka toban qaad oo u gee tobnaadada.	Ka dibna tobnaadada isugee isla markaana ku dar 1 kii tobnaad ee aad soo qaaday 3 + 5 + 1 = 9	Ugu danbaysta 4 ta boqlaad toos u daji oo qor.
1 439 + 56 5	1 439 + 56 95	1 439 + 56 495

Sidaas darteed $\begin{array}{r} 439 \\ +\ 56 \\ \hline 495 \end{array}$

Laylis 4

Isugee

1 321 + 30	2 211 + 40	3 236 + 40	4 20 +142	5 925 + 50
6 244 + 23	7 936 + 52	8 704 + 50	9 462 + 19	10 546 + 34
11 634 + 28	12 564 + 26			

Shaxahan soo socda buugtiina ku guuriya, ka dibna tirada ku haboon ku buuxi.

b

20 u geeq	
113	
462	
511	
900	
467	

t

x	x + 23
121	
324	
637	
109	
590	

j

c	c + 213
24	
45	
64	
38	
80	

x

m	n	m + n
200	20	
400	43	
61	124	
77	104	
81	918	
34	128	

Tusaale 2

Isugee $\begin{array}{r} 368 \\ +\ 54 \\ \hline \end{array}$

Habka looga shaqeeyo

Talaabada 1	Talaabada 2	Talaabada 3
Marka u horaysa koowaadada (halalka) isugee 8 + 4 = 12: 12 koowaad waa 1 tobnaad iyo 2 koowaad (xabo). 2da intaad qortid 1 ka tobnaad qaad oo u gee tobnaadada	Ka dibna tobnaadada isugee, isla markaana 1 kii tobnaad ee aad soo qaaday ku dar. 6 + 5 + 1 = 12 tobnaad. 12 tobnaad waa 1 boqlaad iyo 2 tobnaad. 2da inta aad qortid 1 ka boqol qaad oo u gee boqolaadada	Ugu danboysta 3 da boqlaad u gee 1 kii boqlaad ee aad soo qaaday 3 + 1 = 4
1 368 + 54 2	1 368 + 54 22	1 1 368 + 54 422

Sidaas darteed $\begin{array}{r} 368 \\ +\ 54 \\ \hline 422 \end{array}$

Laylis 5

1. *Isugee*

   b. $\begin{array}{r} 149 \\ +\ 72 \\ \hline \end{array}$ **t.** $\begin{array}{r} 168 \\ +\ 73 \\ \hline \end{array}$ **j.** $65 + 178$ **x.** $\begin{array}{r} 56 \\ +\ 278 \\ \hline \end{array}$

2. ***Shaxahan hoose buugtiina ku guuriya, ka dibna tirada ku haboon meelaha banaan ku buxiya.***

b.	
x	x + 12
111	
188	
448	

t.	
114 ugeeya	
24	
72	
99	

j.		
x	y	x + y
49	148	
164	47	
99	211	

Tusaale 3

b *3 mitir iyo 50 sentimitir u bedel sentimitir*

Xusuuso

1 mitir = 100 sentimitir

Xidhiidhkan anaga oo adeegsanayna ayaan sidan uga shaqaynaynaa

3 mitir = 1 mitir + 1 mitir + 1 mitir

= 100 sm + 100 sm + 100 sm

= **300 sm**

Sidaas darteed, 3 mitir iyo 50 sentimitir = 300 sm + 50 sm

= **350 sm**

t 2 mitir iyo 30 sentimitir + 15 sentimitir, imisa sm ayey noqon?

Jawaab. 2 mitir marka loo bedelo sentimitir, marka u horaysa 2 da mitir ayaan sentimitir u bedeleynaa

2 mitir = 2 × 100 sentimitir

= **200 sm**

Imika 2 mitir iyo 30 sentimitir = 200 sm + 30 sm

= **230 sm**

Sidaas darteed, 2 mitir iyo 30 sentimitir + 15 sentimitir = 230 sm + 15 sm

= **245 sm**

U fiirso in jawaabta kor lagu dhigay sidan hoose loo qori karo.

2 mitir iyo 30 sentiitir + 15 sentimitir = **2 m iyo 45 sm**

Laylis 6

Adiga oo raacaya habka tusaalaha korka looga shaqeeyey, suaalahan hoose ka shaqee.

1 *sm u bedel*

b 2 m iyo 45 sm

t 4 m iyo 35 sm

j 3m iyo 78 sm

x 6 m iyo 8 sm

2 *Isugee oo jawaabta sm ku qor*

b	5 m iyo 40 sm + 35 sm	**t**	6 m iyo 65 sm + 17 sm
j	7 m iyo 56 sm + 4 sm	**x**	4 m iyo 67 sm + 48 sm
kh	8 m iyo 27 sm + 85 sm		

3 *Isugee oo jawaabta mitir iyo sentimitir ku qor*

b	4m iyo 45 sm + 25 sm	**t**	3m iyo 25 sm + 57 sm
j	5m iyo 67 sm + 46 sm	**x**	8 m iyo 35 sm + 75 sm

Sidee ayaa la isugu gayn karaa tiro 3-godle ah iyo tiro 4-godle ah?

Saddex arday ayaa la weydiiyey in ay isugeeyan tirada 2463 oo ah tiro afar-god ah iyo tirada 321 oo ah tiro saddex-god ah. Waxayna isugu geeyeen sidan.

Ardaygii koowaad	Kii labaad	Kii saddaaxaad
2463	321	2,463
+ 321	+ 2463	+ 321
2784	2784	5,673

Ardaygee ayaynan shaqadiisu sax ahayn?

U fiirsada:

Marka laba tiro Joog la isugu geynayo waa in godadka (astirooyinka) qiima-rugeedkooda isku midka ah inta la isku beego la isku hoos qoraa.

Sidaas darteed godka ku yaala rugta tobnaadka iyo godka ku yaala rugta koowaadka la iskuma hoos qori karo.

Tusaale 1

Isugee 4234 + 142

Tirooyinka joog isku hoos qor adiga oo isku beegaya, ama isku hoos qoraya godaka qiima-rugeedkoodu isku midka ah.

Sidaas darteed $\begin{array}{r} 4324 \\ +\ 142 \\ \hline \end{array}$ ama $\begin{array}{r} 142 \\ +\ 4234 \\ \hline \end{array}$

Habka looga shaqeeyo

Talaabada 1	Talaabada 2	Talaabada 3	Talaabada 4
Marka u horaysa koowaadka isugee 4 + 2 = 6	Ka dib tobnaadada isugee 3 + 4 = 7	Ka dibna boqlaadada isugee 2 + 1 = 3	Ugu danbaysta 4 ta kumaad toos u qor.
4234 + 142 6	4234 + 142 76	4234 + 142 376	4234 + 142 4376

Sidaas darteed 4234 + 142 = 4376

Isugegnta tirooyinka ee leh tiro qaadasho la xidhiidha qiima-rugeedyada kala gadisan.

Tusaale 2

Isugee 1357 + 546

Habka loo xisaabiyo

Marka u horaysa koowaadka isugee 7 + 6 = 13. 13 halooyin waa 1 toban iyo 3 hal. 3 da inta aad qortid 1 ka toban qaad (hayso) oo u gee tobanadada.	Ka dib tobnaadada isugee. adiga oo ku daraya 1 kii tobnaad ee aad so qaaday 1 + 5 + 4 = 10 10 tobnaad waa 1 boqlaad '0' ta intaad qortid 1 ka boqol qaad oo u gee boqlaadada.	Ka dibna boqlaadada isugee isla markaana ku dar 1 kii boqlaad ee aad soo qaaday 1 + 3 + 5 = 9	Ugu danbaysta kunnaadka isugee 1 + 0 = 1
1 1357 + 546 3	1 1 1357 + 546 03	1 1 1357 + 546 903	1 1 1357 + 546 1903

Sidaas darteed 1357 + 546 = 1903

Hawlgalka 4.2

Isugee

1 1783 + 128

2 8641 + 269

3 6444 + 578

4 1868 + 671

5 3009 +3991

6 8888 + 12

7 347 + 4574

8 29 iyo 365

9 6585 iyo 847

Laylis 7

Isugee

1 263 + 78

2 453 + 189

3 6735 +287

4 45 + 687

5 184 +1995

6 2478 + 6731

7 5355 + 256

8 3079 + 44

9 3511 + 99

10 ***Tirooyinka 1457 iyo 29 marka joog la isugu geynayo sidee ayaa la isugu hoos qori karaa? Isku hoos qorista kuwa saxa ah dooro oo buugaaga ku qor kuwa khaladka ah, sababta cadee.***

b 1457 + 29

t 1457 + 29

j 29 + 1457

x 1457 + 29

Joog isugu gee

11 5355 + 256

12 3079 + 44

13 3511 + 99

14 994 iyo 2011

15 1536 iyo 664

16 9 iyo 5995

17 6320 + 1780

18 2643 + 4388

19 7894 + 358

Weedh xisaabeedyo

20 Dugsi ayaa tirada ardayda gabdhuhu tahay 2057. Tirada ardayda inamadu haddi ay tirada gabdaha dheer yihiin 273 tirada ardayda inamadu waa imisa?

21 Magaalo ayaa sannadkii 2001, ee tirsiga Itoobiya waxa la sameeyey waddada cagta oo dhererkeedu yahay 3677 mitir. Sidoo kale sannadkii 2002 waxa la sameeyay waddo dhererkeedu yahay 5843 mitir. Labada sannadood waddooyinka la sameeyey dhammaantood dhererkoodu waa imisa mitir?

Shaxahan hoos ku xusan buugaaga ku guuri kadibna sida lagugu amray u buuxi

22

Tira kasta 334 ku dar	
279	
1300	
4366	
5991	
2779	

23

b	b + 3469
9	
98	
743	
6531	

24

r	s	r + s
200	1946	
203	1594	
69	2677	
8	399	
6732	6732	

4.1.5 HABKA QAYB QAYB ISUGU GEYNTA

Habkani waa hab inoo fududaynaya hawsha isugeynta marka aan tirooyinka isugaynayno. Marka ugu horaysa waxaan gooni gooni isugugeynaynaa qiimaha godadka ee qiima-rugeedkoodu isku midka yahay. Ka dibna waxaan isugeynaynaa wadaraha aan gooni goonida u xisaabinay. Taas oo inna siinaysa wadarta guud ee aan rabno.

Tusaale I

Tirada 3685 godadka ay ka kooban tahay midkasta qiimihiisu waa sidan hoos ku xusan. qiimaha godka 5 waa 5 koowaad ama 5, qiimaha godka 8 waa 8 tobnaad ama 80, qiimaha godka 6 waa 6 boqolaad ama 600, qiimaha godka 3 waa 3 kunaad ama 3000

U fiirsada tusaalahan hoos ku xusan

Tussale 2

Isugee 647 iyo 275

b labada biirooyin wadarta qiimaha godadka koowaadadu waa imisa? 7 + 5 = 12

t labada biirooyin wadarta qiimaha godadka tobnaadadu waa imisa?

4 toban iyo 7 toban = 40 + 70 = 110

j labada biiroooyin wadarta qiimaha godadka boqlaad ku waa imisa?

6 boqlaad iyo 2 boqlaad = 600 + 2 = 800

x Wadaraha qiimooyinka godadka qiima rugeekoodu isku midka yahay ee aad soo xisaabiseen wadartoodu waa imisa?

$$\begin{array}{r} 12 \\ +110 \\ \underline{800} \\ 922 \end{array}$$

Habka looga shaqeeyey sida shaxadan hoose lagu muujiyey ayaa loo soo koobi karaa.

	$\begin{array}{r} 647 \\ \underline{275} \end{array}$
Wadarta qiimooyinka godadka koowaadka	7 + 5 = 12
Wadarta qiimooyinka godadka tobnaadka	40 + 70 = 120
Wadarta qiimooyinka godadka boqlaadka	600 + 200 = 800
Wadarta wadaruhu waa Wadarta labada tiro	922

Sidaas darteed 647 + 275 = 922

Shaqo fasal

1 ***Tiro kasta ku qor wadarta qiimaha godadkood oo ah dhufsanayaasha 1000, 100, 10, iyo 1.***

b 35 = 30 + 5

t 246 = 200 + 40 + 6

j 3754 = 3000 + 700 + 50 + 4

x 67 = _____

kh 637 = _____

d 7243 = _____

r 80636 = _____

s 2735 = _____

2 *Isugee Adiga adeegsanaya habka isugeynta ee kor tusaalaha 2 lagu xusay.*

b

Isugee 472 + 287	472 + 287
Wadarta qiimooyinka godadka koowaadada	2 + 7 = 9
Wadarta qiimooyinka godadka tobnaadada	70 + 80 = 150
Wadarta qiimooyinka godadka boqlaadada	400 + 200 = 600
Wadarta wadaraha	759
Jawaab	759

t

Isugee 756 + 289	756 + 289
Wadarta qiimooyinka godadka koowaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka tobnaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka boqlaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta wadaraha	
Jawaab	

j

Isugee 2675 + 1568	2675 + 1568
Wadarta qiimooyinka godadka koowaadada	5 + 8 = 13
Wadarta qiimooyinka godadka tobnaadada	70 + 60 = 130
Wadarta qiimooyinka godadka boqlaadada	600 + 500 = 1,100
Wadarta wadaraha	4,243
Jawaab	4,243

x

Isugee 4231 + 5625	4231 + 5625
Wadarta qiimooyinka godadka koowaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka tobnaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka boqlaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta wadaraha	
Jawaab	

kh

Isugee 625 + 263	625 + 263
Wadarta qiimooyinka godadka koowaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka tobnaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka boqlaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta wadaraha	
Jawaab	

d

Isugee 4756 + 2879	4756 + 2879
Wadarta qiimooyinka godadka koowaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka tobnaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta qiimooyinka godadka boqlaadada	___ + ___ = ____.
Wadarta wadaraha	
Jawaab	

Laylis 8

Isugee adiga oo adeegsanaya habka tusaalaha 2 looga shaqeeyey.

1 341 +156	**2** 227 +156	**3** 3014 +2123	**4** 6711 +2699	**5** 634 +52
6 748 + 65	**7** 3467 +284	**8** 315 +2465	**9** 8411 +1235	**10** 6757 +2385

U fiirso habka gidaarada isugeynta ee hoos lagu cadeeyey

Tusaale marka weedha 142 + 35 = 177 lagu muujiyo habka, gidaarka isugeynta wax-ay noqon sidan



Hawlgalka 4.3

Adiga oo raacaya habka kor lagu cadeeyey dhammaystir gidaarka isugeynta.

1



2



3



4



5



6



4.2 KALAGOYNTA TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000

4.2.1 KAGOYNTA TIRO SADDEX-GOD (SADDEX-ASTIROOLE) AH TIRO KA YAR

Dugsi tirada ardayda ku jirtaa waa 347. Tirada ardayda wiilashu haddii ay tahay 234, tirada gabdhu waa imisa?

Si aan tirada gabdhaha u helno waan kalagoynaynaa.

347 – 234 = ?

Habka loo xisaabiyo

Marka u horaysa koowaadada kala - goo 7 – 4 = 3	Ka dib tobnaadada kalagoo 4 – 3 = 1	Ugu dambaysta boqlaadada kala goo 3 – 2 = 1	Jawaabta aad heshay Isugayn ku xaqiiji (kuhubi)
347 – 234 3	347 – 234 13	347 – 234 113	113 + 234 347

Sidaas darteed tirada gabdhuhu waa 113.

Xusuusin: 347 waa laga gooye

234 waa lagooye (gooye ama goosane)

113 waa faraq

Laga gooye – lagooye = faraq

ama

la gooye + faraq = laga gooye

Shaqo fasal

kalagoo. Faraqa isugeyn ku hubi (xaqiiji)

1	368 –132	2	560 –140	3	641 – 21	4	678 – 46	5	919 – 6
6	665 –234	7	659 –320	8	753 – 52	9	878 – 45	10	855 – 5

Laylis 9

Kalago. Faraqa isugeyn ku hubi (xaqiiji)

1 127 − 105	**2** 468 − 36	**3** 784 − 252	**4** 674 − 123	**5** 949 − 946
6 535 − 202	**7** 638 − 400	**8** 684 − 23	**9** 456 − 40	**10** 584 − 374
11 462 − 61	**12** 973 − 403	**13** 567 − 367	**14** 199 − 29	**15** 998 − 394
16 650 − 300	**17** 118 − 6	**18** 857 − 457	**19** 787 − 767	**20** 399 − 208

Weedhxisaabeedyo (masalooyin)

21 Degmo waxaa ku nool dad ay tiradood u dhan tahay 967. Tirada carrurta degmadu haddii ay tahay 241, tirada dadka waa weyni waa imisa?

22 Soo saar tirada 45 ka yar 386.

Shaxahan hoos ku xusan buugaaga ku guuri ka dibna buuxi.

23

312 ka go tirada	
467	
355	
879	
112	

24

x	x − 125
675	
249	
988	
555	

25

d	b	d − b
765	300	
308	208	
548	37	
955	632	

4.2.2 KALANGOYNTA TIRO SADDEX-GOD (SADDEX-ASTIROOLE) AH IYO TIRO KALE OO KA YAR OO AMAAHASHO LEH

Xarun xoolaha lagu dhaqo waxa kujira 657 neef oo isugu jira lo' iyo adhi. Tirada lo'du haddii ay tahay 429 tirada adhigu waa imisa?

Habka loo xisaabiyo $657 - 429 = ?$ ama $\begin{array}{r} 657 \\ -\,429 \\ \hline \end{array}$

7 koowaad 9 koowaad lagama goyn karo. 5 ta tobnaad ayaan 1 tobnaad ka amaahanaynaa (qaadaynaa) anaga oo reebayna 4 tobnaad. 1 ka toban inta aan 10 koowaad u badalno ayaan ugaynaynaa 7da koowaad 10 + 7 = 17 Imika 17 – 9 = 8 8 da koowaadada ku hoos qor	Ka dib tobnaadada kalago 4 – 2 = 2 2 da tobanada ku qor	Ugu danbaysata boqlaadada kalago 6 – 4 = 2 2 da boqlaadada ku qor	Jawaabta aad heshay Isugayn ku hubi
17 657 – 429 8 17 – 9 = 8	4 17 6 57 –429 28 4 – 2 =2	4 17 657 –429 228 6 – 4 =2	228 + 429 657

Sidaas darteed tirada adhigu waa 228.

Shaqo fasal

Kalagoo: Faraqa isugeyn ku xaqiiji (hubi).

1 251 −134	**2** 372 − 45	**3** 482 −364	**4** 474 − 28	**5** 794 −255
6 438 −272	**7** 846 −263	**8** 659 −281	**9** 200 − 70	**10** 462 −171

Laylis 10

Kalago. Jawaabtaada isugegn ku xaqiiji (hubi).

1 364 −254	**2** 647 −139	**3** 740 − 221	**4** 254 −36	**5** 598 − 69
6 746 −665	**7** 609 − 87	**8** 500 − 50	**9** 684 − 92	**10** 347 −177
11 653 −271	**12** 513 − 22	**13** 215 −107	**14** 424 −284	**15** 558 −176
16 747 −264	**17** 617 −347	**18** 369 −186	**19** 118 − 6	**20** 857 −457

Weedh xisaabeedyo (masalooyin)

21 Gaadhi ayaa magaalada Addis Ababa ka baxay si uu ugaadho magaalada Mooyaale oo Addis Ababa 771 km ka fog. Gaadhigu ka dib markuu socday 395 km. Shaag ayaa ka qarxay oo wuu istaagay. Gaadhigu inuu mooyaale gaadho imisa kiilomitir ayaa u hadhay?

22 384 imisa ayey ka badan tahay 290?

Shaxahan hoos ku xusan buugaaga ku guuri ka dibna sida lagu amray u buuxi.

23

357 kagoo tirada	
370	
684	
591	
648	
929	

24

x	x – 135
646	
372	
418	
772	
727	

4.2.3 HABXISAABINTA KALAGOYNTA LEH AMAAHASHOO

LABA JEER AH

Dugsi heerka koowaad ah tirada ardayda fasalka 3^{aad} dhigataa waa 735. Tirada ardayda inamadu ee fasalka 3^{aad} haddii ay 389 tahay tirada ardayda gabdhuhu waa imisa?

Habka loo xisaabiyo 735 – 389 = ? ama $\begin{array}{r} 735 \\ -\ 389 \\ \hline \end{array}$

5 koowaad 9 koowaad kama goynkarno. 3 da tobnaad ayaan 1 toban ka amahanayna anaga oo reebayna 2 tobnaad . 1 ka tobnaad inta aan 10 koowaad u badalno ayaan u gaynayna 5 ta koowaad. 10 + 5 = 15 Imika 15 – 9 = 6 6 da koowaadada ku qor.	Ka dib tobnaadada kala goo 2 tobnaad qtobnaad kama goyn karno. 7 da boqlaad ayaan 1 boqlaad ka amaahanaynaa anaga oo reebayna 6 boqlaad. 1 ka boqol inta aan 10 tobnaad u badalno ayaan ugaynaynaa 2 da tobano 10 + 2 = 12 tobnaad Imika 12 – 8 = 4 4 ta tobnaadada ku qor.	Ugu danbaysta boqlaadada kalogoo 6 – 3 = 3	Faraqa aad heshay Isugeyn ku xaqiiji
2 15 735 – 389 6 15 – 9 = 6	6 12 2 15 735 – 389 46 12 – 8 = 4	6 12 2 15 735 – 389 346 6 – 3 = 3	346 +389 735

Sidaas darteed tirada ardayda gabdhuhu waa 346.

Shaqo fasal

Kalagoo. Jawaaabtada Isugeyn ku hubi

1 780 −480	**2** 753 −486	**3** 341 −166	**4** 627 −288	**5** 875 − 88
6 300 −142	**7** 563 −387	**8** 436 − 68	**9** 420 −178	**10** 860 −480

Laylis 11

Kalagoo. Natiijada aad heshid isugeyn ku hubi.

1 700 −345	**2** 522 − 83	**3** 314 −255	**4** 475 −277	**5** 900 −854
6 470 −398	**7** 405 −398	**8** 200 − 45	**9** 101 − 27	**10** 386 −297
11 718 −369	**12** 642 −371	**13** 780 −499	**14** 889 −729	**15** 673 −283
16 325 −239	**17** 632 −439	**18** 424 −258	**19** 581 −246	**20** 890 −690

Weedh xisaabeedyo (masalooyin)

21 Sannadkii 2001, sandnntirsiga Itoobiya ayaa degmo lagu beeray 954 geed oo talaal ah. Geedahaas haddii 875 ay ka fiilaan tirada geedaha aanan fiilin ee qalashay waa imisa?

22 Buste qiimihiisu ahaa 220 birr, haddii 50 birr laga naaquso qiimaha cusub ee bustaha waa Imisa?

4.2.4 KALAGOYNTA TIRO AFAR-GOD (AFAR-ASTIROOLE) AH IYO TIRO KALO KA YAR OO LEH AMAAHASHO

7940 imisa ayey ka badan tahay 5680?

Habka loo xisaabiyo: 7940 – 5680 = ? ama $\begin{array}{r} 7940 \\ -\ 5680 \\ \hline \end{array}$

Ugu horaanta koowaalada kalagoo 0 – 0 = 0	Ka dib tobnaadada kala goo. Hasea yeeshee 4 tobnaad lagama goyn karo 8 tobnaad. Sidaas darteed 9 ka boqlaad 1 boqlaad ka amaaho adiga oo reebaya 8 boqlaad, 1 boqlaad waa 10 tobano. 10 tobnaad u gee 4 ta tobnaad 10 + 4 = 14 tobnaad Imika 14 – 8 = 6 6 da godka tobnaadada ku qor.	Ka dibna boqlaadada kala goo 8 – 6 = 2 2 da godka boqlaadada ku qor	Ugu danbaysta kunnanada kalago 7 – 5 = 2 2 da godka kunnaadka ku qor	Faraqa aad heshay isugayn ku hubi
7940 –5680 0 0 – 0 = 0	8 14 7940 –5680 60 14 – 8 = 6	8 14 7940 –5680 260 8 – 6 = 2	8 14 7940 –5680 2260 7 – 5 = 2	2260 +5680 7940

Sidaas darteed tirada 7940 waxay tirada kale ka badan tahay 2260.

Shaqo fasal

Kalagoo. Faraqa aad heshid Isugeyn ku hubi.

1 7438 –1216	2 2645 – 328	3 9634 – 67	4 1874 – 9	5 5542 –3218
6 3456 –1278	7 7243 – 357	8 8435 –2214	9 7083 –2047	

Laylis 12

Kalagoo. Ka dibna xaqiiji natiijada shaqadaada.

1 3980 –2130	2 5287 –1084	3 1367 – 243	4 6879 – 47	5 4618 – 9
6 1234 – 65	7 2004 – 316	8 3421 –1214	9 9432 – 124	10 6624 – 419

11 7265 − 128	**12** 3607 −2650	**13** 4512 − 990	**14** 8906 −1094	**15** 4800 − 341
16 7682 −1960	**17** 2185 −2990	**18** 6841 −5900	**19** 7352 −6790	**20** 7000 −5809

Weedh-xisaabeedyo (masalooyin)

21 Lix kun shan boqol fartan iyo saddex, kagoo saddex kun hal boqol soddon iyo laba.

22 Ciyaar kubbadda cagta oo lagu qabanayey garoonkakubbadda daawashadeeda tigidhka loo diyaariyey oo tiradiisu ahayd 5672 waxa la iibiyey 3000 oo tigidh. Tirada tigidhka aan la iibinin waa imisa?

23 Gobal dugsiyada jira tirada ardayda ku Jirtaa waa 5763. Tirada ardayda wiihlasu haddii ay 3000 tahay, tirada ardayda gabdhuhu waa imisa?

Shaxahan hoos ku xusan. Sida lagugu amray u buuxi.

24

1357 ka goo tirada	
3489	
4264	
5000	
6708	
3007	

25

m	n	m − n
3000	119	
2502	1557	
6073	964	
6008	2999	
9793	2685	

4.3 WEEDH XISAABEEDYADA AH ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA

Tusaale

Dugsi ayaa sannad loo iibiyey 536 miisaska ardyda. Sannadkii labaadna waxaa loo iibiyey 287 dheeraad ah. Labada sannadood dhammaan miisaska ardayda ee dugsiga loo iibiyey waa imisa?



Fufuris

i waxaa la weydiiyey (su'aalay): Labada sannadood dugsigu dhammaan miisaska ardayda ee uu iibsaday inta ay tahay waa imisa.

ii Wacaasha la siiyey (la sheegay): Dugsigu sannad 536, sannaodkii labaadna 287 miisaska ardayda ayuu iibsaday.

iii Waxa la raadinayo in la helo iyo sida loo helayo: Dugsigu labada sannadood dhammaan tirada miisaska ee u iibsaday in la helo labada sannadood inta la iibsaday ayaa la isugeyn.

Sidaas darteed 536 + 287 = 823

Dugisu labada sannadood wuxu iibsaday 823 miis.

Ufiirsada

Sida tusaalaha korka lagu muujiyay marka laga shaqynayo weedh xisaabeedyada waxa loo baahan yahay in la raaco talaabooyinkan hoos ku xusan.

Habka looga shaqeeyo weedh xisaabeedyada.

Talaabada 1 Weedh xisaabeedka si taxadder ah u akhri oo faham waxa la waydiiyay.

Talaabada 2 Wacaasha la siiyay (la sheegay) qumaati u sooc.

Talaabada 3 Waxa la doonayo ee la raadinayo si cad u garo.

Talaabada 4 Waxa la doonayo in la helo xisaabfalka (isugeyn kalagoyn ama labadooda.) ee ku haboon dooro.

Talaabada 5 Xisaabfalka ad dooratay ku xisaabi oo natiijada qor. Kadibna hubi natiijadaada.

Tusaale 2

Laba tiro ayay wadartoodu tahay 1721. Haddii midkood yahay 475, ta kale waa imisa?

Furfaris

i Su'aashu waxay tahay: Tirada kale waa imisa.

ii Wacaasha la siiyay

b labda tiro wadartooda 1721. t labada tiro midkood waa 475

iii Wax la doonayo: tirada kale inta ay tahay iyo sida loo helayo. Waxaan dhisaynaa (samaynaynaa) weedh ka dhisan waxa la siiyay iyo waxa la doonayo in la helo. Sidaas darteed bal aan ku magacawno tirada la doonayo xarafka 'b'. Sidaas darteed

b + 475 = 1721

iv Si aan u helno tirada la doonayo waxaan ku isticmaalynaa xisaab falka kalagoynta. Sidaas awgeed b = 1721 – 475 = 1246

Sidaas darteed tirada kale waa 1246.

Hubin: 1246 + 475 = 1721

Tusaale 3

Ganacsade badarka ka ganacsada ayaa iibsaday 117 kiintaal oo hadhuudh ah iyo 96 kiintaal oo galley ah. Intas wuxuu ka iibiyay 45 kiintaal oo hadhuudh ah iyo 34 kiintaal oo galay ah. Imisa kiintaal oo badar ah ayaa u hadhay?

Furfaris

i Waydiintu waxay tahay hadhuudhka iyo galleyda hadhay guud ahaan inta kiintaal ay tahay.

ii Wacaasha la siiyay: ganacsaduhu wuxuu iibsaday 117 kiintaal oo hadhuudh ah iyo 96 kiintaal oo galay ah. Ganacsaduhu wuxuu iibiyay 45 kiintaal oo hadhuudh ah iyo 34 kiintaal oo galay ah.

iii Waxa la doonayo: badarka (hadhuudhka iyo galleyda) inta kiintaal ee guud ahaan aanan la iibinin ee hadhay (gaday).

Si loo helo waxa la doonayoo oo ah badarka inta kiintaal ee hadhay waxa la kala goyn dhamaan wadarta kiintaalada badarka ee la iibsaday iyo dhamaan wadarta kiintaalada badarka ee la iibiyay.

Sidaas darteed wadarta dhamaan kintaalada la iibsaday 117 + 96 = 213 wadarta dhamaan kiintaalada la iibiyay 45 + 34 = 79

Sidaas darteed kiintaalada hadhuudh ka iyo kiintaalada galleyda ee hadhahay dhamaantood waa 213 – 79 = 134

Tusaale 4

Ganacsade ukunta (ugaxda) ka gancsada ayaa soo iibsaday 351 ugaxood oo gurigiisa keenay. Ka dib wuxuu arkay in 35 ugaxood ay jajabeen. Intii hadhay wuxuu ka iibiyay 70 ugaxood. Imisa ugaxood ayaa u hadhay?

i waydiintu waxay tahay ugaxaha inta jajabtay iyo inta la iibiyay marka laga reebo inta kale ee hadhay waa imisa?

ii Wacaasha lasiiyay

b dhamaan inta ugaxood ee u ganacsaduhu iibsaday 351

t ukumaha (ugaxaha) Jajabay: 35

j ugaxaha la iibiyay: 70

iii Waxa la doonayo: ugaxaha inta hadhay ee aanan JaJabin lana iibinin

Waxa la doonayo si loo helo marka hore isugee inta jaJabtay iyo inta la iibiyay.

35 + 70 = 105

Ka dibna kalagoo 351 iyo 105

Sidaas darteed 351 – 105 = 246

Sidaas darteed tirada ugaxaanta hadhay waa 246.

Wadada kale ee aan natiijada ku heli karnaa waxa ay tahay anaga oo laba jeer isticmaalayna xisaabfalka kalagoynta.

351 ka goo tirada ugaxaanta jajabtaty: 351 - 35 = 316

i 351 kalgoo 35, 351 – 35 = 316

ii 316 kalgoo tirada ugaxaanta la iibiyay

316 – 70 = 246

Taasi waxay ka dhigan tahay tirada guud ee ugaxda marka inta jajabtay iyo inta la iibiyay laga reebo inta hadhay waa 246.

laylis 13

1 Saylad xoolaha lagu iibiyo waxa jooga 3567 neef oo dibi ah iyo 756 neef oo wanan ah. xoolahaas waxa laga iibiyay 1251 dibi iyo 635 wanan. Tirada Dibida iyo wananka aanan la iibinin mid ahaan waa imisa?

2 Qof beeralay ah ayaa 470 Qoodi oo ah qayb ka mid ah dhulbeereedkiisa ku beeray hadhudh. Dhulbeereedkiisa inta hadhay marka la cabbiro waxay noqotay 315 qoodi. Beerooluhu dhamaan dhulbeereedka u leeyahay waa imisa qoodi?

3 Addis Ababa ilaa magaalada Goday marka loo socdo waxa la sii maraa magaa lada Jigjiga. Fogaanshaha u dhexeeya Addis Ababa iyo Godday 1150 km. Jigjiga iyo Godayna fogaanshaha u dhexeeyaa waa 535 km. Addis Ababa iyo Jigjiga fogaansha u dhexeeyaa waa imisa?

4 Laba tiro ayuu faraqigoodu yahay 1987. Haddii laga gooyuhu yahay 7826. goosanuhu waa imisa?

5 7849 imisa ayay ka yar tahay 9112?

6 8766 imisa ayay dheer tahay 5989?

Cutubka

5aad

99 115 10,000 1375 609 $100 \times 6 = 600$ $1,500 \div 3 = 500$ 7,082 999

ISKUDHUFASHADA IYO ISUQAYBINTA TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000

5.1 Iskudufashada Dhufsanayaasha 100 iyo tirooyinka 1–god (hal-astirole) ah

Tusaale 1

Muuse waa ganacsade ka ganacsada dibad u dhoofinta adhiga. Sanad kasta haddii uu dibada u dhoofiyo 200 oo wan. Afar sanadood dhexdeeda imisa wan ayuu dhoofin?

$4 \times 200 = ?$

Iyada oo la isticmaalay xeerka aasaasiga ah ee iskudhufashada ayaa dhib yar, taranta loo xisaabin karaa.

$4 \times 2 = 8$

$4 \times 20 = 80$

$4 \times 200 = 800$

Sidaas darteed muuse afar sanadood dhexdooda 800 oo wan ayuu dhoofin.

Adiga oo isticmaalaya hab la mid ah kaas korka lagu muujiyay, waxaad si dhib yar tiraab ahaan (afka) isugud hufan kari dhufsanayaasha boqol.

$3 \times 3 = 9$ $3 \times 4 = 12$

$30 \times 3 = 90$ $30 \times 4 = 120$

$300 \times 3 = 900$ $300 \times 4 = 1200$

Hawlgal ka 5.1

1	$2 \times 2 = \square$	**2**	$3 \times 4 = \square$	**3**	$4 \times 4 = \square$
	$20 \times 2 = \square$		$30 \times 4 = \square$		$40 \times 4 = \square$
	$200 \times 2 = \square$		$300 \times 4 = \square$		$400 \times 4 = \square$
4	$2 \times 5 = \square$	**5**	$3 \times 7 = \square$	**6**	$4 \times 8 = \square$
	$20 \times 5 = \square$		$30 \times 7 = \square$		$40 \times 8 = \square$
	$200 \times 5 = \square$		$300 \times 7 = \square$		$400 \times 8 = \square$

Laylis 1

Kuwan soo socda tiraab ahaan (afka) ka xisaabiya)

1	100×2	**2**	100×3	**3**	500×2	**4**	500×3
5	900×4	**6**	400×5	**7**	300×6	**8**	800×7
9	800×8	**10**	800×9				

Weedh xisaabeedyo (masalooyin)

11 Warshada dharka ee hawaasa haddii bil kasta ay qaybiso 500 oo daqadood oo maro ah; 4 bilood Imisa daaqadood oo maro ah ayay qaybin?

12 Cumar wuxuu iibsaday 8 sanduuq oo muus ah. Sanduuqii kasta haddii uu qaado 300 oo muus guud ahaan imisa hal oo muus ah ayuu iibsaday?

13 8 mitir waa imisa sentimitir?

14 Shaxdan hoos ku xusan buugaaga ku guuri ka dibna meelaha bannaan ku buuxi dhufsanayaasha boqol.

×	1	2	3	4	5	6	7
100				400			
200					1000		
300							2100
400							
500	500						
600						3600	
800		1600					
900			2700				

Tusaale 2

Rooble wuxu iibsaday 3 sacood. Sac kasta qiimihiisu haddii uu 1500 birr yahay. Rooble imisa birr ayuu bixiyay?

Furfuris

Xasuusta

$15 \times 3 = 45$

$15 \times 3 = 45$

$150 \times 3 = 450$

$1500 \times 3 = 4{,}500$

Sidaas darteed Rooble wuxuu bixiyay 4500 birr

Idinka oo isticmaalaya wax-yaalo sidaas oo kale, waxaad si dhib yar aad karti ugu yeelan karaysiin in aad korka (tiraab ahaan) isku dhufan kartiin dhufsanayaasha **toban** iyo **boqol**.

$6 \times 14 = 84$

$6 \times 140 = 840$

$6 \times 1400 = 8400$

$5 \times 15 = 75$

$5 \times 150 = 750$

$5 \times 1500 = 7500$

Hawlgal ka 5.2

Raadi taranta

1 $6 \times 2 = \square$
$60 \times 2 = \square$
$600 \times 2 = \square$

2 $11 \times 2 = \square$
$110 \times 2 = \square$
$1100 \times 2 = \square$

3 $16 \times 3 = \square$
$160 \times 3 = \square$
$1600 \times 3 = \square$

4 $13 \times 3 = \square$
$130 \times 3 = \square$
$1300 \times 3 = \square$

5 $14 \times 5 = \square$
$140 \times 5 = \square$
$1400 \times 5 = \square$

6 $12 \times 6 = \square$
$120 \times 6 = \square$
$1200 \times 6 = \square$

7 Warshada sibidhka ee Diridhawa haddii ay maalin kasta soo saarto 1200 kiish oo sibidh ah, 5 maalmood imisa kiish oo sibidh ah ayay soo saari?

Laylis 2

Iskudhufta:

1 1×1700 **2** 1500×2 **3** 2×1800 **4** 4×1300

5 8×1200 **6** 7×1300 **7** 2800×3 **8** 1100×9

9 4200×2 **10** 4900×2

Weedh xisaabeedyo (masalooyin)

11 Gaadhi bas ah ayaa hal wareeg sii socod iyo soo noqod socday 2200 km. Afar wareeg imisa km ayuu socon?

12 Dugsi ayaa qorshaystay in uu sanad kasta beero 1200 geed oo talad. Dugsigu afar sanadood imisa geedo ayaa talaali?

13 Shaxdan hoos ku xusan buugaaga ku guuri ka dibna dhammaystir.

×	1000	1500	2800	3300	4200
1					
2					
3		**4500**			
4					
5					

5.2 Iskudhufashada dhufsanayaasha 1000 iyo tiro hal-astiroole ah

Tusaale

Haan biyaha lagu keydiyo ayaa loo sameeyay inay qaado 1000 litir oo biyo ah. 3 haamood oo taas la mid ah. Imisa litir oo biyo ah ayay qaadayaan?

Furfuris

$1 \times 3 = 3$

$10 \times 3 = 30$

$100 \times 3 = 300$

$1000 \times 3 = 3{,}000$

Sidaas darteed 3da haanood 3000 litir oo biyo ah ayay qaadayaan

Hawlgal ka 5.3

Weydiimahan hoose kor (tiraabahaan) ka xisaabi

1	1000×2	2	2000×2	3	3000×3	4	3000×2
5	4000×2	6	6000×0	7	5000×1		

Laylis 3

Raadi taranta

1	1000×5	2	8000×1	3	1000×6	4	9×1000
5	9000×0	6	3×2000	7	1000×8	8	3×3000

9 Xaaji Xasan wuxuu leeyahay 8 gaadhi. Gaadhi kasta haddii lagu raray galay 1000 kg ah. Guud ahaan imisa kiilogaraam oo galay ah ayaa gaadhiyada lagu raray?

10 Dayaaradi hadii ay saacadiiba socoto 1000 kilomitir 6 saacadood imisa kiilo mitir ayay socon?

Tusaale:

5 kiilo garaam marka garaam loo bedalo imisa ayay noqon.

Furfuris

Xasuuso: 1 kg = 1000 g

Sidaas darteed, 5 kg = 5 × 1000 = 5000 garaam

Sidaas darteed 5 kg marka garaam loo baddalo waxay noqon 5000 g

Xusuuso

1 km = 1000 m

1 ℓ = 1000 m ℓ

1 m = 1000 mm

Hawlgal ka 5.4

Idinka oo laba laba isu kooxaynaya waydiin kasta Jawaabteeda tiraab ahaan (afka) ka xisaabi, Codkaaga kor u qaad oo u sheeg ardayda aad isku kooxda tihiin.

1 2 kg = _____ g **2** 4 km = _____ m **3** 5 ℓ = _____ m ℓ

4 3 m = _____ mm **5** 6 kiintaal = _____ kilogiraam

Laylis 4

1 ***Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxi***

b 7 litir = _____ ml **t** 6 kg = _____ g

j 8 km =_____ ml **x** 9 m = _____ mm.

2 ***Shaxahan hoose buugaaga ku guuri ka dibna dhamaystir.***

T	T × 1000
4	
5	
0	
7	
8	

×	1000	2000	3000	4000	5000	6000	7000	8000	9000
1									
2									
3									
4									
5									

3 Qof beeralay ah haddii u isticmaalo 3 kiintaal oo dawada bacrinta dhulka. 3000 oo beeralay imisa kiintaal ayay isticmaalayaan?

5.3 Iskudhufashada Tirooyinka Idil iyo Tiro 1-god ah oo tarantoodu ka yar tahay 10,000

5.3.1 Iskudhufashada tiro 1-god ah iyo tiro 2-god ah

B Habka qayb qayb isugu dhufashada

Si aad habkan ugu camalfashaan waxaad horta u baahan tihiin in aad xasuusatiin sida tiro idil loogu qoro wadarta qiima-rugeed godadka ee ay tirada ka kooban tahay.

Tusaale 1

Tirada 43 waxay ka kooban tahay laba god. 4 iyo 3. Qiima-rugeedka 3 waa 3 koowaad, ama $3 \times 1 = 3$. Qima - rugeedka 4 waa 4 tobnaad ama $4 \times 10 = 40$ sidaas darteed tirada 43 waxa loo qoraa $40 + 3$.

$$43 = 40 + 3$$

Marka tiro sidaas loo qoro waxa la yidhaahdaa habka fidinta.

Tusaale 2

Habka fidinta u qor tirada 65. Jawaab, Qiimaha 5 waa $5 \times 1 = 5$

Qiimaha 6 waa 6 tobnaad ama $6 \times 10 = 60$ sidaas darteed 65 marka si fidsan loo qoro waa $65 = 60 + 5$

Hawlgal ka 5.5

Tirooyinka hoos ku xusan si fidsan u qor.

1. $23 = \underline{20} + \underline{3}$
2. $38 = 30 + \square$
3. $45 = \square + 5$
4. $56 = \square + \square$
5. $47 = \square + \square$
6. $88 = \square + \square$

Tusaale 3

Dugsi ayaa fasalka labaad iyo fasalka saddexaad mid kasta waxa ku Jira 23 arday. Guud ahaan tirada ardayda ee labada fasal ku jirtaa waa imisa?

Habka loo xisaabiyo2 × 23 = ?

b	Tirada 23 koowaadkeeda 2 ku dhufo	2 × 3 = 6
t	Tirada 23 tobanadkeeda 2 ku dhufo	2 × 20 = 40
j	Labada taran isugee	6 + 40 = 46

Sidaas darteed 2 × 23 = 46

Sidaas darteed labada fasal ardayda ku jirtaa waa 46. Ufiirso. Si aan u helno taran-ta 2 × 23 waxaan isticmaalnay habka qayb qayb isugu dhufashada. Tusaalaha korka lagu cadeeyay sidan hoos lagu muuJiyay ayaa loo xisaabiya.

2 × 23 = ?

		Tobnaad	Koowaad
		2	3
		×	2
Koowaadka 2 Kudhufo	2 × 3 →		6
Tobnaadka 2 Kudhufo	2 × 20 →	4	0
Wadarta labada taran waxay ina siinayaan labada tiro tarantooda		4	6

Sidaas darteed 2 × 23 = 46

Tusaale 4

Iskudhufo 53 × 4

Habka loo xisaabiyo:

Tirada 53 marka si fidsan loo qoro waxa loo qoraa

53 = 50 + 3

		Tobnaad	Halhalo
		5	3
		×	4
koowaadka 4 ku dhufo	4 × 3 →	1	2
Tobnaadka 4 Kudhufo	4 × 50 →	2	0 0
Isugee taranada aad heshay		2	1 2

Sidaas darteed 4 × 53 = 212

Habka Iskudhufashada ee tusaalooyinka 3 iyo 4 lagu falanqeeyay waxa la yidhaah. Habka qayb qayb isku dhufashada.

Hawlgal ka 6

Waydiimahan hoos ku xusan iskudhufo adiga oo adeegsanaya habka qayb qayb iskudhufashada

1	11×5	**2**	22×4	**3**	30×2
4	52×7	**5**	46×4	**6**	74×9

7 Raadi khaladka looga shaqeeyay xisaabinta hoos ku taala.

Jamaal ayaa iskudhufashada 8×45 tiraab ahaan (afka) ka xisaabiyay oo sheegay in tarantu ay tahay 72. Habka uu u xisaabiyay sidan ayuu u muujiyay.

$$\begin{array}{rl} & 45 \\ & \times\ 8 \\ (8 \times 5) = & 40 \\ (8 \times 4) = & +\ 32 \\ & 72 \end{array}$$

Khaladkiisa marka ad tafatirtid dabadeed taranta hagaaji.

B Habka Jog isugu dhufashada

Tusaale 1

Axmed Aabihii wuxuu u iibiyay 3 buug oo mid kastaaba leeyahay 32 xaashi-yood. Guud ahaan 3da buug imisa xaashiyood ayey leeyihiin?

Habka loo xisaabiyo $3 \times 32 = ?$

Marka u horaysa joog ayaan isugu hoos qoraynaa $\begin{array}{r} 32 \\ \times\ 3 \end{array}$

Talaabo 1	Talaabo 2
Ugu horaynta 3da kudhufo koowaadka $3 \times 2 = 6$	Ka dib 3da kudhufo tobnaadka $3 \times 3 = 9$
32 $\times$ **3** **6** $3 \times 2 = 6$	**32** $\times$ **3** **96** $3 \times 3 = 9$

Tarantu waa 96

Sidaas darteed dhamaan 3da buug xaashiyahoodu waa 96.

Hawlgal ka 7

1 *Soo saar taranka*

b	24 × 2	**t**	22 × 4	**j**	23 × 3	**x**	42 × 4
kh	84 × 2	**d**	93 × 2	**r**	41 × 8	**s**	63 × 3

2 *Iskudhufo*

b	33 × 2	**t**	21 × 3	**j**	52 × 3	**x**	24 × 2

Ufiirso tusaalahan hoos lagu muujiyay. Wuxuu cadaynayaa oo lagu sharraxay habka loo xisaabiyo iskudhufashada leh tiro qaadasho ama haysasho.

Tusaale 2:

Iskudhufo 3 × 26

Habka loo xisaabiyo

Marka u horaysa joog isugu hoos qor $\begin{array}{r} 26 \\ \times\ 3 \\ \hline \end{array}$

Ka dib raac talaabooyinkan hoos lagu muujiyay

Talaabo 1	Talaabo 2
Ugu horaynta 3da ku dhufo koowaadka 3 × 6 = 18 koowaad 18 koowaad waa 1 tobnaad iyo 8 koowaad. 8 da inta aad qortid 1 ka toban qaado (hayso) oo u gee tobnaadada.	Ka dib 3da ku dhufo 2 da tobnaad islamarkana ku dar taranka 1 kii toban ee aad soo qaaday 1 + 3 × 2 = 1 + 6 = 7
1 **26** × **3** **8** 3 × 6 = 18	1 **26** × **3** **78** 3 × 2 = 6 6 + 1 = 7

Sidaas darteed 3 × 26 = 78

Tusaale 4:

Raadi taranta 64×8

Talaabo 1	Talaabo 2
Ugu horaynta 8da ku dhufo koowaadka. 8 × 4 = 32 koowaad. 32 koowaad waa 3 tobnaad iyo 2 koowaad. 2da inta aad qortid 3 da hay oo ugee tobnaadada.	Ka dib 8da ku dhufo 6da tobnaad. 8 × 6 toban = 48 tobnaad. 3 dii tobnaad ee aad haysay amaaad soo qaaday ugee 48 tobnaad. 3 + 48 = 51 tobnaad 51 tobano waa 5 boqlaad iyo 1 tobnaad. 1 rugta tobnaadada 5 tana rugta boqlaadada ku qor.
3 64 × 8 2 8 × 4 = 32	3 64 × 8 512 8 × 6 = 48 48 + 3 = 51

Sidaas darteed tarantu waa 512. Waa tiro 3-god (saddex astiroole) ah.

Hawlgal ka 8

Kuwan hoose isku dhufta.

1	14 × 2	2	20 × 3	3	44 × 2	4	35 × 3	5	57 × 8	6	86 × 9

Laylis 5

Isku dhufta

1	18 × 2	2	31 × 3	3	33 × 3	4	24 × 3
5	15 × 7	6	64 × 9	7	82 × 7	8	99 × 3

Waydiimahan hoose joog isugu-dhu fo.

9	13	**10**	21	**11**	14	**12**	42	**13**	63	**14**	95
	× 2		× 2		× 5		× 6		× 7		× 8

Weedh xisaabeedyo (masa'looyin)

1 Nijaar ayaa albaabka uu sameeyo qiimaha tacabkiisa qaata 31 birr. Nijaarku haddii uu 5 albaab sameeyo guud ahaan imisa birr ayuu heli?

2 3 beeralay ah ayaa midkastaba wax soo saarkiisu noqday 78 kiintaal oo qamadi ah. 3da beeralay guud ahaan imisa kiintaal oo qamadi ah ayay heleen?

5.3.2 Iskudhufashada tiro 1-god ah iyo tiro 3-god ah

B Habka qayb qayb isugu dhufashadu

Hawlgal ka 9

Laba laba isku kooxeeya ka dibna si aad u heshiin taranta 2 × 234 waydiimahan ka shaqeeya.

b ku dhufta 2 qiimaha godka 4

t Ku dhufta 2 qiimaha godka 3

j Ku dhufta 2 qiimaha godka 2

x Isugeeya taranada aad ka hesheen korka

b, t iyo J. Wadarta aad hesheen waa taranta loo baahnaa ee 2 × 234. U fiirsada taranada aad korka ka hesheen b, t iyo J waa qaybo ka mid ah taranta 2 × 234.

Tusaale:

Faarax ayaa labadiisa awr midkasta ku raray 124 kiilo giraam oo hadhuudh ah. Guud ahaan labada awr imisa kilogiraam ayaa lagu raray?

Habka loo xisaabiyo 124 × 2 = ?

Si aan taranta u xisaabino marka u horeeya. Joog ayaan isugu hoos qoraynaa

Xasuuso tirada 124 dhexdeeda $\begin{array}{r} 124 \\ \times\ \ 2 \\ \hline \end{array}$

Qiimaha godka 4 waa 4 × 1 = 4

Qilmaha godka 2 waa 2 × 10 = 20

Qiimaha godka 1 waa 1 × 100 = 100

				1 2 4
				× 2
Koowaadka 2 Ku dhufo	2 × 4	→		8
Tobnaadka 2 Ku dhufo	2 × 20	→		4 0
Boqlaadka 2 Ku dhufo	2 × 100	→		2 0 0
Wadarta labada taran waxay inasiinayaan labada tiro tarantooda				2 4 8

Sidaas darteed guudahaan labada awr 248 kg ayaa lagu raray.

Tusaale 2

Iskudhufo 264 × 3

Xisaabin

Marka tirada 264 hab ka fidinta lagu qoro waa 200 + 60 + 4. 3 ku dhufo boq-laadada, tobnaadada iyo koowaadada. Ka dibna isugee taranada oo ah qaybo ka tirsan taranta loo baahan yahay.

		2 6 4
		× 3
3 × 4	→	1 2
3 × 60	→	1 8 0
3 × 200	→	6 0 0
		7 9 2

Sidaas darteed 264 × 3 = 792

Hawlgal ka 10

Waydiimahan hoose adiga oo adeegsanaya habka qayb qayb iskudhufashada iskudhufta.

1	103 × 3	**2**	256 × 3	**3**	6 × 672
4	422 × 4	**5**	8 × 445	**6**	723 × 3

T Habka joog iskudhufashada ee caadiga ah

Tusaale 1:

Iskudhufo 123 × 3

Ugu horaynta 3da ku dhufo koowaadka. 3 × 3 = 9 koowaad 9 ka ku qor rugta koowaadka	Ka dib 3da kudhufo tobnaadada. 3 × 2 = 6 tobano 6da ku qor rugta tobnaadka	Ugu danbaysta 3da ku dhufo boqlaadka. 3 × 1 = 3 boqolo 3da rugta boqlaadka ku qor.
123 × 3 9 3 × 3 = 9	123 × 3 69 3 × 2 = 6	123 × 3 369 3 × 1 = 3

Sidaas darteed 123 × 3 = 369

Hawlgal ka 11

Kuwan soo socda iskudhufo

1	2	3	4	5	6
242 × 2	302 × 2	414 × 2	723 × 3	710 × 8	811 × 5

Tusaale 2:

Warshada qalin qoriga samaysa ayaa saacad kasta soo saarta 207 qalin qori. 8 saacadood ka dib, Warshadu imisa qalin qori ayey soo saari?

Habka loo xisaabiyo 207 × 8

Talaabo 1	Talaabo 2	Talaabo 3
Ugu horaynta 8da ku dhufo koowaadka. 8 × 7 koowaad = 56 koowaad. 56 koowaad waa 5 tobano iyo 6 koowaad. 6 inta aad ku qortid rugta koowaadka ee taranta 5ta tobano qaado (hayso) oo u gee tobnaadka	8da ku dhufo tobanada. 8 × 0 = 0 5 tii aad soo qaaday u gee 0 + 5 = 5 5 ta ku qor rugta tobnaadka ee taranta.	Ugu danbaysta 8da ku dhufo boqlaadka. 8 × 2 = 16, 6da ku qor rugta boqlaadka ee taranta. 1 ka rugta kumaadka ee taranta.
5 207 × 8 6 8 × 8 = 56	5 207 × 8 56 8 × 0 = 0 0 + 5 = 5	5 207 × 8 1656 8 × 2 = 16

Sidaas darteed warshadu 8 saacadood dhexdeeda waxay soo saari 1656 qalin qori.

Tusaale 3:

Iskudhufo 327 × 6

Habka loo xisaabiyo

14
327
× 6
1962

Talaabo 1 6 × 7 koowaad = 42 koowaad 2da ku qor rugta koowaadka ee taranta - qaad 4 ta tobnaad oo ugee tobnaadka

Talaabo 2 6 × 2 tobano = 12 tobano. 12 tobano + 4 tobano = 16 tobano 6da tobano ku qor rugta tobnaadka ee taranta. Qaad 1 ka oo u gee boqolaadada.

Talaabo 3 6 × 3 boqolo = 18 boqolo. 18 boqlaad + 1 boqol = 19 boqolo 9 ka ku qor rugta boqlaadka 1 kana rugta kunnaadka.

Hawlgal ka 12

Soo saar taranka

1	225 × 2	2	448 × 2	3	127 × 3	4	503 × 8	5	644 × 6	6	856 × 7

Laylis 6

Waydiimahan soo socda midkasta iskudhofo adiga oo adeegsanaya habka qayb qayb isugudhufashada.

1	211 × 2	**2**	321 × 3	**3**	333 × 3	**4**	225 × 9
5	258 × 5	**6**	914 × 3	**7**	282 × 6	**8**	589 × 4

Waydiimahan soo socda midkasta isku dhufo adiga oo isticmaalaya habka joog isugudhufashada ee caadiga ah.

9	342 × 2	**10**	441 × 2	**11**	113 × 5	**12**	712 × 6	**13**	264 × 3	**14**	925 × 7

Weedh xisaabeedyo (masalooyin)

15 Hal qadaade hadii uu qaado 4 litir oo caano ah 122 qadaade oo la mid ah imisa litir oo caano ayay qaadayaan.

16 Qof wastaad ah gidaar dhiiskiisa haddii u maalintiiba isticmaalo 325 Jaajuur 5 maalmood imisa jaajuur ayuu isticmaali?

J Habka laattis ee iskudhufashada

Habkani waa hab ay dadku sannado badan isticmaali Jireen marka ay laba tiro isku dhufanayaan.

Tusaale 1

Iskudhufo 25 × 6



Sanduuqa ka samaysan sanduuqyo yar yar oo ay dhinacyadoodu isle'eg yihiin ee lagu sawiray xariiqyada Janjeedha (xagalgoyayaha) waxa la yidhaahda laatiis

25ka sanduuqa dushiisa ku qor.



6dana sanduuqa dhiniciisa midig ku qor.

Marka u horaysa 6 × 5 ka dibna 6 × 2 raadi tarankooda oo sanduuqa ku dhex qora sida sawirka loogu muujiyay



Ugu danbaysta tirooyinka sanduuqyada dhaxyaala janjeedh isugugee.

Sidaas darteed 25 × 6 = 150

Tusaale 2

Iskudhufo 59 × 7

59 sanduuqa dushiisa ku qor 7 dana sanduqa dhinaciisa midig ku qor Ka dibna ugu horaynta 7 × 9 dabadeedna 7 × 5 iskudhufo oo sanduuqa dhexdhig Ugu danbaysta tirooyinka sanduuqa dhexyaala ee xarriiqyada jenjeedha (ama xagalgooyayaasha) dul yaala, ama hoos yaala jenjeedh isugu gee.

Sidaas darteed 7 × 59 = 413





Hawlgal 13

Iskudhufo adiga oo adeegsanaya habka laatis

1 35 × 5



2 124 × 5



3 132 × 3



4 709 × 6



Laylis 7

Iskudhufo adiga oo isticmaalaya habka laatis

1	71 × 6	2	350 × 3	3	163 × 3
4	384 × 4	5	525 × 4	6	780 × 7

5.3.3 Weedh xisaabeedyo (Masalooyin)

Tusaale 1:

Gaadhi xamuulka qaada haddii uu saacadiiba socdo 65 km. 6 saacadood imisa km ayuu socon?

Furfuris

6da saacadood inta uu socda si aan u garano 6da ayaan ku dhufanaynaa 65.

$65 \times 6 = 390$

Sidaas darteed gaadhigu 6 saacdood wuxuu socon 390 km.

Laylis 8

1 Haddii qiimaha hal litir oo caanaha lo'du yahay 9 birr, 105 litir oo caano ah imisa birr ayuu noqon?

2 Caasha waxay dukaanka ka soo iibsatay 4 mitir oo maro ah. Caasha imisa santimitir oo maro ah ayay soo iibsatay?

5.4 Isuqaybinta dhufsanayaasha 10 iyo kuwa 100 ee ilaa 10,000 oo loo qaybinayo Tirooyinka min 1-god ah iyo tirada 10

5.4.1 Dhufsanayaasha 10 iyo kuwa 100 ilaa 10,000 oo 100 qaybinayo tirada 10

Hawlgal ka 1

Waxyaalaha loo adeegto tirinta sida (qururuxa, kuulo furka qaruuradaha) iyo wixii la mid ah oo fara badan inta aad ururisaan ka shaqeeya xisaabfalada isuqaybinta ee hoos ku xusan.

1 20 kuulood haddii aad 10 arday si isle'eg ugu qaybisiin imisa hal ayuu ardaygiiba heli?

20 ÷ 10 = ____

Weedha Isuqaybinta

$x \div b = t$

Dhexdeeda x *waa laqaybshe*

b *- waa qaybshe*

t *- waa qayb.*

2 50 kuulood haddii aad 10 arday si isle'eg ugu qaybisiin imisa hal ayuu ardaygiiba heli?

50 ÷ 10 = ____

Labadan weedhood ee isuqaybinta maxaad ka fahamteen?

Sidaad korka weydiimaha 1 iyo 2 aad uga shaqayseen raadiya natiijada isuqaybinta.

3	30 ÷ 10	**4**	80 ÷ 10	**5**	130 ÷ 10
6	280 ÷ 10	**7**	2070 ÷ 10	**8**	6500 ÷ 10

Xeer

Tiro idil oo ah dhufsanaha 10 marka loo qaybiyo 10 natiijadu waa tiradii oo laga reebay '0' ta kaga taala dhinaca midig

Tusaale 1

60 ÷ 10 = 6 2350 ÷ 10 = 235

300 ÷ 10 = 30 7040 ÷ 10 = 704

670 ÷ 10 = 67 8830 ÷ 10 = 883

Laylis 1

Isuqaybi adiga oo raacaya xeerka korka lagu xusay

1	80 ÷ 10	**2**	180 ÷ 10	**3**	570 ÷ 10
4	620 ÷ 10	**5**	710 ÷ 10	**6**	890 ÷ 10
7	900 ÷ 10	**8**	1000 ÷ 10	**9**	6270 ÷ 10
10	2000 ÷ 10				

Weedh xisaabeedyo (masalooyin)

11 10 qof oo si iskaashato ah xoolo u wada dhaqan Jiray ayaa damcay in ay kala qaybsadaan 650 neef oo wanan ah. Qof kasta qaybtiisu imisa ayay noqon?

12 Urur samafal ah ayaa 10 arday oo aan lahayn miciin u qaybiyay 700 buug. Imisa buug ayaa ardaygiiba ku qaybi?

5.4.2 Isuqaybintadhufsaneyaasha10iyo100eeilaa 10,000 iyo Tiro hal god ah

Tusaale 2

Dugsi ayaa 250 geed oo loogu talagalay in la tallaalo si isle'eg ugu qaybiyay 5 fasal. Imisa geed ayaa fasalkiiba ku qaybtay in uu tallaalo?

Furfuris

Xasuusta $25 \div 5 = 5$

$25 \div 5 = 5$

$250 \div 5 = 50$

$2500 \div 5 = 500$

Sidaas darteed fasal kasta waxa ku qaybtay inuu 50 geed beero

Xisaabin qaabkaas oo kale idinka oo raacaya waxaad karti u yeelanaysiin in aad si dhibyar tiraab ahaan (afka) uga xisaabisiin oo aad u qaybisiin dhufsaneyaasha 10 iyo 100.

$6 \div 3 = 2$ $\quad$ $28 \div 7 = 4$

$60 \div 3 = 20$ $\quad$ $280 \div 7 = 40$

$600 \div 3 = 200$ $\quad$ $2800 \div 7 = 400$

$6000 \div 3 = 2000$

Tusaale 3

a $4\overline{)8}$ $\quad$ b $4\overline{)80}$ $\quad$ c $4\overline{)800}$ $\quad$ d $4\overline{)8000}$

Hawlgal 2

Isuqaybi

1 $6 \div 2 = \square$ $\quad$ $60 \div 2 = \square$ $\quad$ $600 \div 2 = \square$

2 $18 \div 3 = \square$ $\quad$ $180 \div 3 = \square$ $\quad$ $1800 \div 3 = \square$

3 $16 \div 4 = \square$ $\quad$ $160 \div 4 = \square$ $\quad$ $1600 \div 4 = \square$

4	15 ÷ 5 = ☐	**5**	40÷8 = ☐	**6**	36 ÷ 6 = ☐
	150 ÷ 5 = ☐		400 ÷ 8 = ☐		360 ÷ 6 = ☐
	1500 ÷ 5 = ☐		4000 ÷ 8 = ☐		3600 ÷ 6 = ☐

Laylis 2

Soo saarnatiijada isuqaybintan hoose

1	180 ÷ 2	**2**	600 ÷ 3	**3**	400 ÷ 4	**4**	560 ÷ 8
5	4500 ÷ 5	**6**	2100 ÷ 3	**7**	3000 ÷ 6	**8**	4900 ÷ 7
9	6400 ÷ 8	**10**	8100 ÷ 9				

11 $2\overline{)40}$ **12** $3\overline{)300}$ **13** $3\overline{)1200}$ **14** $4\overline{)8000}$ **15** $5\overline{)3500}$

Weedh xisaabeedyo (masalooyin)

16 Warshad sibidhka samaysa ayaa 4 maalmood ku soo saartay 3200 kiish oo sibidh ah. Warshadu maalin kasta haddii ay tiro isle'eg soo saarto maalintiiba imisa kiish ayey soo saartay?

17 6 qof oo isku abaabushay iskaashato ganacsi ah ayaa hal sano macaashkay (dheeftay) heleen ka bixiyay cashur 3000 birr ah. Qafkiiba imisa birr ayaa ku qaybi in uu bixiyo?

Waydiin dheeraad ah

Sanduuqyada adiga oo tirada ku haboon ku buuxinaya hel Jawaabta.



Sidaas darteed Jawaabtu waa _____

5.5 Isuqaybinta tirooyinka idil ilaa 10,000 iyotiro1-godaheeaanhadhaagalahayn iyo kuwa hadhaaga leh

5.5.1 Isuqaybintatirooyinkaidilee2-godahiyotiro 1-god ah oo aan lahayn hadhaa.

Hawol nakhtiin

Xasuuso weedha isuqaybinta $12 \div 3 = 4$ waxa loo qoraa $3\overline{)12}^{\,4}$ Habka loo xisaabiyo.

$3\overline{)12}$	**Talaabo 1**	U fiirso 1 tobon uma qaybsami karto 3 meelood oo isle'eg 1 ka toban waxaan u bedalaynaa 10 koowaad. 10 kan koowaad iyo 2da koowaad wadartoodu waa 12 koowaad.
$3\overline{)12}^{\,4}$	**Talaabo 2**	Inaga oo adeegsanayna shaxanka isku dhufashada ee 3 waxaan helayna in $3 \times 4 = 12$. 4ta rugta tobanada ee xariiqa dusheeda ku qor.
$3\overline{)12}^{\,4}$ 12	**Talaabo 3**	4ta ku dhufo 3. $4 \times 3 = 12$ taranta ku hoos qor 12
$3\overline{)12}^{\,4}$ $\underline{12}$ 0	**Talaabo 4**	Imika taranta kagoo laqaybshaha $12 - 12 = 0$

Sidaas darteed Hadhaagu waa 0

Qaybtu waa 4

Xusid: weedh kasta oo ah isuqaybin aan lahayn hadhaa marka qaybta lagu dhufto qaybshaha natiijadu waa la qabshaha.

laqaybshe = qayb × qaybshe.

Shaqo fasal

Shaxankan hoos ku muujisan buugaaga ku guuri ka dibna buuxi

Isuqaybin	Laqaybshe	Qaybshe	Qayb		Xaqiijin (hubin)
18 ÷ 2	18	2	9	⟶	18 = 2 × 9
28 ÷ 4				⟶	
35 ÷ 5				⟶	
72 ÷ 8				⟶	

Tusaale 1

Isuqaybi 72 ÷ 4

Habka loo xisaabiyo

$4\overline{)72}$

Talaabo 1 7 > 4. Sidaas darteed 7 toban 4 meelood waa loo qaybin karaa

$1 \times 4 = 4$

$2 \times 4 = 8$

∴ $1 \times 4 = 4$ ayaan qaadanayna

$$\begin{array}{r} 1 \\ 4\overline{)72} \\ -4 \\ \hline 3 \end{array}$$

Talaabo 2 1 ka ku qor 72 korkeeda oo xariiqa dusheeda ah. 1 × 4 = 4. 4ta 7da ku hoos qor oo kagoo 7 - 4 = 3 toban

$$\begin{array}{r} 1 \\ 4\overline{)72} \\ -4 \\ \hline 3 \end{array}$$

Talaabo 3 3da toban ubedal 30 koowaad. 30kan koowaad iyo 2 dii koowaad ee hore marka la isugeeyo waa 32

$$\begin{array}{r} 18 \\ 4\overline{)72} \\ -4 \\ \hline 32 \\ -32 \\ \hline 0 \end{array}$$

Talaabo 4 32 u qaybi 4

32 ÷ 4 = 8 waayo

4 × 8 = 32

32 ka ku hoos qor 32 oo kalagoo.

32 – 32 = 0

Hubin (xaqiijiin)

18 → Qayb

×4 → Qaybshe

72 → Laqaybshe

Sidaas dared qaybtu waa 18 hadhaagu na waao

Hawlgal ka 1

Isuqaybiya kadibna hubiya jawaabtiina

1	$2\overline{)24}$	2	$4\overline{)52}$	3	$5\overline{)65}$	4	$3\overline{)27}$	5	$3\overline{)36}$
6	$6\overline{)78}$	7	$7\overline{)84}$	8	$8\overline{)48}$	9	$6\overline{)60}$	10	$9\overline{)99}$

5.5.2 Isuqaybinta tirooyinka idil ee 2-god ah iyo tiro 1-god ah ee hadhaaga leh.

U fiirso

Hoos waxa ku muujisan 22 kubbadood.

Kubbadahan u kala dhig dhig (kala qay qaybi) kooxo midkiiba ka kooban yahay 4 kubbadood.



Imisa koo xood oo min 4 kubadood ayaad samaysay? $\boxed{5}$

Imisa kubbadood ayaa hadhay? $\boxed{2}$

$22 \div 4 = \boxed{5}$ iyo hadhaa = $\boxed{2}$

Tusaale 2

Ceebla ayaa lo'deeda ka listay 14 litir oo caano ah. Waxay damacday in caanaha ay macmiisheeda ugu gayso jeerikaano yar yar oo uu qaadkoodu yahay 3 litir. Hadaba imisa jeerikaan ayey u baahan tahay?

Habka loo xisaabiyo

Si aan u helno inta jerikaan ee ay u baahantahay waxaan xisaabinaynaa $14 \div 3$

$3\overline{)14}$	**Talaabo 1**	U fiirso 1 looma qaybin karo 3 meelood. Sidaas darteed 1 ka tobnaad iyo 4ta koowaad intaan isla qaadano ayaan isu qaybi-naynaa 14 iyo 3.
$\begin{array}{r}4\\3\overline{)14}\end{array}$	**Talaabo 2**	Raadi tirada marka lagu dhufto 4 ina siinaysa 14 ama tiro waxogaa ka yar 14. $1 \times 3 = 3$, $2 \times 3 = 6$, $3 \times 3 = 9$, $4 \times 3 = 12$, $5 \times 3 = 15$ firri $12 < 14$, $15 > 14$ sidaas darteed waxaan qaadanaynaa $3 \times 4 = 12$. 4 ta ku qor 14 ka xariiqa kasareeya dushiisa rugta tobnaadka.

$$\begin{array}{r} 4 \\ 3\overline{)14} \\ 12 \\ \hline \end{array}$$

Talaabo 3 3 × 4 = 12. 12 ka ku hoos qor 14 ka.

$$\begin{array}{r} 4 \\ 3\overline{)14} \\ -12 \\ \hline 2 \end{array}$$

Talaabo 4 14 ka kagoo 12, 14 -12 = 2 sidaas darteed. Qayb= 4, hadhaa =2 ufiirso 2 < 3.

4	×	3	+	12	=	14
☝		☝		☝		☝
qayb	×	qaybshe	+	hadhaa	=	laqeybshe

Xasuusin:

Weedh kasta oo isuqaybin oo hadhaa leh, marka hadhaaga lagu daro taranta qaybta iyo qaybshaha natiijadu waa laqaybshaha. Ama

Laqaybshe = qayb × qaybshe + hadhaa.

Hawlgal ka 2

Weydiimahan hoose idinka oo laba laba ah falanqeeya oo indinka oo asuqaybin kasta ka fiirsanaya ka jawaaba.

$$\begin{array}{r} 6 \\ 5\overline{)38} \\ -30 \\ \hline 8 \end{array} \qquad \begin{array}{r} 6 \\ 5\overline{)35} \\ -30 \\ \hline 5 \end{array} \qquad \begin{array}{r} 6 \\ 5\overline{)32} \\ -30 \\ \hline 2 \end{array}$$

1 8 hadhaa ma noqon karaa?

2 5 hadhaa ma noqon karaa?

3 2 hadhaa ma noqon karaa?

4 Hadhaagu qaybshaha miyuu ka waynaan karaa? Miyuuse le' ekaan karaa?

5 Tiro haddii shan loo qaybiyo tirooyinka hadhaa noqon karaya waa kuwee?

Xusuusta:

xisaabfalka isuqaybinta dhexdeeda. Hadhaagu markasta wuu ka yaryahay qaybshaha.

6 Kolkaad si quman uga shaqeysaan. Jawaabtiinana Hubiya.

Laylis 3

Isuqaybi kadibna hubi (xaqiiji) shaqadaada.

1 $3\overline{)36}$ **2** $5\overline{)70}$ **3** $7\overline{)35}$ **4** $4\overline{)88}$ **5** $6\overline{)13}$

6 $34 \div 2$ **7** $3\overline{)20}$ **8** $9\overline{)41}$ **9** $84 \div 3$ **10** $4\overline{)76}$

Raadi qaybta iyo hadhaaga. Hubi (xaqiiji) jawaabtada.

	Isuqaybin	Qayb	Hadhaa	Hubin
11	$4\overline{)35}$	8	3	$35 = 4 \times 8 + 3$
12	$5\overline{)42}$			
13	$8\overline{)77}$			
14	$72 \div 5$			
15	$85 \div 4$			
16	$3\overline{)98}$			
17	$4\overline{)75}$			
18	$85 \div 2$			

Weedh xisaabeedyo

19 Cumar ayaa 7 saaxibadiis ah si isle'eg ugu qaybiyay 84 fataatiiro. Midkiiba imisa fataatiiro ayaa ku qaybi?

20 Qof buktaan ah ayuu dhakhtarku u qoray dawo dareera ah oo mugeedu yahay 104 mililitir. Wuxuu dhakhtarku ku amray in uu maalinkasta. Qaato ama cabo 8 ml. Qofku imisa maalmood ayuu dawada ku dhamaysan?

5.5.3 Isuqaybinta Tiro idil oo 3-god ah iyo tiro idil oo 1-god ah

Shaqo fasal

4 dugsi oo ku yaala degmo ka mid ah degmooyinka Degaanka soomaalida ayaa 628 buugaagta xisaabta ee fasalka saddexaad si isle'eg loogu qaybiyay. Dugsi kastaaba imisa buug ayaa ku qaybi?

Habxisaabinta la xidhiidha weedh-xisaabeedkan oo talaabo talaabo looga shaqeeyay ayaa hoos lagu muuJiyay. Laba laba inta aad isu kooxaysiin, falanqeeya habka talaaba kasta looga shaqeeyay kadibna saaxiibayaashiina aad isku fasalka tihiin ka dhaadhici-ya.

Habka loo xisaabiyo: 628 ÷ 4 = ?

Talaabo 1	Talaabo 2	Talaabo 3	
			Hubin (xaqiijiin) 157 → Gayb × 4 → Qoybshe 628 → Laqaybshe

Sidaas darteed Dugsi kasta waxa ku qaybi buugaag ay tiradoodu tahay 157.

Hawlgal ka 3

Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxi. Kadibna hubi (xaqiiJi) jawaab taada.

1 $2\overline{)226}$ qayb = 113, hadhaa = 0, hubin: 113 × 2 + 0 = 226.

2 $3\overline{)396}$ qayb = ____, hadhaa = _____, hubin: _____.

3 528 ÷ 4 qayb = ____, hadhaa = _____, hubin: _____.

4 $6\overline{)865}$ qayb = ____, hadhaa =_____, hubin: _____.

5 730 ÷ 5 qayb = ____, hadhaa = _____, hubin: _____.

6 $4\overline{)925}$ qayb = ____, hadhaa = _____, hubin: _____.

7 $8\overline{)905}$ qayb = ____, hadhaa =_____, hubin: _____.

8 900 ÷ 7 qayb = ____, hadhaa =_____, hubin:_____.

Tusaale 3

Isuqaybi 144 ÷ 6

Habka loo xisaabiyo

Talaabo 1

1 looma qaybin karo 6.
14 dhexdeed imisa lixood ayaa ku Jira.

$1 \times 6 = 6$
$2 \times 6 = 12$
$3 \times 6 = 18$

$$\begin{array}{r} 2 \\ 6\overline{)144} \\ -12 \\ \hline 2 \end{array}$$

Sidaas darteed 2 lixood ayaa ku Jira. 2da xariiqa dushiisa ku qoroo ku dhufo 6da

$2 \times 6 = 12.$

12 ka 14 ka ku hoos qor. Ka dibna kalagoo.

$14 - 12 = 2$

Isbarbardhig

$2 < 6$

Talaabo 2

$$\begin{array}{r} 24 \\ 6\overline{)144} \\ -12 \\ \hline 24 \\ -24 \\ \hline 0 \end{array}$$

2da hadhaaga ah looma qaybin karo 6 sidaas darteed 4ta ayaan hoos u soo dajinaynaa.

$24 \div 6 = 4$

Waayo $4 \times 6 = 24$

4ta xariiqa dushiisa 2da dhinaceeda midig ku qoroo ku dhufo 6da.

$4 \times 6 = 24.$

24 kan, 24 kii hore ku hoos qor ka dibna kalago

$24 - 24 = 0$

Hawlgal ka 4

Isuqaybi

1	$2\overline{)130}$	**2**	$7\overline{)224}$	**3**	$6\overline{)276}$	**4**	$3\overline{)152}$
5	$6\overline{)170}$	**6**	$8\overline{)695}$	**7**	$5\overline{)812}$	**8**	$413 \div 6$

Laylis 4

Raadi qaybta iyo hadhaaga. Xaqiiji jawaabtaada.

1 $298 \div 2$ qayb = _____, hadhaa = _____.
2 $888 \div 8$ qayb = _____, hadhaa = _____.
3 $324 \div 4$ qayb = _____, hadhaa = _____.
4 $685 \div 6$ qayb = _____, hadhaa = _____.
5 $108 \div 6$ qayb = _____, hadhaa = _____.
6 $380 \div 8$ qayb = _____, hadhaa = _____.
7 $2\overline{)486}$ qayb = _____, hadhaa = _____.
8 $5\overline{)865}$ qayb = _____, hadhaa = _____.

9 $6\overline{)679}$ qayb = _____, hadhaa = _____.

10 $4\overline{)304}$ qayb = _____, hadhaa = _____.

11 $3\overline{)133}$ qayb = _____, hadhaa = _____.

12 $7\overline{)497}$ qayb = _____, hadhaa = _____.

5.5.4 Isuqaybintatiroidiloo4-godahiyotiroidiloo 1-god ah

Tusaale 4

3 qof oo beeralay oo iskaashi u wada shaqaysanaysay ayaa wax soo saarkooda oo hadhuudh ahaa ku iibiyay qiima 3753 birr. Haddii ay si isle'eg u kalaqayb-sadaan. Mid walba imisa birr ayuu heli?



Kunnaadka qaybi: 3 ÷ 3 = 1
1 ka iyo 3da isku dhufo 1 × 3 = 3
3da kuhoos qor 3da oo kala goo 3 – 3 = 0
Boqolada qaybi: 7 ÷ 3 = ?
2 × 3 = 6. 6da ku hoos qor 7da oo kalagoo 7 – 6 = 1
1 looma qaybin karo 3. Sidaas darteed 5ta hoos u daji. Tobanada qaybi: 15 ÷ 3 = ?
5 × 3 = 15.
5ta xariiqa dushiisa ku qor. Kodibna ku dhufo 3da 5 × 3 = 15. 15 kan ku hoos qor 15 oo kalagoo.
15 – 15 = 0
Koowaadka qaybi 3 ÷ 3 = ?
1 × 3 = 3. 1 ka xariiqa dushiisa ku qor. 3da taranta ah ku hoos qor 3da oo kala goo
3 – 3 = 0

Sidaas darteed midwaliba 1251 birr ayuu heli

Hawlgal ka 5

Isuqay bi

1 $2\overline{)2642}$ 2 $4\overline{)6504}$ 3 $5\overline{)6859}$ 4 $4\overline{)4970}$

5 $3\overline{)2565}$ 6 $5\overline{)4055}$ 7 $7\overline{)5680}$ 8 $8\overline{)4155}$

Laylis 5

Isuqaybi kadibna xaqiiji jawaabtaada

1 $2\overline{)4312}$ 2 $7\overline{)5922}$ 3 $5\overline{)3469}$ 4 $6\overline{)8022}$

6 $4\overline{)5284}$ 7 $3\overline{)3174}$ 8 $8\overline{)4328}$ 9 $9\overline{)8055}$

5.5.5 Xidhiidhka ka dhexeeya iskudhufashada iyo isuqaybinta

Hawlgal (waxqabad)

U fiirsada xidhiidhka xisaabfalada iskudhufashada iyo isuqaybinta ee hoos ku xusan

4 × 8 = 32	6 × 5 = 30	9 × 8 = 72
32 ÷ 8 = 4	30 ÷ 5 = 6	72 ÷ 8 = 9
32 ÷ 4 = 8	30 ÷ 6 = 5	72 ÷ 9 = 8

1 Weedhahan xisaabeed ee korka lagu xusay xidhiidhka iskudhufashada iyo isuqaybinta ee aad ka fahamteen sheega.

2 Weedho-xisaabyada hoos ku xusan dhamaystira.

5 × 7= 35	□ × 9 = 36	9 × 8 = 72
□ ÷ 5 = 7	36 ÷ 9 = □	□ ÷ □ = □
35 ÷ □ = 5	36 ÷ □ = 9	□ ÷ □ = □

Tusaale 5

Raadi qiimaha 'x' da.

b x ÷ 7 = 25

Furfuris

x ÷ 7 = 25 tani waxay ka dhigan tahay

x = 7 × 25

ama x = 175

Sidaas darteed qiimaha 'x' waa 175.

t x × 10 = 470

Furfuris

x × 10 = 470 waxay ka dhigan tahay

x = 470 ÷ 10

ama x = 47

Sidaas darteed qiimaha 'x' waa 47.

Laylis 6

Waydiimahan hoose dhexdooda raadi qiimaha 'x' da.

1	x ÷ 10 = 80	2	x ÷ 5 = 70	3	42 ÷ x = 7
4	360 ÷ x = 6	5	4 × x = 40	6	10 × x = 2500
7	x × 3 = 642	8	x × 8 = 4976		

Weedh xisaabeedyo

Tusaale 6

Ardayda fasalka saddexaad ayaa dugsigeena. 480 geed ku tallaashay. Ardaygii kastaaba haddii u 6 geed tallaalo. Tirada ardayda fasalka saddexaad waa imisa?

Furfuris

Si aan u helno tirada ardayda fasalka tirada geedaha la tallaalay ayaan u qaybi naynaa ardaykasta tirada geedaha u tallaalay.

480 ÷ 6 = 80

Sidaas darteed tirada ardaydu waa 80.

Laylis 7

1. Xasan oo xoola-dhaqata ah ayaa 216 neef oo adhi ah si isle'eg ugu qaybiyay caruurtiisa oo afar ah. Midkiiba imisa neef ayuu heli?
2. Mashruuc wax soo saarka caanaha lo'da ka shaqeeya ayaa leh 456 sac. Mashruucu. Haddii uu sacaha uu ugu kala foofiyo saddex meelood oo ay cawska ka daaqaan. Daaqsintii kastaba imisa sac ayaa lagu foofiyay?
3. Wacays ayaa 7 shaqaale oo beertiisa qamadi uga qooyay siiyay 280 birr. Shaqaalihiiba imisa birr ayuu helay?

Cutubka

6aad



XARRIIQAHA IYO SHAXANNADA KALE EE FUDUD

6.1 XARRIIQHA ISGOOYA, XARRIIQAHA BARBAR-RADA AH IYO XARIIQABA ISKU QOTOMA

B Xariiqo barbaroah



Xaashi cad inta ad qaadiin idinka oo cidhifyada si taxadar ah. Qumaati iskugu simaya laaba. Waraaqda ad laabteen hadana sidaas oo kale u laaba.

- Waraaqda ad laabteen intaydaan fidinin horteed meelaha laga laabay waxay u ekaan karayaan bal maleeya (ka fikira).
- Waraaqda aad laabteen marka aad fidisiin dabadeed. Meelaha ay ka laabnayd xariiqo ku sameeya.

Malihiinu ma hagagsanaa?



Labada xarriiqo ee ad samayseen fiiriya. Labada xarriiqo malaha bar-kulan si kasta oo loo fidiyo. Labada xariiqo ee ad sawirteen waxa lahyidhaahdaa. Xarriiqyo barbarro ah.

Laba xarriq oo toosan oo aan meelnaba ku kulmayn si kasta oo loo fidiyo waxaa loo yaqaan xarriiqyo barbaro ah. Fogaanta laba xarriiq oo barbaro ah qoton ahaan ugu dhexaysaa, meel waloo laga qaadaba, waa miduun.



T Xariiqyo isgooya

Xariiqyada isgooya waa xarriiqaha hal bar-kulan leh.



J Xariiqyo isku qotoma

Xarriqaha isku qotoma waa xarriqyo isgooya oo isla markaana xaglaha ay sameeyaani ay iswada leegyihiin



Xarriiqyo isku qotoma



ma aha xarriqyo isuqotoma

Hawlgal 6.1

Idinka oo laba laba ah sawiradan hoos ku xusan u fiirsada kadibna sheega xariiqyada barbarrada kuwa isgooyayaasha ah iyo kuwa isku qotoma.





Hawlgal 6.2

1 Fasalkiina dhexdiisa waxyaalaha, hareerihiina ad ku aragtiin dushooda u fiir sada oo tilmaama, Xariiqyadooda barbarada ah iyo kuwa isgooyayaasha ah iyo kuwa isku qotoma.

2 Fasalka dhexdiisa saaxiibkaaga ku ag fadhiya ka wada xaajooda. Xariiqyada barbarrada ah iyo kuwa isgooyayaasha ah iyo kuwa isku qotoma. Kadibna erayadiina inta ad ku sheegtiin buugaagtiina ku qora.



3 Sida ad sawirka ugu aragtiin laba xariiqyo oo barbarro ah idinka oo adeegsanaya mastarad ama waxyaalaha aad agagaarkiina ka heshiin sida girgirka buugtiina ku sawira.

4 Xariiqyada barbarrada ah ee ad sawirteen dushooda ku sawira xariiq kale oo ku gudban oo labadooda goynaya ama la kulmaya.

Laylis 1

Sawiradan hoos ku xusan buugaagtiina ku guuriya kadibna sheega kuwa barbaro-da ah iyo kuwa isgooyayaasha ah iyo kuwa isku qotoma.



Sawirkan hoos ku tusan u fiirso kadibna xariiqyada. Barbarada ah iyo kuwa isgooya yaasha midabkooda kukala sooc.

6.2 DHISIDDA XARRIIQO BARBARRO AH XARRIIQO ISGOOYINAYA IYO XARRIIQO ISKU QOTOMA

6.2.1 XARRIIQAHA BARBARRADA AH

Xusuus

- *Xariiqyada toosan oo barbaro ah ma laha bar-kulan ama ma jirto bar ay wadaagaani*
- *Fogaanta laba xariiq oo barbaro ah. Qoton ahaan ugu dhexaysaa meel kasta oo laga qaadaba waa isku mid.*



Hawlgal 3

1 *Qaab cabbirista fogaanta u dhexaysa xarriiqyada barbarada ah ee hoos ku xusan midda quman sheeg*



2 Ufiirso xarriiqyada barbarrada ah, ee hoos lagu muujiyay: Adiga oo adeegsanaya mastarad. Cabbir fogaanta baraha la tilmaamay



Fogaanta u dhaxaysa barta B iyo barta T waa _____ sm

Fogaanta u dhaxaysa barta X iyo barta T waa _____ sm

Fogaanta u dhaxaysa barta R iyo barta T waa _____ sm

Maxaad ka sheegi kartaa dhererka xariiJimaha BT, XD iyo RS?

Laylis 2

1 ***Xariiqyada a laba labada (lammaanaha ama qindiga) ah ee hoos lagu muujiyay hubi oo kala sheeg kuwa barbarrada ah. Iyo kuwa aan ahayn adiga oo fiirinaya in fogaanta, labada xarriiqo ay miduun tahay meel waloo laqaato.***



2 ***Cabbir fogaanta u dhaxaysa xarriiqyada barbaroda ah.***



6.2.2 DHISIDDA XARIIQO BARBARO AH

Xarriiqyo barbaro ah in aad sawirtid, waxaad adeegsan waxyaalo kala gadisan sida, buugtiina cidhifyada toosan leh ama mastared iyo wax kasta oo agagaarkaaga ad ka heli kartid oo cidhifya toosan leh.

Tusaale I

Sawir laba xarriiqyo toosan oo barbaro ah.

Adiga oo adeegsanaya buugta aad casharada ku qoratid midkood sida sawirka hoos lagu muujiyay.

1 Ugu horaanta adiga oo isticmaalaya buuga cidhifkiisa xarriiq toosan same oo ku magacaw m

2 Kadib sida sawirka hoose lagu muujiyay buuga duldhig xarriiqa oo cidhifkiisa hoose, ku beeg xarriiqaa. Biinka hoose ee xaashiyaha buuga, bar ku calaamadee oo kumagacaw B.



3 Kadibna buuga dhinaca midigta u yar jiid. Oo hadana bar kale meesha biinkaas hoose kubeegan ku calaamade oo ku magacaw T.

4 Ugu danbaysta labada barood B iyo T mastarad adiga oo isticmaalay isku xi-dhiidhi oo xarriiqaad samaysay ku magacow l. Sidaas darteed l iyo m waa laba xarriiq oo barbaro ah.

Tusaale 2

Adiga oo adeegsanaya mastered sawir xariiqyo barbaro ah oo fogaansho 3 sm iskujira. Si ad u sawirtid xariiqaha barbarada ah ee 3 sm kala fog raac qodabadan hoos ku tusan.

b

Marka u horaysa adiga oo adeegsanaya mastarad sawir xariiq toosan ku magacaw QR.	

t Kadib sida sawirka lagu muujiyay mastaradda barteeda u taagan eber (0) ku beeg barta, xariiqa dushiisaa ee ad ku magacawday Q. U fiirso mastarada barteeda u taagan eber



(0) waxay leedahay xariijinyar. Sidaas darteed xariijintaa yar ku beeg xariiqa ad sawirtay si ay mastaradu ugu qotonto xarriiqa. buugaaga bar ku calaamadee meesha La siman mastarada barteeda u taagan 3. Magacaw bartaas (kaba dhig A)

J Kadibna mastarada barteeda u taagan eber (0) ku beeg barta R oo raac sida korka ad ka samaysay adiga oo ku magacaabaya. B barta mastarada u taagan 3.



x Ugu danbaysta adiga oo isticmaalaya mastaradda. Sawir xariiqa dhaxmara barta A iyo bar ta B.



Labada xarriiqyo ee toosan ee ah QR iyo AB waa xariiqyo barbaro ah oo fogaanta qoton ahaan u dhexaysa ay tahay 3 sm.

Laylis 3

1 Adiga oo adeegsanaya mastered sawir xariiqyo barbaro ah oo fogaanta u dhax-aysaa ay tahay

b 2 sm **t** 4 sm **j** 1 sm

6.2.3 DHISMAHA XARIIQO ISGOOYAYA

Laba xariiqyo oo sallax ku wada yaala haddii ay leeyihiin bar-kulan ama ay bar wadaagaan waxa loo ya qaana xariiqyo isgooysayaal ah.

Tusaale:

➲ Barta k waa bar ay wadaagaan labada xariiqo ee toosan ee kala ah AB iyo EF. Sidaas darteed xarriiqahan ee toosan. AB iyo EF waa xariiqyo isgooya.



➲ Barta k waa bar-kulan ka labada xarriiq ee toosan AB iyo EF.

Hawlgal 6.4

Inta ad koox koox isku kooxaysiin waaydiimahan hoose marka ad iska warsatiin dabadeed Jawaabihiina u cadeeya saaxiibayaashiina ee aad isku fasalka tihiin.

1 Laba xariiqo toosan oo aan ahayn barbaro imisa bar-kulan ayay yeelan karayaan?

2 Laba xariiqo toosan oo isgooyaa suuragal ma noqon in ay yee shaan laba baro oo ay wadaagaan? Waayo?

3 Laba xariiqyo toosan oo isku sallax ah, ayaa markii laba meelood oo kala gadison laga cabbiray fogaan qotonahaan ah ay fogaantoodu noqotay 10 sm. Labada xariiqyo maxay noqon karaan? Barbaro mise isgooyeyaal?

4 Xariiq toosan BT iyo xariiq kale oo toosan MN ayaa la ogaaday inay barbaro yihiin. Sido kale xariiqa toosan MN iyo xariiqa toosan QR waa barbaro. Sidaas darteed ma odhan karnaa xariiqa toosan BT iyo xariiqatoosan QR waa barbaro? Waayo?

6.2.4 DHISIDDA XARIIQAHA TOOSAN EE ISKU QOTOMA

Laba xariiqyo toosan oo isgooysa haddii barta ay iskugooyaan ama ku kulmaan ay ka sameeyaan afar xaglood oo isle'eg xaglahaas waxa loo yaqaanaa xagloo quman. Ufiirso buugaaga xisaabta labadiisa girgir barta ay ku kulmaan xagasha ku taalaa waa xagal quman.





Xariiqa BT iyo xariiqa XD waa xariiqyo iskuqotama. Xariiqa BT qotome ayuu yahay xariiqa XD. Sido kale xariiqa XD qotome ayuu u yahay xariiqa BT.

B Dhisidda qotome maraaya bar xariiq ku taala

Hawalgal 5

Xariiq toosan oo lagu siiyay oo ku magacaaban ‘ ’ u same qotome maraaya barta B ee xariiqa ‘ ’ ku taalla. Si ad u samaysid labada xariiqyo ee isku qotoma raac qodobadan hoos ku dhigan.

1 Ugu horaanta adiga oo isticmaalaya mastarad sawir xariiq ‘l’ kadibna barta B dul dig



2 Kadib mastarada labadeed dhinac barta ay ku kulmaan ku beeg barta B islamarkaana mastaradda girgir keeda (kaba soo qaad dhinaca gaaban) toos ugu beeg xariiqa ‘l’. Dhinaceeda dheer girgirkeed bar warqada dusheeda ku calaamadee oo ku magacaw T



3 Ugu danbaysta barta B iyo barta T xariiqa toosan ee mara jeex. Labada xariiqyo ee toosan oo ah xariiq ‘ ’ iyo xariiqa BT waa xariiqyo isku qotoma.



Laylis 4

1 Xariiqyada toosan ee hoos lagugu siiyay baraha ku yaala ee la magacaabay xariiq toosan oo maraaya oo qotoma u ah. Xariiqa u same adiga oo adeegsanaya mastarad.



b **t** **j** **x**

2 Sawirka hoos lagu muujiyay u fiirso, kadibna qindiyada (laba labada) xariiqyo ee barbaro, isgooyeyaal iyo kuwa iskuqotoma sooc oo qor.



T Dhisidda qotome maraaya bar xariiq dibadda ka ah

Hawlgal 6

Xariiq toosan oo lagu siiyay u same xariiq toosan oo qotome u ah oo maraaya bar dibadda ka ah.

1 Ugu horaanta adiga oo adeegsanaya mastarad sawir xariiqa toosan ee lagu siiyay. Xariiqaa magac ulabax(kaba dhigim). Calaamade bar xariiqa dibadda ka ah. Ku magacaw B.

m

2 Kadib mastaradda dhinaceeda dheer girgirkeed ku beeg barta B, isla markana mastaradda dhinaceeda gaaban girgirkeeda toos ugu beeg xariiqa. Meesha ay xagasha quman ee mastaradu ay kaga beegantay xariiqa bar ku calaamadee kuna magacaw H.



3 Ugu danbaysta xariiq toosan oo maraya barta B iyo barta H adiga oo adeegsanaya mastarad jeex. Labada xariiq ee toosan oo ah xariiqa ‘m’ iyo xariiqa BH waa xariiqyo iskuqotoma.



Laylis 5

1 Waydiimahan hoose b, t, J iyo x xariiqyada toosan ee la siiyay midkasta u same xariiq toosan oo qotome u ah oo maraaya barta dibadda ka ah ee la magacaabay.



2 Xariiq toosan ma loo samayn karaa laba xariiqo oo labadooduba qoteme u yihiin xarriiqa isla markaana maraaya bar xariiqa dibadda ka ah? Waayo?

6.3 LAYDI, LABAJIBBAARANE, BARBAROOLE IYO KOOR (TARAABIISAN)

Waa maxay geesoole?

Geesoole waa shaxan oodan, oo ka samaysan xariijimo midiba mid ku daba taxan tahay, isla markaasna laba xariijimoodna iskama dul gudbi karaan.

Tusaale:

1 Shaxannadan hoos lagu muujiyay waa geesoolayaal.



b t j x

2 Kuwanise ma aha geesoolayaal



b t j

Ma (sharixi) kartaa afar-geesle waxa u yahay?

Afar-geesle waa geesoole afar dhinac leh.

Shaxannadani waa afar geesleyaal.



Shaxanka hoose dhinaca bidixda ku sawiran waa Barbaroole.



Barbaroole	*Koor (taraabiis am)*	*Laydi*
Barbaroole waa afar geesle labadii dhinac ee iska soo horjeedaaba ay Barbaro yihiin isku dhererna yihiin.	Koor (taraabiisam): Koor (taraabiisam) waa afar geesle ay laba dhinac oo qudhaata ay barbaro yihiin.	Laydi: Laydigu waa barbaroole xagal waliba qumman tahay labada dhinac ee iska soohorjeeda isdherer lay'egyihiin.

	
Qardhaas	*labajibbaarane:*
Qardhaas: Qardhaas waa barbaroole ay afartiisa dhinac isdherer le'eg yihiin.	l a b a j i b b a a r a n e : Labajibbaarane waa barbaroole ay xagal waliba qumman tahay afartiisa dhinac na ay isdherer le'egyihiin.

Hawlgal 7

1 Laba laba inta ad isku kooxaysiin iska warsada afar dhinaclayaashan hoos lagu muujiyay waxaay kala yihiin oo u kala saara barbaroole, laydi labaJibbaarane qardhaas iyo koor.



2 Astaamaha ad ku kala saarteen afar-dhinaclayaasha sare ku xusan sheega.

3 Fasalkiina dhexdiisa iyo agagaarka guryihiina, waxyaalaha ad ku aragtiin inta ad u fiirsatiin. Waxyaalahaas kuwa leh qaabka barbaroolaha, laydiga, qardhaasta. Laba Jibbaaranaha iyo koorta inta ad soocdiin u caddeeya saaxibadiina ad isku fasalka tihiin.

Astaamaha barbaroolaha, laydiga, laba jibbaaranaha, qardhaasta iyo koorta

a	**Barbaroole**	
		*Dhinacyada iska soo horjeedaa waa barbaro.* *Dhinacyada iska soo horjeedaa waa isku dherer.*
b	**Laydi**	
		*Dhinacyada iska soo horjeedaa waa barbaro. Dhinacyada iska soo horjeedaa waa isku dherer. Dhammaan xaglihiisu waa xaglo qumman. Laba dhinac oo isku xigaa way isku qotomaan.*
c	**Qardhaas**	
		*Dhinacyada iska soo horjeedaa waa barbaro* *Dhamaan afartiisa dhinac waa isku dherer.*
d	**Labajibbaarane**	
		*Dhinacyada iska soo horjeedaa waa barbaro* *Dhammaan dhinacyadiisu waa isku dherer* *Dhammaan afartiisa xaglood waa xaglo qumman* *Laba dhinac oo isku xigaa way isku qotomaan.*
e	**Koor (taraabiisam)**	
		*Laba dhinac oo qudhaata oo iska soo horjeeda ayaa barbaro ah. Labada dhinac ee barbarada ah isku dherer ma aha*

Hawlgal 8

1 Astaamaha ay leeyihiin afardhinaclayaasha sare lagu sharrixay (caddeeyay) qumaati u akhrista. Kadibna weedhaha hoos ku xusan idinka oo koox koox ah iska warsada oo kala sooca midda runta ah iyo midda beenta ah. Jawaabihiina u caddeeya ardayda fasalkiina.

b Laydi kastaa waa barbaroole.

t Koor kasta waa barbaroole.

J LabaJibbaarane kastaa waa qardhaas.

x Laydi kasta waa labajibbaarane.

kh Laba Jibbaarane koor wuu noqon karaa.

Laylis

1 ***Afar-dhinac layaasha hoos lagu muujiyay dhinacyada dhereradoodu ka maqanyahay adiga oo aanan cabbirin qor.***

	BTJX waa *barbaroole*. Sidaas darteed, Dhererka dhinaca XJ = _____ sm. Dhererka dhinaca BX = _____ sm.
	BTJX waa *laydi*. Sidaas darteed, Dhererka dhinaca JX = _____ mm. Dhererka dhinaca XB = _____ mm.
	RDSF waa *laba Jibbaarane*. Sidaas darteed Dhererka SF = _____ sm. Dhererka FR = _____ sm. Dhererka RD = _____ sm.

2 ***Afar-dhinadayaasha hoos ku xusan kee ayaanan ahayn barbaroole***

b LabaJibbaarane **t** qardhaas **j** koor **x** Laydi

3 *Kee ayaa laydi iyo qardhaas labadaba ah*

b labaJibbaaranee **t** barbaroole **j** koor.

Hawgal 9

1 Baraha (dhibcaha) hoos ku sawiran si daggan oo farsama leh, buugaaga ugu guurii. Baraha (dhibcaha) la isku xidhiidhiyay afar-dhinaclaha ka samaysmay marka aad sawirtid dabadeed qor magaca afar dhinaclaha.



2 Idinka oo tiigsanaya barihiina fasalka dhexdiisa iskooxeeya oo shan koo xood abaabula (sameeya). Kadibna shanta afar-dhinacla yaa sha ee ad soo barateen. Shantiina kooxood inta ad kala qayb qayb satin kooxkastaaba kaartoon adag ha ku sawirto. Dabadeed na kooxkastaaba afar-dhinaclaha ay sarwirtay astaamihiisa fasalka u kadhaadhiciso.

Waydiin dheeraad ah

Raadi oo hel

Shaxanka dhinaca middigta lagu muujiyay.



1 Immisa laba Jibbaarane ayuu leeyahay.

2 Immisa laydi ayuu leeyahay.

6.4 GOOBO

Idinka oo adeegsanaya waxyaalaha agagaar kiina. Laga helo ayaad goobada sawiri kartiin.

Dun yar iyada oo la adeegsanayo sida Goobada loo sawiro



- *Dun yar inta ad qaadid labadeeda cidhif isku gunud (xidh)*
- *Kadib laba qalin qori ayaan inta an dunta galino an mid qotominay naa oo an xajinaynaa si uunan u dhaq dhaqaaqin. Ka labaadna anaka oo dunta giijinayna ayaan waree jinayna. Sidaas ayaan goobada u sawirayna.*
- *Barta aan qalinka hore ku qotominay waxa loo yaqaanaa xudunta goobada.*
- *Sido-kale si an goobada u sawirno waxaan isticmaali karnaa waraaq yar oo aan labada dhinac ka daloolino kadibna sida sara lagu soo sheegay marka dunta la isticmaalayo ayaan falawgeed qabanay naa.*

Hawlgal 10

Adiga oo adeegsanaya shayaasha ad agagaarkaaga ka heshid sawir goobooyin kala waawayn.

Ufiirso



- Goobadan waxa lagu magacaabay **goobo x**
- Barta x waxa loo yaqaana **xudanta** goobada
- Laba barood oo goobada dusheeda ku yaala xariijinta isku xidha waxa loo yaqaanaa **boqon.** Sidaas darteed xariijinta BJ waa boqon.
- Bogonka dhax maraa xudunta goobada waxa loo yaqaanaa **Dhexroor.**
- Xariijinta isku xidha xudunta goobada iyo bar ku taala goobada dusheeda (meeriska goobada) waxa loo yaqaanaa. **Gacan.**
- Xusuuso: Dhererka Gacanku waa dhererka dhexroorka badhkii.

Hawlgal 11

Goobada dhinaca middigta lagu muujiyay adiga oo xiganaya (fiirinaya)



1 Qor xudunta goobada.

2 Qor boqonada goobada.

3 Qor dhexroorka goobada.

4 Qor gacanka goo badu.

Laylis 7

1 *Sawiradan hoos lagu muujiyay kee baa goobo ah.*



b t j x

2 Sawirka gacan muujinaya dooro.



3 Dhexroor sawirka tusaya (muujinaya) dooro.



4 Boqon sawirka tusaya (muujinaya) dooro.



5 ***Goobooyinka hoos lagu muujiyay ufiirso ka dibna meelaha bannaan buuxi.***

a		b	
	Gacan = _____ sm dhexroor = _____ sm		Gacan = _____ sm dhexroor = _____ sm

Sida loo sawiro goobo iyada oo la adeeg sana yo qalabka loo yaqaano goobeeye (kombaas)

Goobeeye waa qalab loogu talagalay in la adeegsado marka la sawirayo goobo.

Sidan soo socota ayaa qalabka goobobeegta loo isticmaalaa marka la sawira yoo goobo.



- *Dhererka gacanka loo baahan yahay ayaa irbadda iyo qalin qoriga cidhifkiisa lagu cabbiraa*
- *Irbadda goobobeegada bar ku qotomi Bartaa oo noqon xudunta goobadda.*
- *Qalin qoriga goobobeegada xudunta hareeraheeda oo waraaqda dusheeda ah ku wareeji*

Hawlgal

1 Buugaaga ku sawir goobo dhererka gacankeedu 3 sm yahay.

2 M ku magacaw xudunta goobada

3 Gacan sawir oo ku magacaw ML

4 Dhexroor sawir oo ku magacaw QF

5 Boqon sawir oo ku magacaw GS

6 Barta M boqon dhax mara sawir oo kumagacaw BT.

BT magaciisa kale sheeg.

Laylis 8

1 Shaxdan hoose dhamaystir

Gacan	2 sm	5 sm		9 sm		15 sm	
Dhexroor	4 sm		16 sm		26 sm		36 sm

2 Weedha han soo socda u kala saar run ama been

b Goobo kasta dhererka gacanadeedu way isle'eg yihiin.

t Boqon iyo dhexroor waa isku mid.

j Dhammaan boqonadu way isdherer le'eg yihiin.

x Baraha goobada dusheeda ku yaalaa fogaansha ha ay xudunta u Jiraan way kala duwanaan kartaa.

kh Dhexroorku waa boqonka ugu dheer.

d dhererka dhexroorku waa dhererka gacanka badhkii.

Cutubka

7aad

LACAGTA

7.1 Iskubedelidda Halbeegyada lacagta (Sarrifaada lacagta)

Xisaabta fasalka labaad waxaad xasuusan tahay in aad ku soo baratay saantiimyada (duruurida ama qadaadiicda) Itoobiya. Kuwaas oo ah. Kuwaan hoos lagu muujiyay

1 Saanti	5 Saanti	10 Saanti	25 Saanti	50 Saanti	100 Saanti /1 Birr

Lacagta Itoobiya ee noodhyada ahna waa kuwan hoos lagu muujiyay

5 Birr | 10 Birr | 50 Birr | 100 Birr

Hawlgal 7.1

1 Idinka oo koox koox isku qaybinaya iswarsada oo falanqeeya halbeegyada lacagta Itoobiya, kadibna cadeeya sida ay isugu dhigmaan.

2 Halbeega lacagta ee noodka ah ku bedala (ku sarrifa) halbeegyo yar-yar oo lacagta noodhyada ah.

b

1 noodh oo boqol birr ah
= _____ noodhyo oo konton birr ah.

t

1 noodh oo konton birr ah
= _____ noodhyo oo toban birr ah

j

1 noodh oo shan birr ah
= _____ noodhyo oo hal birr ah.

x



1 noodh oo konton birr ah

= _____ noodhyo toban birr ah
= _____ noodhyo oo shan birr ah iyo
= _____ noodhyo hal birr ah.

97 saantiyo ku bedala halbeegyo beesado (qaadaadiic) ah oo ka kooban beesada. Kontonka saanti tobanka saanti, beesada shanta saanti, iyo beesada halka saanti.

Sidaas darteed 97 saanti
= 1 beesad oo konton saanti ah 4 beesadood oo tobano saanti ah 1 beesad oo shan saanti iyo 2 beesadood oo hal saanti ah

Idinka oo isticmaalaya beesadaha 25 saanti 10 saant; 5 saanti iyo 1 saanti sheega sida kale ee 97 saanti loo bedali (loo sarrifi).

Laylis 1

1 **b** **t** **j**



_____ Birr

_____ Birr

_____ Birr

2 **b** 1 noodh oo konton birr ah waxa lagu sarifi karaa ____ noodhyo oo shan Birr ah.

t 3 noodhyo oo boqol birr ah waxaa lagu sarrifi karaa ____ noodhyo oo konton Birr ah.

3

b

_____ saanti

t

_____ saanti

j

_____ saanti

x

_____ saanti

kh

_____ saanti

d

_____ saanti

4 ***Waydiimahan hoose ka jawaab***

b 3 birr imisa beesadood oo midwaliba ay 25 saantiim tahay ayay noqon?

t 10 birr imisa beesadood oo midwalba ay 50 saantiim tahay ayaa lagu sarifi?

j 5 birr imisa beesadood oo midwalba ay 10 saantiim tahay ayaa lagu sarifi?

x 2 birr imisa beesadood oo midwalba ay 5 saantiim tahay ayay noqon.

kh 2 birr iyo konton saantiim imisa besadood oo midwaliba ay 25 saantiim tahay ay noqon.

5 ***Raadi laba wado oo lagu sarifi karo lacagta hoos ku tilmaaman***

b	3 birr	**t**	55 saantiim	**j**	74 birr
x	68 saantiim	**kh**	26 saantiim	**d**	1 birr iyo 25 saantiim

7.2 Weedh-xasaabedyolaxidhiidhalacagteena

Hawlgalka 7.2

Laabis

30 saanti

qalin qori

1 birr

buug

2 birr iyo 50 saan

qalin

1 birr iyo 80 saanti

Qashiirad (qalin qorto)

65 saanti

1 Waxyaalaha hoos lagu muujiyay in aad iibsatid inta lacag ee aad u bahnaan xisaabi.



2 Haddii aad iibsatid 1 buug, 1 qalin qori iyo 1 qalin imisa birr iyo imisa saantiim ayaad bixin?

3 Axmed wuxuu iibsaday 1 Laabis, 1 qalin qorto (qashaarad) iyo qalin qori lacagta uu ku bixiyay waa imisa?

4 5 birr haddii aad haysatid inta qalabka loo adeegsado qorista ee aad mar ku iib-san karaysid qor.

5 Cabdi wuxuu iibsaday 1 qalin qori iyo 1 Laabis, Haddii uu 2 birr bixiyo imisa ayaa loo soo celin?

6 Xaliimo waxay iibsatay 1 laabis iyo 1 buug. Hadaba haddii ay 3 birr bixiso imisa saantii ayaa loo soo celin?

7 Yusuf wuxuu haystaa 3 lacagta saantiyada ah oo konton, konton saantiimyo ah, 5 toban toban saantiimyo ah iyo 5 shan shan saantiimyo ah. Hal buug in iibsado imisa saantiim ayuu u baahan yahay.

Laylis 2

1 Qof khudaarta ka ganacsada ayaa khudaarta uu iibiyo waqti go'an sicirkooda sidan hoos ku tusan shaxan ku qaray oo dukaankiisa ku dhaJiyay.

Nooca khudradda	Qiimaha 1kg
	5 Birr
	4 Birr
	6 Birr
	1 Birr iyo 25 saant

b 2 kg oo tamaandha qiimihiisu waa imisa?

t Haddii aad iibsatid 1 kg oo baradho ah iyo 1kg oo basal ah. Imisa ayaad bixin?

j qiimaha 1 kg oo tamaandha ah 1 kg oo baradho ah iyo 1 kg oo Qaji (basbaasta cagaaran) waa imisa?

x Caasha waxay iibsatay 1kg oo basal ah iyo 1kg oo qaji ah Haddii ay bixiso 8 birr imisa ayaa loo soo celin?

Kh Nus kiilo baradho ah haddii aad iibsatid imisa ayaad bixin?

2 Khadar wuxuu haystaa 1 birr. Haddi uu 78 saanti ku iibsado salool imisa ayaa u hadhi?

3 Siciid wuxuu haystaa 3 lacagta qadaadiicda ah oo midkii waliba yahay labaatan iyo shan saantiim. 60 saantiim haddii uu kabihiisa ku baalishaysto imisa ayaa u soo hadhi?

4 Xaawa Aabaheed wuxuu siiyay 100 birr si ay dhar ugu iibsato. Haddii ay 48 birr ku iibsato diric 25 birr na malkhabad, imisa ayaa u soo hadhay?

Cutubka

8aad



WAQTIGA (AMA AMINTA)

8.1 AKHRINTA SAACADDA

Hawlgal nakhitiimeed 8.1

Saacaddahan hoos ku xusan waqtiga (aminta) ay tilmaamayaan sheega.



Halabeegyada an ku cabbirno waqtiga (aminta) waxay kala yihiin saacad, daqiiqad iyo ilbiriqsi

U fiirso waqtiga saacada. Gacanta gaaban waxay tilmaamtaa (tustaa) saacadaha waa saacad tiriso.

Gacanta dheer waxay tilmaamtaa (tustaa) daqiiqadaha, waa daqiiqad tiriso

Waqtiga saacadu waxay u qaybsan tahay toban iyo laba qaybood oo isle'eg. Qaybtii kastaana waxay hadana u qaybsantahay shan qaybood oo yaryar oo isle'eg.

Gacanta gaabani (ama saacad tirisadu) astiro ilaa astiro ku xiga waxay u socotaa 1 saac. Hal wareeg meeshay ka bilowday markay ku soo nooto waxay u socotaao 12 saacadood. Sidaas darteed saacad tirisadu marka ay 12 ka kacdo oo ay 1 isdultaagto ama kabasoo qaad 3 inta ay ka kacdo ay 4 isdultaagto waxaan odhanaynaa 1 saac ayaa tagay ama dhaafay.

Daqiiqad tirisadu (gocanta dheer) xaradh yar ilaa xaradh ku xiga waxay u socotaa 1 daqiiqo. Sidaas darteed astiro ilaa astiro ku xiga waxay u socotaa 5 daqiiqadood.

Hal wareeg meeshay ka bilowday markay ku soo noqoto waxay u soco taa 60 daqiiqadaad sidaas darteed daqiiqad tirisadu maka ay 12 ka kacdo oo ay 1 isdultaagto waxaan odhanaynaa 5 daqiiqadood ayaa tagay ama dhaafay.

Saacadani waxay tilmaamaysaa 1 saac iyo 25 daqiiqadood. Waxana loo qoraa 1:25

Hawlgal 8.2

Saacadani waa saacada gidaarka. Imisa saac ayay tilmaamaysaa?

Hodan iyo Faadumo oo laba saaxibo ah ayaa saacadan gidaarka kor u eegay. Kadibna, Hodan waxay tidhi saacadu waa 2 saac iyo 45 daqiiqadood. Faadumo na waxay tidhi saacadu waa 3 saac oo 15 daqiiqadood la'(dhiman). Labada saaxiibo sida ay saacada u akhriyeen miyay kala duwantahay? Falanqeeya.

Laylis 1

Saacadaha qoraalka lagu cadeeyay laba siyood (wado) u sheega.

1 5:40 5 saac iyo 40 daqiiqadood ama 6 saac oo 20 daqiiqadood la' (dhiman).

2 4:50 _____ ama _____.

3 6:30 _____ ama _____.

4 12:55 _____ ama _____.

5 7:40 _____ ama _____.

6 8:35 _____ ama _____.

Sawirka saacada eeg oo qor

7

4 : 10

Ama 4 saac iyo 10 daqiiqadood

8

___ : ___

Ama _____

9

___ : ___

Ama _____

10

___ : ___

Ama _____

11

___ : ___

Ama _____

12

___ : ___

Ama _____

Saacadahan hoos ku tusan goorta (aminta) ay tilmaamayaan astiro ku qor.

13

6 : 30

Ama _____

14

___ : ___

Ama _____

15

___ : ___

Ama _____

16

___ : ___

Ama _____

Sawir saacad tilmaamaysa goorta (aminta) hoos lagu sheegay

17

3 : 20

18

5 saac oo 20 daqiiqadood l'a

19

11 saac iyo 28 daqiiqadood

20

6 : 13

8.2 SAACAD IYO DAQIIQAD

Hawlgal 8.3



1 Saacad tirisadu marka ay 12 ka kacdo oo ay 1 isdul taagto imisa saac ayaa dhaafay (ama tagay)?

2 Daqiiqad tirisadu marka ay 12 ka kacdo oo ay 1 isdul taagto imisa daqiiqadood ayaa dhaafay (tagay)?

3 Saacad tirisadu marka ay 12 ka kacdo oo ay 1 isdul taagto daqiiqad tirisadu imisa daqiiqadood ayay martay (ama ay socotay)

Ufiirso saacda iyo daqiiqada xidhiidh ka ka dhaxeeyaa waa sidan hoos lagu muujiyay.

1 saac = 60 daqiiqadood

- Saacad marka ad daqiiqado u baddalaysid 60 ku dhufo saacadda.

Tusaale

2 saac. waa imisa daqiiqadood?

Sidaas darteed 2 × 60 = 120 daqiiqadood

Sidaas darteed 2 saac waxay la mid tahay ama ay u dhigantaa 120 daqiiqadood.

Furfuris:

- Xasuuso 1 saac = 60daqiiqadood.

Hawlgal 8.4

Shaxdan hoos lagu muujiyay meelaha bannaan buuxi.

Saacado	1	2		4	5	
Daqiiqado	60		180			150

Laylis 2

1 Galinka hore casharada dugsiga lagu bartaa waxay qaataan muddo ilaa 4 saac ah. Galinka dandbe na casharada la bartaa waxay qataan muddo ilaa 2 saac ah. Dhamaan ilaa imisa saac ayaay casharada maalintu qaataan?

2 Ismaaciil waydiimo caharka xisaabta ah oo shaqo guri ahaan loo siiyay haddii u 25 daqiiqadood, kaga shaqeeyaay sido kale casharka saayniska na 15 daqiiqadood dhamaan labada cashar shaqadoodu imisa saacadood ayay ka qaadatay?

3 Khadija maalinkasta 8saac ayay waxbarsho dugsiga u joogtaa. Guriga marka ay ku soo noqoto na mudo 2 saac ah. Casharada ayay xafidaa. Guudahaan malinkasta imisa saacadood ayay ku qaadataa waxbarashada dugsigu iyo xafidaadda casharadeedu.

4 Ibraahim iyo Idiris oo isku fasal ah ayaa imtaxaan u fadhiistay. Ibraahim imtaxaanka dhamayntiisa waxay ku qaadatay mudo 38 daqiiqadood ah. Idiris na wuxu imtaxaanka ku dhameeyay mudo 45 daqiiqadood ah. ibraahim xiliga u imtaxaanka dhameeyay imisa daqiiqadood ayay ka horaysaa xiliga u Idiris imtaxaanka ku dhameeyay.

8.3 Maalmaha Todobaadyada, Bilaha iyo Sanaddaha

Hawlgal 8.5

Maanta Naasir gurigooda waxa lagu xusay sanad guuraha koowaad ee dhalashada Naasir.

b Naasir marka u dhashay imisa bilood ayaa ka soo wareegtay?

t Imisa toddobaad ayaa laga joogaa maalinta u dhashay?

Shaxda Hoos, lagu muujiyay waxa lagu tilmaamay halbeegyada kala gaddisan ee waqtiga (aminta) lagu cabbiro iyo xidhiidhka ka dhaxeeya.

1 saac = 60 daqiiqo

1 maalin = 24 saac

1 toddobaad = 7 maalmood

1 bil = 30 maalmood

1 sano = 52 toddoobaad

1 sano = 12 bilood

1 sano = 365 maalmood

Laylis 3

1 Xuseen ayaa saaxibadii la ciyaaray mudo 1 saac ah. Xuseen iyo saaxibadii imisa daqiiqo ayay ciyaa reen?

2 Axmadyaasin ayaa Awawgiis oo miyiga ku nool booqasha ugu tagay oo mudo 2 toddobaad ah la soo joogay. Axmadyaasiin imisa maalmood ayuu miyiga joogay?

3 Hal sano dhaxdeeda mudada waxbarashadu waxay dhantahay ilaa 10 bilood. Sanadka mudada wax barashadu ilaa imisa toddobaad ayay dhantahay?

4 Hamle iyo Nahaase waa bilaha ay ardydu fasax yihiin Fasaxa ardaydu waa imisa maalmood?

Halbeegyada goorta ee joog labada saf B, iyo T ku kala qoran isku aadi kuwa isku-dhigma.

B		T	
5	52 toddobaad	**a**	1 maalin
6	24 saac	**b**	1 bil
7	30 maalmood	**c**	24 saac
8	1 maalin	**d**	1 sano
9	12 bilood		

Waydiin dheeraad ah

10 Maalin lagu maamuusayay Maalinta calanka haddii la soo dhaafay 40 toddobaad. maalintaas lagu maamuusay maalinta calanka in ay hal sano noqoto imisa toddobaad ayaa u hadhay?

8.4 KALAANDARKA FUDUD

Hawlgalka 8.6

Uifiirso kalaandarkan hoos ku muujisan

Sane 2003						
Axad	**Isniin**	**Talaado**	**Arbaca**	**Khamiis**	**Jimce**	**Sabti**
			1	2	3	4
5	6	5	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

1 Maalmaha toddobaadku waa kuwee?

2 Sanadku imisa bilood ayuu leeyahay? Sheeg magocyadooda.

3 Kalaandarka sare ku xusan maalmaha bishe ayay tusaysaa?

4 Kalaandarka eeg oo sheeg bisha sane 5, 2003 maalinta ay tahay.

Taarinkda maalinta marka la qorayo waxaa la qoraa.

Maalinta bisha iyo sanadka sidaas darteed marka midahaan loo tilmaamayo sidan hoos ku xusan ayaa si gaaban loogu qoraa

maalin/bil/sanad

Tusaale:

Sane 5 sanadka 2003 marka la' soo gaabsho waxa loo qoraa 5/10/2003

2003 waxay tusaytaa sanadka u yahay

10 waxay tusaysaa in bishu ay tahay bisha tobanaad' bishaasina waxay tahay bisha sane.

5 waxay tu saysaa bisha sane maalinteeda shanaad.

Xasuusin:

Bilaha Itoobiya waa 13. 12 bilood waa min sodon maalmood . Bisah 13aad na waa Baagume oo 5 maalmood ama 6 maalmood (4 tii sanaba mar) noqota. 12 ka bilood oo bisha Maskaram ay tahay bisha koowaad ee sanadka waxaa wee yaan maskaram, Tiqimiti, Hidaar, Tahaasaas, Tir Yakaatiit Magaabit, Miyaasiya Gin-boot, Sane, Hamle iyo Nahaase.

Cutubka

9aad



URURINTA IYO HABAYNTA XOGAHA

9.1 Garaafi-Sawireed Fudud

Garaaf-sawireedka fa'aiidadiisu waxay tahay isaga oo si fudud loogu muujin karo xogo kala gadisan.

Hawlgal 9.1

Ardayda fasalka 3aad ayaan weydiiyey inay soo ururiyaan xog ku saabsan ciyaaraha isboortiga ee kala ah orod, kubbada cagta, waran tuuris in uu arday kastaa sheego midda u jeecelyahay.

Sidaas darteed-shaxankan hoos ku xusan ayey ardaydu ku muujiyeen natiijada ay heleen.

Ciyaarta isboortiga	Xariiq ku tiris	Tirada ardayda
Waran tuuris	////	4
Orod	~~###~~ ///	8
Kubada cagta	~~###~~ ~~###~~ //	12

Ogsonow: xariiq ku tirintu waa habka xariiqyo yar yar la isticmaalo ee ugu degdeg badan marka xogaha la ururinayo.

1 Ardayda fasa1ku intooda u badani ciyaartee ayey jecely ihiin?

2 Ciyaarta ay ardayda ugu tirada yar ay jeceshahay waa ciyaartee?

Xogtan korka shaxda lagu muujiyey waxa loo habayn karaa in inta halkii arday-ba lagu tilmaamo sawirka dabadeedna xogta lagu muujiyo sawir-giraaf.

3 Tirada ardayda orodka jecel si loogu muujiyo giraaf sawireed imisa 🧍 ayaa la sawirii?

4 Tirada ardayda kubada cagta jecel si loogu muujiyo giraaf sawireed imisa 🧍 ayaa la sawiri?

5 Sidoo kale in giraaf-sawireed lagu tilmaamo inta waran tuurka jecel imisa 🧍 ayaa loo baahan yahay in la sawiro?

Giraaf-sawireed tusaya ciyaaraha isbortiga ee orodka kubada cagta iyo waran tuurka; sida ay ardayda fasalka 3aad u kala jecelyijhiin.

Waran tuuris	🧍🧍🧍🧍
Orod	🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍
Kubada cagta	🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍🧍
Sawirkani 🧍 midkii kastaba wuxuu matilayaa ama wakiil u yahay hal arday.	

Raac talooyinkan hoose si aad u sawirtid giraaf-sawireed.

b *Xogta la ururiyay sawir u dooro*

t *Goaanso xogkasta inta sawir ee aad jmuujinaysid.*

j *Xogta sawir ku muuji.*

x *Cinwaan ku magacaw garaaf sawireedka; hoostiisana ku qor cadayn sheegaysa halkii sawir inta u wakiil uga yahay.*

6 Xogta lagu sharraxay shaxda dhinaca bidixda ku taala giraaf-sawireed ku muuji.

7 Marka aad sawiraysiin giraaf-sawireedka haddii labadii buugba aad ku matilaysid sawirkan 📖 10 buug tirada 📖 ee inaad sawirtiin ah iswarsada oo kawada xaajooda.

Maxamuud iyo saaxibkii labadii billood ee fasaxa tirada buugaagta sheekooyinka ay akhrieen

Maxamuud	///// /////	10
Cumar	///// /	6
Khadar	///// //	7
Carte	///// ////	9

8 Laba buug haddii aad ku matilaysid hal sawirkan 📖 ah hal buug sidee loogu matili karaa? Kawada xaajooda.

Laylis 1

1 Shaxda dhinaca midig ku muujisan eega, ka dibna fasalada heerarka kala gadisan tirada xubnaha ka tirsan ururka sayniska garaaf-sawireed muujinaya, sawira (sameeya).

Tirada xubnaha ka tirsan ururka sayniska		
Fasalka 1aad	//	2
Fasalka 2aad	////	4
Fasalka 3aad	### ///	8
Fasalka 4aad	### /	6
Fasalka 5aad	### ////	9

- *Ha iloobina inaad cinwaan siisiin garaaf-sawireed-kiina.*
- *Garaaf-sawireedka ad sawiraysiin in uu idin ka caawiyo hoos ayaa garaafka bilawgiisa laguu sameeyay*

Fasalka 1aad	
Fasalka 2aad	
.	
.	
.	

Halkii sawir hal arday

2 Ardayda aad saaxibada tihiin ee fasalkiina 5 ka doorta. Ka dibna weydiiya ay fasaxa yihiin inta saacadood ay shaqada qoyskooda ku caawiyaan. Xogtan shax muujinaysa marka aad samaysiin, dabadeed xogta ku diiwaaniya garaaf-sawireed muujinaya.

Hawlgal kooxeed

Ardayda fasalkiina laba kooxood u qaybiya koox B iyo koox T kadibna xogahan hoos ku xusan shax muujinaysa markaad u samaysiin dabadeed garaaf-sawireed ku muujiya.

Koox B khudaarta kala ah, muus, liinmacaan iyo cambalaf midka ay aad u jecelyihiin.

Koox T midabada kala ah casaan, doogo iyo buluuq midka ay aadka u jecelyihiin.

9.2 Sharraxidda (macnaynta ama tarjumida) garaaf-sawireedyada fudud

Garaaf-sawireed inta la eego ayaa si dhib yar sharraxaad looga bixin karaa, ama laga macnayn karaa xogta ku diiwaansan.

Hawlgal 9.2

Sahra ardayda fasalkeeda nooca ciyaaraha ay jecelyihiin garaaf-sawireed muujinaya ayay u diyaarisay sida dhinaca midigta ku xusan.

Nooca Ciyaarta ay ardayda Jaceshahay	
Kubada cagta	□□□□□□
Nashiido kucadayn	□□□□□
Isereryad	□□□
Dhumaalaysi	□□
Xadhig kubood	□□□□
Halkii □ waliba hal arday ayuu matilayaa.	

1 Nooc waliba oo ciyaaraha imisa arday ayaa ku diiwaanshan?

2 Ciyaartee ayay arday badani jaceshahay?

3 Ciyaarta xadhig kuboodka iyo nashiida qaadista midkee ayay arday badani jaceshahay?

4 Fasalka sahra ciyaarta ay arday tirada ugu yar ay jecshahay waa tee?

Laylis 5

1 *Saynab oo macalimad ah ayaa dugsiga ay ka barto dhabarkiisa danbe bannaanka ku yaala tirada geedo ay ardaydu ku talaaleen saddex maalmood garaaf-sawireed muujinaya ayay sida hoos ku xusan u diyaarisay*

Tirada geedaha la talaalay, Jimce ilaa Axad	
Jimce	▲▲▲
Sabti	▲▲▲▲▲▲▲▲▲
Axad	▲▲▲▲▲▲▲

Halkii ▲ hal arday ayay matilaysaa

b Maalintee ayaa geedo badan la talaalay?

t Maalin kasta geedaha talaalka ee la talaalay tiradoodu waa imisa?

j maalinta geedaha ugu tirada yar la talaalay waa maalintee?

x maaliintii sabtida geedaha la talaalay tiradoodu imisa ayay dheer tahay (ka badan tahay) tirada geedaha maalintii jimcaha la talaalay?

kh Saddex maalmood imisa geed ayaa la talaalay?

d Hal geed oo talaal ah haddii uu qiimihiisu yahay laba birr iyo konton saantiim, maalintii jimcaha geedaha talaalka ee la talaalay qiimahoodu waa imisa?

2 ***Garaaf-sawireedka hoos ku muujisan wuxu muujinayaa oo lagu diiwaaniyay magaalo dhaxdeed mudo shan bilood ah bisha sane ilaa bisha Tiqimti tirada maalmaha ee uu roob ku da'ay.***

Bisha sane ilaa bisha tiqimti tirada maalmaha ee uu roobku da'ay	
Sane	●●●●●●●●●●
Hamle	●●●●●●●●●●●●●
Nehase	●●●●●●●●●●●●◖
Meskerem	●●●●●●●●◖
Tiqimti	●●●●●●

Halkii ● 2 maalmood ayuu matilayaa

b Sawirkan ● midkastaa imisa maalmood ayuu matilayaa?

t Bil kasta tirada maalmaha u roobku da'ay waa imisa?

j Bisha uu roobku maalmaha ugu badan da'ay waa bishee?

x Bisha uu roobku maalmaha ugu tirada yar da'ay waa bishee?

kh Bisha sane iyo bisha Nahaase roobku midda uu maalmo badan da'ay waa bishee?

d Shanta bilood dhammaan maalmaha uu roobku da'ay waa imisa?

Hawlgal kooxeed

Garaaf-sawireed faaiiddiisu koox koox idinka oo ah iswarsada. Kadibna waxaad ka wada hadasheen ardayda saaxiibadiin ah ee fasalkiina u cadeeya.